# FAHAMKA NAFTEENU WAA FURAHA NOLOSHEENA

Somali Library

Buugaan iyo Buugaag kale ee

ku qoran Luqadaada Hooyo ee **Af-Soomaaliga**

waxaad ka heleysaa

Somali Library

Fadlan Booqo Boga Telegram-ka

https://t.me/Somalilibrary

liibaanwaasuge

***"Is waa fajay rabitaankaga iyo runta noloshaada"***

1. Daah fur (foreword) .... 8
2. Daah fur (labaad) .... 11
3. Mahad-naq (Acknowledgments) .... 13
4. HORDHAC .... 17
5. Muxuu ku saabsan yahay cilmu nafsigu .... 21
6. Baro Naftaada .... 26
7. Qaabaynta Nafsadda .... 33
8. Saamaynta aragtida waxa ku hareereysan (invironment) .... 33
9. SAAMAYNTA WUXUU MAQLAYO: .... 36
10. Saamaynta Waxa aan ku fikirno .... 39
11. Camalku waa niyada .... 49
12. Dabeecadda Nafsadda Aadanaha .... 54
13. Ruuxda & Nafta .... 55
14. Daawada dabeecadda insaanku waa iimaanka iyo cibaadada . 59
15. Haybta aadanaha .... 68
16. Karaamaynta Alle ee uu Insaanka karaameeyay .... 70
17. Mas'uuliyaddii uu Alle insaanka u dhiibay .... 78
18. Insaanka iyo xikmaddii loo abuuray .... 82
19. Baahida Insaanka ee ku saabsan Ilaah iyo wax la caabudo .... 88
20. Diintu waa xiriirka muuqda ee Alle iyo Aadanaha .... 97
21. Nafsadda Insaanka Iyo Rumaynta Diinta .... 104
22. Iimaanku waa daawada nafsadda .... 111
23. Nafsadda iyo camalka wanaagsan .... 118

24. Sidaad maskaxdaada uga faa'iidaysan lahayd ............................ 121
25. Sidaad u fikirto......................................................................... 122
26. Raaxada nafsadda ee xagga Diinta ........................................... 139
27. Jirrooyinka nafsadda ee soo caanbaxay .................................. 151
28. Kabidda nafsadda iyo kaalmaynta qofka................................. 153
29. Ciriiriga nafsadda (Stress) ........................................................ 158
30. Nafsadda Soomaalida maanta ................................................. 162
31. Danbiyada Insaanku galo asal waxaa u ah nafsad jabtay .... 166
32. Bakhaylnimadu waa xaalad nafsi ah ......................................... 170
33. Dhibtu waa furaha guusha ...................................................... 173
34. Adkaysiga iyo sabirku waa xaalad nafsi ah ................................ 177
35. Fasirka dhibka Soomaalida ...................................................... 180

**Qoraaga Buuga:**

Waa Shiikh Cabdiraxmaan Maxamed Jibril. Waa aqoon yahan Diinta Islaamka iyo Cilmu Nafsiga. Wuxuu aqoon dheeraad ah u leeyahay Cilmiga bulshada iyo siyaabaha ay bulshadu isu baddasho. Kadib Qaran jabkii

Qoraagu wuxuu fursad u helay inuu cilmu nafsiga ka barto Jaamacado ku yaal London iyo Macaahid waawayn ee Nairobi ku yaal.

Shiikhu waa la taliye xagga bulshada iyo shakhsiyaadka labadaba. Dad badan oo Soomaaliyeed ayaa ka faa'iidaystay la kulankiisii iyo wacyigalintiisa. Kadib markii ammaankii iyo nabaddii dalku xumaatay, wuxuu xoogga saaray inuu dadka ka waaniyo, war baahinta dhexdeeda; sida TV yada Soomaalida, Raadiye yaasha iyo kulamada khaas ka ah.

Kadib markii wuu fahmay cilmu nafsiga iyo cilmiga bulshada ayuu si fiican oo aad u cad u sii fahmay diinta Islaamka oo uu daraasaynayay muddo ka badan 30 sannadood. Khibradaas dheer ee xagga diinta Islaamku waxay u fududaysay inuu fahmi karo baahida dadka iyo sidii loo caawin lahaa. Si dabeeci ah oo aan sicad sirteeda loo garan Karin ayaa shiikhu dad badan ku caawiyay oo uu sabab u noqday in dhibtoodii dhammaato. U fiirso, Qof isku helay faham xeel dheer oo ku

saabsan hanuunkii iyo Nuurkii Alle inoo soo dajiyay iyo fahamka cilmu nafsiga casriga ah; isla markaasna leh khibrad bulsho iyo wakhti dheer oo uu ka shaqaynayay caawinta iyo sama-falka bulshada.

Waa Kansi wayn oo aysan sahal ahayn in meel kale laga helo. Waayo culumada cilmu nafsigu dib uma fiiriyaan warna kama hayaan Quraankeenna kariimka ah, sidoo kale dadka Diinta ka hadla, waxay diinta u yaqaannan sidii loogu sheegay oo dhaqanka ahayd oo ay soo gaareen, laakiin ma badna inta ku fakarta oo u fiirsata. Ma badna mana arag anigu cid isu daloolisay labada darbi ee kala xirnaa- Quranka iyo Cilmiga casriga ah- oo kala soo baxday culuumtii iyo cilmigii dhex hurday, sidaas awgeed waa mid laga wada faa'iidaysan karo.

Dhibaatooyinka waaweyn ee aadanaha la kulma, gaar ahaan Soomaalida aadka ugu badan, qofkasta oo Soomaali ah way soo martay ama way haysataa. Markii u horaysay,

Shiikhu wuxuu xalliyay ama sabab u noqday inuu xalkeeda helo, wareerkii baaxadda waynaa ee Soomaali ku habsaday, isaga oo naftiisa iyo dad badan oo kaleba ka dhaqay am ka xalliyay. Wuxuu naftiisa ku caawiyay inuu ka raysto murug iyo wareer badan oo uu ka dhaxlay, dagaaladii iyo burburkii dalka Soomaaliya. Wuxuu qaaday waddo ka duwan midda Soomaalidu u badan tahay, oo raaxo iyo daganaan badan leh, aanse niraahno waxaas oo dhan waa awoodda Alle iyo waafajintiisa ee ma aha garasho iyo awood shakhsiyadeed.

Maadaama Shiikhu ahaa muddo dheer la taliye xagga shakhsiyaadka iyo guud ahaan bulshada, wuxuu hadda awood u helay inuu Buugaan ku soo godbiyo culuumta daawada iyo isbaddalka qaar ka mid ah. Waa hubaal, aan shaki ku jirin inaad buuggaan ka helayso daawo iyo xal arrimo badan oo naftaada dhibayay wakhti dheer. Waxaad heli doontaa daawo xagga nafsaddaada dhexdeeda ah, waxaadna xallin doontaa dhibaatooyinka xagga dhaqaalaha iyo xagga xiriirka dadka kaa haysta. Waxaad fahmaysaa nafsaddaada, kadibna nafsadaha dadka kale iyo sida ay u shaqeeyaan. Waxaad ka baxaysaa qol yar oo aad ciriir u ah oo aad ku rafaaday. Waxaad galaysaa oo aad fahmaysaa caalam waasac ah oo khayrka yaala iyo naxariistiisu aad u badantahay.

Fadlan haka shakin hana ka baqin tilmaamaha muhiimka ah ee buuggaani ku siinayo. Si dagan oo aad u fiirsato waxa loola jeedo erayada iyo macnahooda u akhriso, si aad u gasho nolosha aad ku jirto mid ka baddalan oo ka tayo badan dhinacwalba. Guul iyo Barwaaqo Ayaan kuu rajaynayaa.

## Daah fur (foreword)

Qareen. Axmed Sheikh Waa qoraa caan ah, oo Buug badan qoray. Wuxuu ahaan jiray Guddoomiyaha Maxakamadda Racfaanke ee Gobolka, Banaadir, waayihii Soomaaliya.

بسم الله الرحمن الرحيم. الحمد لله الذي فضل اهل العلم علي الذين لايعلمون . وبعد:

Waxaa farxad weyn ii ah, in ilaahay ii sahlay akhrinta kitaabkan cilmiga ah, inta uusan gacanta u galin dad weynaha kale, aniga oo aad iyo aad ujeclaystay mawduuca buuggaan, ayaan dhab ahaan u eeg- eegay, carabkana mariyay, dhammaan bogagiisa iyo sadaradiisa.

Waxaan la yaabay, qiimaha buugga iyo sida uu noociisa kaligi ugu yahay qoraalka Soomaalida, iyo sida uu wax uga badalayo, qofkii akhriya, saamayn weyna ugu yeelanayo hab fakarkiisa. Waxaan mahad u celinayaa Ilaaha ka hufan xumaan oo dhan, lehna ammaan iyo awood oo dhan, oo isagu, usahlay qoraaga kitaabkan qoristiisa.

**Faalada kitaabka oo gaaban, waa sidaan:**

Kitaabku, waa kitaab cilmi ah. Gaar ahaan wuxuu ka mid yahay fanniga cilmu nafsiga, hase ahaatee, dadaalka uu sameeyay qoraagu iyo aqoonta ka muuqata sharaxaadiisa, iyo sida uu xal ugu raadiyay arimaha uu uga hadlay kitaabka,

waxay leeyihiin layaab. Aan si gooniya u eegno sida uu uga hadlay:

a. Nafsadda bani'aadamka iyo noocyadeeda iyo saamaynta ay ku leedahay noloshiisa.

b. Tarbiyada iyo sida wax loo tarbiyeeyo.

c. Khilaafka bani'aadamka iyo waxa uu ku taaganyahay, daaweyntiisa iyo sida la-isu-afgaran karo.

d. Rumeynta Eebbe iyo aaminida diinta uu soo dajiyay, waxtarka ay uleedahay dadka nolashiisa iyo mustaqbalkiisa.

e. Khatarta iyo halaagga ay u leedahay dadka nafsaddiisa, diin la'aanta iyo Ilaah rumayn la'aanta.

Marka aad akhriso intaas waxaad ku qancaysaa, in uu yahay qoraagu, nin aqoon heersare ah u leh Qu'raanka Kariimka ah, iyo cilmu- nafsiga labadaba. Taasaana keentay in kitaabkaan, inkasta oo aan iri wuxuu ka mid yahay cilmi nafsiga, haddana wuxuu umuuqdaa, inuu ka xeel-dheer yahay, ama ka duwanyahay cilmi nafsiga caadiga ah ee ay qoraan aqoon yahanno maadi yaqaan balse aan diin shaqo ku lahayn.

Waxaa saldhig u ah, Kitaabkaan, aayadaha qur'aanka Kariimka ah.

Kitaabkaan qofkii akhriya faa'iidooyinka iyo nasteexooyinka uu ka helaayo, iyo sida uu naftiisa usaamaynayo, majiro kitaab fannigiisa ah, oo uu ka helaayo. Ayada oo ay hubaal tahay, qofkii Ilaah waa fajiyo akhrintiisa oo si dhab ah ufahma ama u garta, ay wax iska badalayaan. Isla markaasna, uu ku yeelanaayo naftiisa saameyn weyn.

Si weyn ayuu qoraagu uga hadlay nafsada noocyadeeda iyo saameyteedaba, asaga oo si faah faahsan usharaxay mashaakilka nafsadda iyo sida loo daaweyn karo.

Waa loo baahnaa in sida qoraagu uga hadlay nafsadda looga hadlo, wax wayn ayay fahamka Soomaalida ku soo kordhinaysaa.

Ugu dambeyntii aniga oo aad iyo aad mahad ugu celinaya qoraaga, hawsha uu qabtay, oo anfacaysa banuu'aadamka oo dhan, gaar ahaan ummadda soomaaliyeed, oo lahubo in ay ka helayaan hadii ay akhriyaan kitaabkan, arimo daawo u noqon kara khilaafaad-kooda, iyo dhibaatada kala gaartay, una soo jiidi-karta, midnimo, iyo walalnimo. Waxaan soo jeedinayaa in booggaan, lagu turjumo luqadaha, Carabiga, English-ka, iyo kisawahiliga, si loo gaarsiiyo faa,iidadiisa caalamka oo dhan.

Qoraa: Axmed Shiikh Ali (Buraale)

## Daah fur (labaad)

Way badan yihiin waxa la qoro, sayladaha adduunkana waxaa la keenaa buug kala duwan qadar iyo qiimaba, haseyeeshee waxaa aad uyar waxa ka xasila wadarta sidaa ubadan ee gala kaydka wax ku oolka ah ee hal abuurrada wax qora. Waxan akhriyay buugaag badan oo afsoomaali lagu qoray, mana arag wax la mid ah buuggan miiska ii saaran ee (***fahamka nafteenu waa furaha nolosheenna***).

Kama badbadinayo kumana sheegayo wax uusan ku mudan inuu ka mid noqday buugagta haddiiba ku dul qormay kasmada madaxayga ee aan ka fuqi waayay jeer aan idleeyay tiro ka badan mar.

Waxay ila tahay inuu istaahilo aniga xagayga buugga ugu mudan ee abid afsoomaali lagu qoray. Ma doonayo inaan ka hor dhaco dhinacyada la majeerto ee ku dhaadan dhadhanka iyo dhab ka hadalnimada buuggan aan hubo inuu dhab wax oga badali doono dhibaatooyinka haysta bulshada muslimka ah kuwooda afkan ku hadla. Buugga waxaa iiga muuqda wax ku oolnimo la hubo inay waayo badan ku waari doonaan maanka ruux kasta oo si dhego wadani ah u dheehda ee dhadhansada miidda isu dheelitiran ee fadhida dhamaan cutubyada buugga.

Waxaan ku rajo weynahay inuu buuggan mar la aragga ah uu si sahlan udaah furi doono xal waara, si fiicanna sahay usiin kara Soomalida qarniyo badan ku silicsaneyd daafaha dunida.

Guntii iyo gunaanadkii hadaan aragtidayda gaarka ah tiraabo; Waxaan buuggan cajabta badan ugu walqali lahaa buuggii qarnigan ay wax badan ka qaadan lahaayeen qalinleyda soomaliyeed ee ay ka dhab tahay qaban qaabada badbaadinta bulsho muddo dheer ka qatanayd qormooyin u faa'iideeya qotominta nolol qaymo leh.

**Sh. Cabdullaahi Maxamed Xusen. (Galinsoon)**

## Mahad-naq (Acknowledgments)

Waxaa jira dad badan oo noloshayda qayb wayn ku leh, abaal ballaaranna aan u hayo. Halkaan kuma soo koobi karo magacyadooda, laakiin runtii dhammaan qalbiga ayaan ku hayaa. Marka laga reebo labadii waalid ee isoo koriyay iyo qaraabadii kale ee ii dhawayd ehel ahaan, waxaa naftayda raad weyn oo dhinac walba ah ku yeeshay dadkii aan xarakada Islaamiga ah "Al-itixaad" ku wada jirnay/ ka wada shaqaynaynay. Runtii mudadaas 1980 ilaa 1997 waxay ii ahayd dalxiiskii iyo koritaankii nolosha. Waxaan soo marnay oo raaxadii xagga fikirka iyo ruuxda ahayd wax laga sheekayn karo ma ahayn.

Marka waxaan halkaan uga mahad celinayaa dhammaan dadkii aan ku kulanay safarkaas raaxada badnaa ee xagga nolosha, fikirka, ruuxda ahaa.

Si gaar ah waxaan ugu mahad celinayaa dadkaan:

1. Xaas kayga Luul Axmed Diiriye oo i siisay wax kasta oo aan u baahnaa oo uu ugu muhiimsan yahay jacayl iyo

daacadnimo aan xad lahayn. Luul, sida caadada u ah gabdhaha Soomaaliyeed, ma aysan jeclayn in magaceeda lagu xuso buuggaan, lagana sheekeeyo xiriirkii sirta u badnaa ee na dhex maray. Laakiin aniga ayaa ku adkaystay, inaan caadadaas jabiyo oo aan si cad u dhaho mahadsanid Luul.

2. Shiikh Maxamed Cusmaan; oo runtii noloshayda qayb wayn ka qaatay. Wakhtigii baahida jirka, maskaxda iyo nafsadda, lagu daro qurbaha iyo baqdinta ayuu i siiyay shaqo fiican oo aan aad ugu soo kabtay. Wax badan ayuu igarab istaagay markii aan u baahnaa, aad iyo aad ayaan ugu mahadcelinayaa Shiikh Maxamed. Allaha ka abaal mariyo. Sidoo kale, Shiikh Maxamed Qaasim; ma illaawi karo sidii uu ii caawin jiray, markii uu hanti haystay, anna aan fara marnaa.

3. Shiikh Cabdullaahi Maxamed Xuseen. (Galinsoon) oo ahaa meesha aan ugu noqdo wehelka iyo dhiirigalinta. Wuxuu diiday inuu iga tago ama iga go’o kadib markii in badan oo saaxiibadayda ka mid ah, igu naceen afkaartayda Isbaddaldoonk ah.

4. Khaliif Cabdiraxmaan Maxamed. (Garoon) Wuxuu ahaa ilaa haddana yahay, meesha aan ugu noqdo ruuxda iyo daacadnimada. Ma illaawi karo sidii uu iigu noqday tusaale ku dayasho mudan ee dhinacyo badan. Khaliif mahad wayn Ayaan kuu soo jeedinayaa.

5. UGaas Cabdi xakiim Nuur Weehaan: Wuxuu sabab u ahaa inaan mar kale soo noolaado, kadib markii aan dhintay qayb ahaan, oo aan adduunkaan ka tagay; Waa markii aan shilka gaariga galay 2010. Nolosha labaad ee uu sababta u noqday Ugaasku ma aha kaliya jirka, ee waxaa jiray nololo kale oo dhinacyo badan ah. Ugaas Mahadsanid.

6. Saaxiibkay Sh. Maxamed Rashiid Cusmaan. Wuxuu ii yahay tusaale dhinacyo badan oo nolosha ka mid ah iyo saaxiib la isku halayn karo; kaas oo isiiyay dhiiri galin wayn iyo qaddarin badan oo mooralka ii dhistay. Aad ayaad u mahadsantahay Maxamed Rashid.

7. Sahal Ismaaciil Siciid. Sahal waa nin dhallin yaro ah, oo awood iyo garasho lagu mannaystay; wuxuu sabab iigu ahaa inaan mar kale noloshayda qaabeeyo oo aan isku dayo inaan afkaartayda baahiyo oo aan dadka la wadaago, kadib markii uu ii doortay inaan maamulo ganacsigiisa. Aad ayaad u mahadsantahay Sahal.

8. Qoraa C/risaaq Ismaacii Xaashi (Cirro) ayaan jeclahay inaan si gooniya u xuso juhdigii iyo dadaalkii uu ku bixiyey in buuggaani soo boxo oo uu gaaro meelkasta oo ay baahidiisu ka jirto.

Waan ka cudur daaranayaa walaalaha kale ee aadka u badan ee aanan halkaan ku xusin. Maxaa yeelay si guud ayaan ugu wada mahad celiyay.

Sababta aan ugu mahad-naqay dhammaan walaalaha noloshayda ka soo qaybqaatay, waa inaan Alle ku mahadiyo. Shukriga iyo kufrigu waa isku xiran yihiin. Haddii aad ku kufriso abaal iyo nicmo uu kuu galay hal qof, waxaad ku kufrisay nicmadii Alle kuu galay. Haddii aad ku shukriso abaal uu hal qof kuu galay, waxaad ku shukrisay, Allihii ku abuuray. Waad mahadsantihiin.

## HORDHAC

Waxaad ka ogaan doontaa buugaan, waxa sababta u ah, horumarka insaanka iyo caafimaad-kiisa. Waxaad ka baran doontaa, waxa sababa jirroyinka nafsadda sida: bakhaylnimada, cabsida, xasadnimada, dagaalka iyo dilka bani-a'aadanka. Sidoo kale waxaad ka baran-doontaa, waxa sababa jacaylka, farxadda, deeqsinimada, rajada iyo isku kalsoonaanta xagga nafsadda ah. Waxaad ogaan doontaa, wax yaabaha sababa dullinimada iyo dib u dhaca dhinacwalba ah, ee dadka qaar la soo gudboonaada, iyo lidkeeda, waxa keena oo sabata u ah. Wax badan oo nafsaddaada iyo horumarkaaga xiriir la leh ayaad halkaan ka baran doontaa. Waxaad ka raysan doontaa, cudurro badan oo xagga dad la dhaqanka iyo bulshada ku saabsan sida; khilaaf qooys, qaylo iyo dil carruureed, murug iyo walbahaar, baqdin iyo rajo xumo, wax yaabo badan oo laga yaabo inay hadda dhib kugu hayaan ama noloshaada arbushayaan, ayaad ka raysan doontaa.

Waxaad awood u yeelanaysaa inaad fahamto nafsadda ninkaaga, ama xaaskaaga, carruurtaada iyo dhamman dadka xiriirka kula leh oo aad isku xiran tihiin. Sidoo kale, waxaad fahmaysaa hab-dhaqanka dadka kale iyo sida ay u fikirayaan waxa sababay, waxayna arrintaasi wax wayn ka taraysaa horumarkaaga iyo badinta saaxiibadaa. Maxaa yeelay, waxaad fahmaysaa nafsiyaddooda iyo sida ay u shaqaynayso. Waxaad kala fahmaysaa marka nafsaddu caafimaad qabto, iyo waliba sidii caafimaadka lagu keeni lahaa, iyo marka ay jirrantahay

oo ay kaalmayn iyo kor u qaadid u baahantahay. Waxaad noqonaysaa dhakhtarka nafsaddaada iyo dadka kula xiriira. Buugaan oo aad fahamto noloshaada wax weyn ayuu ka badalayaa. Waxaad bilaabi doontaa inaad nolosha ku raaxaysato, oo aad nafsaddaada adigu maamusho.

Albaabka aan ka galnay barashada nafsadda, waa albaabka Allihii nafsadda abuuray uu inoo sheegay, ee ma aha kaliya, tijaabadii iyo cilmigii aadanuhu gaareen. Waa nooc cusub oo loogu talagalay inuu nafsadda dadka Soomaaliyeed, ee luqadaan fahmaya, uu wax weyn ku kordhiyo.

Waxaad buuggaan ku arki doontaa arrimo badan oo xagga diinta ku saabsan iyo aayado badan oo la soo daliishaday. Waxaas oo dhan hadda, waxay ku saabsan yihiin nafsadda iyo daawadeeda. Nafsaddadu sida ay noqonayso, jirro iyo caafimaad, waxay xiriir la leedahay, waxa aad aamminsantahay iyo sida aad u fikirayso. Markii la rabo nafsad xoog leh oo caafimaad qabta, waxaa lagama maarmaan ah, in wax laga sheego, sida aad u fikirayso iyo waxa aad rumaysantahay. Waxa aad rumaysantahay iyo sida aad u fikirayso, Waxay xiriir la leedahay, fahamka aad diinta ka haysato iyo aqoonta aad u leedahay. Halkaas ayaa nafsadda iyo Diintu iska soo galayaan.

Buuggaan waxaa loogu talagalay inuu siiyo qofka akhriya aqoon, kusaabsan sidii uu nafsaddiisa u fahmi lahaa, kadibna u dhisilahaa. Waxaa loogu talagalay, in qofka fahma uu noqdo dhakhtarka nafsaddiisa iyo dadka isaga xiriirka la leh dhakhtarkooda xagga nafsadda.

Buuggaan, wuxuu dadka ku baraarujinayaa nafsadda aadanaha sida ay u shaqayso, iyo sida ay u sahlantahay in wax lagu shubo, waxna laga shubo.

Wax badan oo dhib inagu haya, waxay xiriir la leeyihiin xaaladda nafsadeed ee aan markaas ku sugan nahay. Laga bilaabo dagaallan iyo naf la dilo, ilaa bakhaylnimo iyo waajibaad la dayaco, waxay ka turjumayaan xaaladda nafsadda ee aan markaas ku sugannahay.

Buuggaan waa buug noociisu cusub yahay. Buugta cilmu-nafsiga ka hadla, ama isku daya inay nafsad jirran daaweeyaan, waxaa asal u ah oo ay ku dhisan yihiin bani-aadamka fikraddiisa iyo caqligiisa. Cilmi-baariddii nafsadda lagu sameeyay iyo tijaabadii la ogaaday ayay ku salaysan yihiin. Laakiin buuggaan wuxuu kulmiyay, aqoontii aadanaha iyo Allihii nafsadda aadanaha abuuray, wixii uu ka yiri nafsadda Insaanka iyo sidii Alle u daaweeyay, nafsadda insaanka.

Culummada cilmu nafsigu (psychologists) intooda badan Diimaha lama tashadaan, ee kaliya waxay wax ku dhisaan, waxay iyaga latahay. Buuggaan wuxuu uga duwan yahay, waxaa wax lagu dhisay, kitaabaka Alle ee Quraanka kariimka ah. Allihii abuuray ayaa yaqaan daawada nafsadda aadanaha.

"الايعلم من خلق وهواللطيف الخبير"

Marka aad cilmigaan fahamto, waxaad garanaysaa sababta ay dadku xumaan iyo saman ugu dhaqamayaan. Markaad

wax walba, shar iyo khayr, sababtiisa fahamto, waxaa kuu fududaanaya inaad u gurmato dadka gargaarka xagga nafsadda ah u baahan. Waxaa kuu fududaanaysa inaad iska cafiso, oo waliba gurmad u fidiso, qof ku dilay, carruurtaadii laayay, xoolahaagii dhacay, danbi weyn kaa galay. Sideebay ku dhici kartaa inaad gurmad u fidiso oo aad iska cafiso qof ku dulmiyay?

Way fududahay markan; waayo waxaad fahamtay, xaaladda nafsadeed ee uu qofkasi ku sugan yahay. Mar haddii sababta la fahmana, layaabkii ayaa meesha ka baxaya.

Fahamka duruusta buuggaan, wuxuu kaa caawindoonaa balwadda qaadka, sigaarka iyo daroogada kale. Waa markaad ku talagasho, oo aad si run ah, u fuliso waxa uu kuu sheegayo, ama uu kuu tilmaamayo buuggaan. Carruurta iyo dhallin yarada wax wayn ayuu u tarayaa, haddii ay akhriyaan ama loo akhriyo oo lagu tirtirsiiyo.

Markaad dhamayso, buuggaan oo aad fahamto, waxaad noqondoontaa, qof kale. Waad dareemi doontaa waxa kugu kordha iyo sida noloshaadu isu badasho. Fadlan si fiican oo muddokarnimo iyo faham leh u daraasee.

## Muxuu ku saabsan yahay cilmu nafsigu

Cilmu- Nafsiga ama ruuxdu waxay go'aaminaysaa waxa aad tahay iyo sida aad tahay. Wax kasta oo wanaag iyo horumar ah waxaa saldhig u ah, shaki la'aan, sida nafsaddaadu tahay. Wax kasta oo aad samaynayso, wanaag iyo xummaan waxaa saldhig u ah, sida nafsaddadu tahay. Himmaddaada iyo hankaaga waxaa go'aaminaya sida nafsaddadu tahay. Sidaas daraadeed wax yaabaha horumarka ah ee bilaa'aadanku gaaro, qof ahaan ama mujtamaca iyo dawlad ahaan, waxay xiriir la leedahay, nafasdda qofku sida ay tahay. Danbiyada aadanuhu sameeyo, iyo nolol xummada adduunkaan, sida faqriga iyo wax la'aantu waxay ku saabsan tahay sida nafsaddu tahay. Marka cilmiga nafsadda oo aad wax ka ogaato, waxaa ku xiran wanaagga aad doonayso, adduun iyo aakhiraba iyo xummaanta aad ka cararayso, adduun iyo aakhiraba. Sidaas daraadeed aad iyo aad ayuu muhiim kuugu yahay, kuuna quseeyaa, noloshaadana wax wayn ayuu ka badalayaa. Gaar ahaan markii aad u barato cilmu-nafsiga qaab Islaamka waa faqsan oo Quraanka kariimka ah ku hoggaaminayo.

Waxaa la'oggaday casrigaan aan joogno in guusha dagaalka lagu guulaysto ay ku xiran tahay inta badan nafsadda, ee aysan ku xirnayn, tirada ciidanka iyo qalabkooda. Sidaas daraadeed dawladaha waaweyn ee cilmigaas fahamka u leh, waxay ku dadaalaan inay niyo jabiyaan ciidanka cadawga, isla markaasna niyada u dhisaan ciidankooda. Inta

badan hawshaas waxay ku qabtaan saxaafadda iyo warbaahinta qaybaheeda kala duwan. Arrintaas asalkeedu wuxuu ka soo jeedaa Islaamka, waxaana daliil looga helayaa Quraanka. Guulihii layaabka lahaa ee Muslimiintu ka gaareen dagaaladii ay gaalada la galeen, waxay tusinayeen sida xooggan ee nafsaddoodu u dhisnayd, oo Alle u dhisay. Alle wax kasta ayuu siin karay Rasuulkiisa iyo Mu'miniinta, laakiin wuxuu ina barayay cilmi waara oo bilaa'aadanka oo dhan ku saabsan. Waa cilmiga nafsadda.

Alle Nabiga iyo asaxaabtiisa nafsadda ayuu ka dhisay. Waxay heleen, nafsad aan cid kale oo adduunkaan ku nool haysan. Taas ayay ku dabooleen farqiqii tirada iyo hubka ee u dhexeeyay iyaga iyo cadawgooda. Waxaan la yaabaa, dagaallada hadda ka dhexsocda Reer galbeedka iyo Al-qaaciido iyo daalibaan. Nafsiyaadka Al-qaaciido, iyo daalibaan, waxay ka duwan yihiin nafsiyaadka ciidamada xoogga badan ee reer galbeedka. Reer Galbeedku waxay ku dagaalamayaan, tiro, hub casri ah, lacag, iyo cilmi aad u sareeya. Laakiin Al-qaaciido iyo daalibaan, waxay ku dagaallamayaan nafsiyaad aad loo dhisay ee ku saabsan dhinaca dagaalka iyo sababta ay u dagaalamayaan. Taasi waxay keentay, inay xammilaan oo u adkaystaan dhib kasta iyo hub kasta oo loo adeegsado, isla markaasna laga yaabo inay iyagu u haraan goobta dagaalka. Taasi waa tusaale ku saabsan qaabka dhismaha nafsadd u shaqayso iyo sida ay wax kasta iyada ugu xiran yihiin.

Wax bixinta iyo deeqsinimada, xiriirinta waalidka iyo qaraabada, cibaadada Alle oo lagu dadaalo, ixsaanka iyo

naxariista, waxaas oo dhan waa xaalad nafsadaasi ku sugantahay. Waa nafsad walwalkeedii yaraaday oo kalsooni Alle ku qabta, khatarna aan dareemayn. Bakhaylnimada, nacfi jacaylka, fulaynimada iyo cabsida, xasadnimada, hawo raacidda iyo daroogada oo la isticmaalo, waxaas oo dhan waa xaalad nafsi ah. Markii ay nafsaddu dhisan tahay oo iimaan iyo cibaado Alle lagu dhiso waxay samaynaysaa wax fiican. Markii ay daciifto oo ay hoos aado, waxba iskama celin karto. Shahwada iyo raaxada xaaraamta ah, daroogada iyo wakhti dhumiska waxay naqonayaan macammiisha nafsadda daciiftay.

Markii dhallinyarada Soomaaliyeed loogu yeero inay diinta bartaan oo Alle caabudaan oo xalaal iyo xaaraam kala doortaa, markiiba, waxaad arkaysaa iyaga oo isbadalay. Muuqaalkii jirka wuu isbadalay, oo qurux iyo dhalaal ayaa ka muuqanaya. Fikirkii iyo hammigiina waa is badalay, oo wax barasho, wax akhrin, muxaadaro dhagaysi, diin fidin, dad u yeerid, dhallinyaro shirin waxaas ayuu mashquul ku yahay. Salaadda iyo soonkana waa ilaalinayaa. Shaqada waa ku fiican yahay. Waxaas oo dhan waxay tusinayaan xaaladda nafsadda. Markii nafsaddu fiicnaato wax walba way hagaagayaan.

Markay nafsaddu xumaato wax walba way xumaanayaan. Tusaalahaas dhallinyarada Soomaaliyeed waa darsid ficil ah oo aan wada ognahay. Dadka hadda shaqeeya ee lacagta sameeyay, dadka wax barshada ku mashquulsan, dadka wax qoraya, dadka diinta fidinaya, dadka dagaalamaya oo dalka difaacaya, dhammaantood waa dadkii xarakaadka

Islaamiga ah ku lugta lahaa. Dhammaan dhallinyaradii aan diinta iyo cibaadad ku lug lahayn waxay ku mashquuleen qaad iyo sigaar. Way niyo jabeen. Dadka waddammada dibadda kunool arrintaas way ogyihiin. Dhallinyarada aan diinta la barin ama aan cibaadada Alle ku fiicnayn, waxay ku mashquulayaan shahwo Jinsi ah iyo daroogo. Waxay noqdeen dad aan shaqaysan karin. Qaarkood waxay ku biireen burcadda iyo tuugada, aakhirkana xabsi ayay ku danbaynayaan. Waxaas oo dhan waxaa saldhig u ah nafsad jabtay oo rajadii dhumisay.

Guulihii layaabka lahaa ee taariikhda caalamka wax ka badalay ee Muslimiintu gaareen wakhtigii Islaamku bilowga ahaa, waxaa saldhig u ahaa sidii Alle nafsaddooda u diyaariyay. Marka guulaha aad rabto oo dhan, guusha ganacsiga iyo lacagta, xirriirka iyo siyaasadda, wax qabadka iyo xoogga shaqada, xiriirka qooska iyo qaraabada, iyo dhammaan waxa aad rabto inaad ku guulaysato waxay ku xiran yihiin marba sidii nafsaddadu tahay. Haddii aad ku guulaysato inaad nafsaddaada xoojiso, wax kasta oo kale ayaad ku guulaysanaysaa. Sidii aad nafsaddada u xoojin lahayd oo aad uga dhigi lahayd nafsad diyaarsan waa sidaan: Waa inaad yeelato, tilmaan iyo abtirsiinyo, kugu kaalmaynaya, inaad wax bixiso. Nafsadda qiimaheedu wuxuu ka bilaamaa, abtirsiinyaha.(Identity) Haddii aad aaminsantay, ku abuuray oo ruuxda kugu afuuday oo ku karaameeyay, dhulka oo dhan uu wakiil kaaga dhigay, ku imtixaanayo, aakhirana ku abaal marinayo, tilmaanta noocaas ah, ee aad naftaada siiso, waa waxa nafsaddada ka dhigaya

wax weyn oo qiimo leh, oo xumaanta iyo dulmiga iskala weyn.

Haddiise, aad ku abtirsato, sida buugta Iskuulada ku qoran, oo ah in aadanuhu dixiri ka yimid, kadibna, xayawaan noqday, ka dibna daanyeerka u ekaaday, ilaa uu soo gaaray sida uu hadda yahay, haddii aad sidaas ku abtirsato, xayawaanka kale ayaad la mid noqonaysaa. Nafsaddaduna way daciifaysaa. Shahwo iyo inaad wax kasta oo adduunka yaalla, aad adigu cunto ayaa kaa soo haraya. Haddii dhib iyo imtixaan aad la kulantana, waad u nuglaanaysaa oo ma iska- difaaci kartid dhibaatooyinka nolosha. Waxaad gaaraysaa, inaad nafsaddada u dishid dhib yar ama arrin xoogaa sidaad rabtay noqon wayday

## Baro Naftaada

"وفى أنفسكم أفلا تبصرون"

War nafsadiina soo uma jeedaan

Waxaan niraahnaa ‘waa nin fiican’ waa nin xun’ Waa naag fiican. Waa naag xun

Maxaan u jeednaa marka aan wanaag qof ku tilmaamayno?

Waxaan u jeednaa inaan ka warbixino, xaaladdiisa nafsadeed. Waa qof wanaagsan. Waa qof xun. Ninkaas iska jir waa nin xun. Naagtaas naag fiican ma aha. Iska Ilaali. Tilmaamahaas aan had iyo jeer bixino waa maxay?

Maxay ku sal-leeyihiin? Maxaan ula jeednaa? Waa muhiim inaan ogaano. Markaan leenahay ninkaas hebal la yiraahdo waa nin fiican oo aad u wanaagsan, uma jeedno midabkiisa, dheerarkiisa, qabiilkiisa iyo xoolaha uu haysto. Uma jeedno dharka uu xirto iyo cuntada uu cuno. Uma jeedno iskuulkii uu ka soo baxay iyo shahaadada uu haysto. Uma jeedno uma dan- lihin meeshii uu ka yimid iyo halkii uu ku koray. Waxaan tilmaamaynaa xaalada nafsadeed ee uu ku sugan yahay. Waa nin fiican iyo waa nin xun waxay tilmaamaysaa xaaladda nafsadeed ee qofkaasi ku sugan yahay.(inkasta oo fiicnanta iyo xumaanta qof lagu sheegayo ay ku xiran tahay hadba halbeegga ay kuwaas wax sifeynaya ku miisaamaan samaha iyo xumaha)

Haddii uu nin saaxiibkaa ah kaa codsado inaad u soo raadiso gabar fiican oo uu guursado, sideed u qaadan

lahayd? Gabar noocee ah ayaad u raadin lahayd? Maxaad ku kala saari kartaa gabar fiican iyo gabar xun? Ma jooga iyo dheerarkaa? Ma midabkaa? Ma da'daa? Ma meesha ay ku kortay iyo meesha ay dagantahaybaa? Ma xoolaha ay haysataa ? Maxaad ku soo sooci lahayd gabadh fiican? shaki la' Xumaanta iyo wanaaggu waa xaaladda nafsadda. Xaaladda nafsadda ee dadka ayaa kala duwan. Iyada ayaa qaadata tilmaamahaas aan sheegno. Marka aan wanaag sheegayno waa xaalad nafsadeed. Sidoo kale, marka aan xummaan sheegayno ama aan qofka u nisbaynayno, waa xaalad nafsadeed.

Caruurteenna waan kala tilmaannaa. Waxaan ku sheegnaa mid inuu Caasi-waalid yahay. Midna inuu baari yahay. Mid waan u ducaynaa. Waan jecelnahay. Wax kalana ma ahee wax buu bixin karaa. Wakhti, booqasho, u khidmayn, wax maqlid, daryeel iyo tixgalin, waa qof wax bixin kara. Sidaas daraadeed waan u ducaynaa. Waan jecelnahay. Midka kale aragtidiisa ayaa dhib ah. Booqasho malaha. Wax quur malaha. Dareen iyo daryeel ma laha. Haddana waa laba cunug oo aad adigu aabbe ama hooyo u tahay. Waa laba cunug oo aad soo korisay. Waa laba cunug oo aad jeclayd. Waa laba cunug oo aad ku soo rafaaday. Waa isku hooyo iyo isku aabbe. Haddana aad ayay u kala duwan yihiin. Waa maxay sawabtu?

Waa xaaladda nafsadda. Nafsaddooda ayaa kala duwan. Nafsadda ayaa kala xoog badan. Nafsadda ayaa midna caafimaad qabtaa midna jirantahay. Waa nafsaddaas midda aan baranayno oo aan wax ka sheegayno.

Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa, ninkii Saacad kaa horeeya maalin magaartid. Ninkii maalin kaa horeeyana Bil ma gaartid. Ninkii bil kaa horeeyana sannad ma gaartid. Ninkii kaa Xaas (Xilaha) fiicanna waligaa ma gaartid. Naagtaas wanaagsan, waxa loo jeedo oo la ammaanayo, waa nafsaddeeda.

Sidoo kale, tilmaamaha guud ee aan dadka ka bixinno, waxay tix raacayaan, xaaladda nafsadda ee qofkaas. Waxaan niraahnaa, qofkaasi waa bakhayl, waa deeqsi, waa geesi, waa fulay, tilmaamahaas oo dhan waxay tixraacayaan xaalad nafsadeed oo markaas jirta.

Haddii aan sidaas u ogaano, aanan rabno inaan noqono dad fiican, oo qof walba ka mahad sheegto, qof baarri ah oo waalidki ixtiraama, qof aan fulay ahayn, qof deeqsi ah oo wax bixiya, haddii aan tilmaamahaas danaynayno oo aan jeclaan lahayn inaan noqono dhinaca wanaagsan ee tilmaamaha, waa inaan si fiican oo ula kac ah u daraasayno culuumta buuggaan ku qoran. Waa mid na qusaysa oo aan u baahannahay.

Xaaladda nafsadda ee bani'aadamku way ka xeel dheertahay in la wada fahmo ama la wada barto. Wax kasta oo laga oogaaday ama laga qoray waa wax yar oo caad yaal ah. Sirta dhabta ah ee nafsadda aadanaha Alle kaliya ayaa garanaya. Marka aan nafsadda aadanaha ka hadalayno, dhinaceeda wanaagsan waxaan Isticmaalaynaa Ruuxda. Marka aan ka hadlayno dhinaceeda liitana waxaan

isticmaalaynaa Nafsadda. Laakiin waa la isla qaadankaraa labada dhinacba.

"ويسئلونك عن الرّوح، قل الرّوح من أمرربّى وماأوتبت من العلم الاّقليلا"

(Waxay ku su'aalayaan ruuxda, waxaad ku tiraahdaa taasi cilmigeeda rabbi ayaa og, cilmigana waxa laydinka siiyay in yar)

Nafsadda insaanku way kala duwantahay. Way kala adagtahay. Way kala xoog-badantahay. Way kala jilicsan tahay. Way kala khayr badan tahay,way kala shar badan tahay. Marka hore ee Alle abuuray ayay kala duwantahay. Sirta kala duwanaantaasna Alle kaliya ayaa og. Taasi waa asalka hore, ee awoodda Alle iyo cilmigiisa ku saabsan. Haddana nafsaddu marna way caafimaad qabtaa marna way jirantahay. Mar way xoogowdaa marna way daciiftaa.

Mowduucaan Waxaad ka baranaysaa oo aad ogaanaysaa nafsadda caafimaadka qabta iyo nafsadda jirran siday kala yihiin. Waxaad ogaanaysaa nafsadda wanaagsan iyo midda xun waxa loola jeedo. Waxaad ogaanaysaa sababta midna u fiicantahay midna u xuntahay. Waxaad kale oo awood u helaysaa qaabkii iyo farsamadii aad nafsaddaada kor ugu qaadi lahayd, iyo qaabkii aad u daawayn lahayd. Marar badan waxaa inagu dhaca cuduro aan Alle mooyee cidna inaka caawin karin oo xagga nafsadda ah, meel aan la aadnana aynaan garanayn. Carruurta ayay cudurradaasi inooga dhacaan. Dhakhtar ina caawin kara iyo daawo aan isticmaali karnana ma garanayno. Maxaad yeelaysaa?

Wiilkaagii curadka ahaa oo aad jeclayd, oo aad wax soo bartay, oo wax weyn ka rajaynaysay ayaa daroogo iyo qaad kaa bartay. Maxaad yeelaysaa? Sidee u daawaynaysaa? Sidee himmaddiisa kor ugu soo qaadi kartaa? Buuggaan ayaa kuu sheegaya arrimahaas xalkooda. Waana xaalad nafsi ah, oo uu markaas wiilkaagu kusugan yahay. Waxay u baahantahay in xaaladdaas nafsiga ah la badalo. Sidii loo baddali lahaa iyo wixii lagu baddali lahaa halkaan ayaad ka heli doontaa Alle idamki.

Waxyaabaha noloshu ina bartay oo loo baahanyahay inaan cibro ka qaadanno, waxaa ka mid ah arritaan. Marka dhib iyo caro ay qooska soo kala dhexgasho, oo ninka iyo xaaskiisu is gafaan, intabadan gacanta sare waxaa leh ninka. Haweentu inta badan waxay xal ka dhigtaa inay iska tagto oo ay carooto. Haddii ay cunug yar nuujinaysay, midna way qaadataa cunugga midna way ka tagtaa. Xaaladdooda nafsadeed ayaa kala duwan. Soomaalidu waxay arrintaas ka dhigtay imtixaan, haweenka lagu imtixaano, oo lagu kala ogaado, naagta fiican iyo middda xun. Waxay maahmaah ka dhigeen: "Naagtii cunugeeda qaadata, waa lasoo celiyaa. Maxaa yeelay rajo ayay leedahay. Naagtii cunugeeda ka tagta, hasoo celin rajo malahee"

Arrimaha noocaas oo kale ah, ee bina'aadamka ku saabsan waa xaalad nafsadeed. Waa xaalad wax laga badali karo. Waa xaalad, waxna lagu dari karo waxna laga dhimi karo. Laakiin hadda waxaan rabnaa inaan fahamno oo ogaanno, xaaladda nafsadeed ee laga hadlayo waxa ay tahay iyo

sida ay u shaqayso, iyo meesha ay adiga kaasoogalayso ama ay xiriirka kaala-leedahay.

Wax kasta oo aad qabanayso waxay u baahantahay in nafsadda loo diyaariyo. Haddii aad nafsadda dhimasho u diyaariso way aqbalaysaa. Haddii aad khayr iyo najax u diyaariso way aqbalaysaa. Wax kasta oo aad u baahantahay waa inaad nafsaddeeda haysato. Rususha Alle soo diro waxyiga iyo mas'uuliyadda ayaa marka hore loo diyaariyaa. Markii hore ee Alle nafsaddooda abuuray ayuu ka dhigay nafsad xoog leh oo mas'uuliyad qaadi karta. Haddana markii wakhtigii soo dhawaado nafsaddooda ayaa la diyaariyaa. Nabi Muuse afartan casho ayaa lagu amray inuu buurtii 'Duurasiinaa' ku cibaadaysto. Nabi Mohammad, Nabad iyo naxariis, korkiisa ha ahaatee, Muddo ayuu buurtii 'Qaaru-xiraa' ku cibaadaysanayay intaan waxyiga lagu soo dajin.

Mas'uuliyadda culus iyo hawlaha waaweyn in lagu najaxo, waxay u baahantahay in nafsadda loo diyaariyo. Haddaba, wax yaabaha aad jeceshahay ee aad u baahantahay inaad ku najaxdo, sida ganacsiga iyo lacag samaynta, hoggaaminta dad iyo dal, xallinta mushkilaadka waaweyn, waxaas oo dhan waxay u baahantahay in nafsadda loo diyaariyo. Markasta oo aad rabto inaad hawl wax tar leh ku najaxdo, waxaa lagama maarmaan ah inaad nafsadda u diyaariso.

Ma ogtahay in Alle abuuray nafsaddada oo dhamaystiran. Dhamaystiran waxaan ula jeedaa aan waxba ka maqnayn.

Ruuxdeedii iyo xiriirkii Alle way wadataa. Awooddii abuuridda dhexdeeda ayay ku jirtaa. Meeshii ay katimid ruuxdu oo xagga Alle ahayd ayay markasta u heloobaysaa. Daawadii iyo dhakhtarkii dhexdeeda ayay ku wadataa. Haddii aad dhaawacanto markaba gurmad jirka dhexdiisa ka yimid oo diyaar ahaa ayaa imanaya oo haddiiba meeshii dhaawacantay kabaya. Waxaa nafsaddeena dhexdeeda ku sugan wax kasta oo jira.

Haddii iimaankaasi jiro, oo si run ah u jiro, mushkiladda aadanaha oo dhan way dhammaan lahayd. Wax alle waxa dhib ah innaga ayaa keensanay. Waxa alla waxa wanaag iyo khayr ahna Alle ayaa ina siiyay. Sidaas weeye runtu.

## Qaabaynta Nafsadda

Nafsadda aadanaha waxaa saameeya:

1. Wuxuu arko.
2. Wuxuu maqlo.
3. Wuxuu nafsaddiisa isu sheego.
4. Iyo wuxuu aammino.

## Saamaynta aragtida waxa ku hareereysan (invironment)

Haddii uu kunool yahay, xaalad xun ama goob xun, oo uu had iyo jeer arko, wax xun oo liita, way saamaynayaa. Fikradda uu nolosha ka haysto waxay ku xiran tahay wixii uu arkay, iyo sidii loo noolaa wakhtigiisii. Haddii ay ladnaan iyo barwaaqo ahayd, waxaa laga yaabaa inuu nolosha oo dhan sidaas u qaato oo uusan ku qancin wixii uu arki jiray wax ka liita, ama ka yar. Haddii uu iimaan iyo cibaado iyo akhlaaq fiican ku barbaaray, nafsaddiisu lama qabsan karto, kufri iyo cisyaan iyo been iyo tuugo iyo wax la mid ah.

Daawashada quruxda iyo waxa wanagsan waxay saamayn fiican ku yeelataa maskaxda. Qofka meel fiican kunool wuxuu had iyo jeer qiyaas ka qaataa meesha uu kunoolyahay iyo waxa uu arkayo. Cunuga magaalooyinka waawayn kunool

isla-markaasna had iyo jeer arkaya saraha dhaadeer oo quruxda badan wuxu ku fikirayaa inuu helo ama yeesho sarahaas dhaadheer oo kale iyo meelahaas quruxda badan oo lagu raaxaysto. Waxaa muhiim ah in la doorto meelba meesha ay ka waasacsantahay, ka qurux-badantahay, ka hawo fiican tahay.

Maxaa loo dooranayaa meelaha fiican iyo aragtida wax-yaabaha quruxda badan? Waxaa loo dooranayaa, waxay saamaynaysaa nafsadaada iyo maskaxdaada. Qofka bina'aadamka ah wuxuu u baahan yahay meel uu qiyaas ka qaato. Qofku wax uusan wali arag, ku fikirin ma mafahmi karo, horumarka, dhaqaalaha, quruxdu waxay u baahan yihiin meel looga qiyaas qaato.,maskaxdu wax aysan waligeed arag kuma fikiri karto. kaliya waxay ku fikiraysaa wixii ay arki jirtay, marka, meesha aad ku nooshahay iyo waxa aad arkayso nafsadaada saamayn wayn ayay ku leeyihiin.

Dadka kunoolaa wakhtiga dheer meel aad u liidata oo faqriga iyo gaajadu hooy ka dhigteen, waxay ku fikirayaan wixii ay arki jireen oo ay ku noolaayeen. Uma muuqan karto waasacnimada Alle iyo badnaanta khayraadka Alle adduunkaan ku abuuray. Markaas waxaa ku badan baqdinta, bakhaylnimada, xaasidnimada iyo wax bursiga, maxaa yeelay had iyo jeer wuuxu ku fikirayaa wax yar oo ay lagama maarmaantahay in loo tartamo oo lakala bursado. Mararka qaarkoodna ay lagama maarmaantahay in la isku dilo. Waxaas oo dhan waxaa keena baqdinta faqriga iyo maskaxda oo ay ku duubantahay wixii ay arki jirtay oo ciriiriga ahaa.

Waa muhiim inaad had iyo jeer magaalada ka degto meelaha ugu fiican oo ugu quruxda badan. Si kasta oo ay qaali kuugu tahay, waxaa ka muhiimsan saamaynta ay ku yeelanayso nafsadaada iyo tan dadkaaga  waayo fahmo sare ayay ka qaadanyaan waxa fiican oo ay arkayaan iyo meesha quruxda badan oo ay ku noolyihiin.

## SAAMAYNTA WUXUU MAQLAYO:

Haddii nafta wax fiican loo sheego saamayn bay ku yeelanaysaa. Haddii wax xun loo sheegana sidoo kale, marka waxaa dadka loo sheegayo ama latusayo waa inay yihiin wax laga taxadaray, oo nafsaddooda iyo akhlaaqdooda aan wax u dhimayn. Had iyo jeer, wixii la inoosheego, wixii aan Tv ga ka aragno, wixii aan akhrino way ina saamaynayaan, dhib iyo dheef wixii ay leeyihiin nafsaddeenu way qaadanaysaa, xattaa iyada oo aan kaa idan-qaadan, ayaad arkaysaa adiga oo iska aqbalay oo iska qaatay oo ay caadi kuu noqotay.

Waxa aynu maqlayno had iyo jeer ayaa sameeya dhaqankeena. Haddii aan badsano qudbadaha nacaybka, colaada, iyo dilka ka hadlaya waxaa inoo samaysmaysa nafsad jirran oo had iyo jeer dil, dagaal, nacayb iyo cadaawad ku fikiraysa. Marka waa inaan joojinaa qaadashada cuntada maskaxda ee sumaysan.

Aadanaha waxaa u samaysma ama lasiiyaa wixii uu ka shaqeeyo. Haddii maskaxdeena laga buuxiyo cunto sumaysan oo aan cidna ka fikirin, waxaa inoo samaysmaya mujtamac jirran oo maskaxdiisu si xun u shaqaynayso.

Maxaa keenay in Soomaaliya ka duwanaato dhammaan caalamka kale oo dhan? Maxaa keenay in Soomaaliya noqoto goobtii geerida, gaajada, colaadda, nacaybka, faqriga iyo xasadnimada? Maxaa keenay in Soomaaliya noqoto dal aan

dad lahayn, oo aan dawlad noqon Karin?. Waxaas oo dhan waxaa keenay waxa aan maskaxdeena ku nafaqaynayo. Waxa aan had iyo jeer dhagaysanayno, haddana aan qaadanayno innaga oo aan ka fikirin dhibtiisa iyo dheeftiisa. Waxaa marwalba ina saamaynaya waxa aan maqlayno iyo waxa aan dhagaysanayno.

Asalka diimaha oo dhan iyo rususha Alle soo diray waxay ahaayeen oo ka turjumayeen naxariis iyo jacayl, colaad iyo nacayb ma ka turjumayn. Laakiin waayahaan danbe waxaa aad u hirgalay faham diineed ka turjumaya dabeecadda insaanka iyo rabitaankooda. Haddii qofku caraysan yahay oo uu dagaal qolo kale kula jiro ama ay siyaasad isku hayaan, wuxuu u baahan yahay in Alle iyo Rasuulkiisu dagaalka lagalaan, kuwa ay is hayaanna ka soo horjeestaan.

Fahamka Diin dabciga insaanka iyo danaha ay isku khilaafsan yihiin lagu saleeyay oo dagaal kaliya u joogta ayaa waayahaan aad u soo badatay. Taasina waxay samaysay nafsad iyo maskax jiran, taas oo si xoog leh u saamaysay ummadda Soomaalida.

Maadaama waxa aad maqasho ama laguu sheego saamaynayaan nafsaddaada waa inaad ka fikirto waxa aad maqlayso ama aad dhagaysanayso. Had iyo jeer ka fogow inaad maqasho erayada cadawnimada, nacaybka, xukunka, siyaasadaynta diinta ee keenaysa in Alle dagaalka dhexdeena ah lagaliyo, oo la sheegto inuu Alle qolana la jiro midna ka jiro. Waxaas oo dhan nafsadaada uma fiicna. Waa inaad ka

fogaato si aad u hesho nafsad deggan, oo isku kalsoon oo jacayl iyo khayr ku dhisan.

## Saamaynta Waxa aan ku fikirno

Waxaa kale oo aad muhiim nafsaddeenna ugu ah, waxa aan isu sheegno, oo nafteena dhexdeeda aan ku sheekaysano. Sidaad u fikirtid iyo waxaad adigu isugu sheekayso, waxay saamayn weyn ku yeelanayaan noloshaada iyo nafsaddaada iyo wax qabadkaaga. Dabeecaddaada iyo dad la dhaqankaaga waxaa wax weyn saamaynaya sida aad nafsaddaad u diyaarisid. Haddii aad isugu sheekayso in qofkasta ku neceb yahay ama cadawgaaga yahay oo loo baahan yahay inaad iska ilaaliso, nafsaddaadu si iska noqosha ah ay u qaadanaysaa dareenkaas. Waa inaan ka taxaddarno waxa aan nafsaddeenna u sheegayno iyo waxa aan aamminayno.

Sidoo kale, wixii aad aamminto way kugu soconayaan. Haddii aad aamminto in khatartu badan tahay, colaadda, xasadnimada, nacaybka, faqriga, caddaalad darrada, waxaas oo dhan inay badan yihiin oo adduunyada saabteen, dabeecaddadu waxay noqonaysaa waxaas aad aamminsantahay, wax la mid ah. Had iyo jeer dhinaca xun ayaad wax walba ka arkaysaa. Dhinaca xun ayaad iska taagaysaa. Wax wanaag ah ma jiraan. Wax khayr ah ma jiraan. Waa inaad diyaar u ahaataa inaad wax iska celiso. Waxaas aad rumaysantahay nafsaddadu way qaadanaysaa wayna ku shaqaynaysaa. Waxayna kuu noqonaysaa dabeecad iyo dhaqan.

Haddii aad Alle rumaysantahay, dadkiisa jeceshahay, cid walba khayr u malayso, naxariista Alle marwalba filato, dadka wanaag iyo khayr kamalaysato, tuhunkaaga iyo shakigaagu uusan badannayn, wixii ay xumeeyaan aad Alle u wakiilato, nafsaddaadu sidaas ay noqonaysaa. Marka nafsaddu waa hooska waxa ay rumaysantahay. Marka waa inaan had iyo jeer ka taxadarno waxa aan dhagaysanayno, waxa la inoo sheegayo, waxa aan baranayno, waxa aan isku qancinayno iyo waxa aan rumaynayno. Sidoo kale waxa aan arkayno iyo meesha aan kunoolaanayno waa inaan ka taxadarno oo aan ku dadaalno inay markasta dhinaca wanaagsan tahay.

Culummada nafsaddu waxay sheegaan in waxa aad cunto, meesha aad degan tahay, dharka aad xiranayso iyo saaxiibada aad leedahay ay ku saamaynayaan oo nafsaddaada ay raad weyn ku leeyihiin. Dadka arrimahaas ku baraarugsan waxay iska ilaaliyaan inay wax yar ama xun ku qancaan. Haddii ay raadinayaan shaqo waxay raadiyaan shaqo fiican oo sharaf leh. Haddii ay degaan rabaan waxay raadiyaan meel sare oo dagaan fiican iyo guri fiican. Baqdin badan nolosha kama muujiyaan. “**Waa maadays adduunyadu, dadkuna way matalayaan**”. Halkaad ka matalayso iyo booska aad riwaadda ka jilayso, adiga ayay kugu xirrantahay inaad doorato. Riwaayadda meel fiican waa inaad ka doorato. Haddii aad qaybta liidata doorato, halkaas ayaad riwaadda ka matali doontaa waligaa. Iska jir arrintaas.

Nafsadda aadanuhu waa shay wax lagu kordhin karo, waxna laga dhimi karo. Waxaa ilaahay u diyaariyay in wax ku kordhaan waxna ka dhacaan. Waa shay marba sidii la rabo loo diyaarin karo. Waxay qaadanaysaa marba sidii loo tababaro ama wax loogu sheego. Sidaas daraadeed waxaa lagu shubikaraa wax wanaagsan iyo khayr, waxaa kale oo lagu shubikaraa shar iyo been. Nafsadda aadanuhu waa shay loo diyaariyay inay khayrka iyo sharkaba aqbasho. Waxaa Ilaahay quraankiisa ku yiri:

"ونفس وماسواها، فالهمها فجورها وتقواها، قدأفلح من زكّاها، وقد خاب من دسّاها"

"Alle nafsadda aadanaha wuxuu u diyaariyay inay wanaaga iyo xumaanta labadaba aqbasho. Waxaa liibaanay qofkii naftiisa hagaajiya, waxaa khasaaray qofkii naftiisa wasakheeya"

Nafsadda qofka waxaa diyaarinkara qofka laftiisa. Waxaa kale oo diyaarin kara ama wax ku shubi kara cid isaga ka baxsan. Dadka had iyo jeer ina la hadlaya ee wax inoo sheegaya waxay isku dayayaan inay nafteenna wax ku shubaan. Waalidka, macallinka, shiikha, saaxiibada iyo dadka aan suuqa iyo meelaha shaqada aan kula kulanno waxay ka qayb qaadanayaan inay nafsaddeenna wax ku shubaan, oo saamayn ku yeeshaan. Sidoo kala warbaahinta, sida TVs, raadiyaha, joornaalka, buugga aan akhrino waxay ka qayb qaadanayaan samaynta nafsaddeenna iyo sida ay noqonayso.

Haddii wax yaalahaas la soo sheegay saamayntoodu shar noqoto waa dhibaato weyn oo qofka raad aad u weyn ku

reebaysa. Haddii ay khayr noqotana sidoo kale ay u saamaynaysaa. Waxaa laga yaabaa inaysan shar wada noqon, wanaagna wada noqon ee ay isku jiraan. Wax yaabo badan ayaan daqiiqad kasta maqalnaa. Qaarna waa wanaag iyo khayr, qaarna waa wax laga fiican yahay.

Quraanka kariimka ah, masuuliyadda diyaarinta nafsadda wuxuu saarayaa qofka laftiisa. "**Waxaa liibaanay qofkii naftiisa dahira, waxaa khasaaray qofkii naftiisa wasakheeya**." Taas waxaan ka fahmaynaa in masuuliyaddu saarantahay qofka laftiisa, ka hor inta aan loo gudbin mujtamaca. Qof kasta oo qaan-gaar ah, oo caafimaad qaba isaga ayaa ka mas'uul ah sidii u u diyaarin lahaa naftiisa, iyo wixii uu u ogolaan lahaa iyo wixii uu diidi lahaa. Isaga ayaa mas'uul ka ah.

In mas'uuliyaddaas laqaado shuruud ayay leedahay. Waxaa ugu weyn laba shardi. Labadaas shardi waxaa weeye:

1. Tan koowaad: Waa in qofku leeyahay waaya -arignimo ku filin oo uu wax kukala doorto. Waa inuu qaan gaar yahay. Inta badan dadka yaryar makala dooran karaan wax yaalahaas oo kale, waayo-aragnimadooduna magaarin inay kala doortaan sharka iyo khayrka.

2. Tan labaad: waa inuu qofku ku baraarugsan yaahy arrintaan ah in nafsadda lagu diyaariyo wax loo sheegay iyo qaab loo saameeyay. Waa in cilmi iyo baraarugsanaan mawduuca ku saabsan ay jirtaa. Markii labadaas shardi lahelo waxaa soo baxaya qof is maamuli

kara oo wax kala dooran kara. Waxna diidi kara. Waxna yeeli kara. Maxaa yeelay wuxuu ogyahay in waxa uu maqlayo, dhagaysanayo, arkayo ay saamayn ku yeelanayso nafsaddiisa iyo sida ay u samaysmayso.

Tusaale ahaan, caruurtu markay yaryar yihiin, waxaan uga sheekaynaa sheekooyin la sameeyay, ama dhacday. Sheekooyinkaas carruurtu aad ayay u jecelyihiin dhagaysigooda. Haddii ay khayr yihiin iyo haddii ay shar yihiin labadaba saamayn weyn ayay ku yeelanaysaa nafsiyaadka carruurta. Ka sooqaad haddii aan caruurta uga sheekayno dagaalladii waa hore ahaa ee dhexmaray qabiilkooda iyo qabiil kale iyo sidii foosha xumayd ee wax u dheceen. Dil, dhac, gaajo, barakac, dulmi, xaqiraad iyo ihaano. Sheekadaas hooyada ama ayeeyadu ay carruurtaas uga sheekaysay nafsaddooda raad weyn ayay ku reebaysaa. Wayna ka jawaabi doonaan goortay doonto hannoqotee. Ha dheeraato ama ha dhawaato way ka jawaabayaan. Inta badan dagaalada Soomaalidu waxay ku salaysantahay nafsad si xun loo diyaariyay ama loo dhisay, laguna shubay borogaraam aan fiicnayn. Sidoo kale ayay u saamaynaysaa haddii aan carruurta uga sheekayno sheekooyin fiican oo nabad iyo jacayl ka turjumaya.

Waa mas'uuliyad ballaaran, laakiin u baahan faham iyo taxaddar dheeraad ah. Wakhti Nus qarni kabadan ka hor ayaa waxaa ka jirey magaalada Gaalkacyo Digir iyo Baasto. Carruurta ayaa isku xifaalayn jirtay oo ku ciyaari jirey wakhtigaas. Waxay erayadaasi katurjumayeen laba qabiil oo wada daga magaaladaas. Waxay kale oo ka

turjumayeen, kala duwanaan dabaqadda nolosha ku saabsan oo tusinaysa in la kala nolol fiican yahay ama la kala dakhli badan yahay.

Inkasta oo Baasto ay ahayd wax dibadda laga keeno, haddana waxay ka turjumaysay, raashinkii gumaysigii Talyaanniga oo u muuqday inuu dabaqadda sare yahay. Digirtu in kasta oo ay nafaqo ahaan iyo caafimaad ahaanba ka tayo badantahay, Baastada haddana waxay ka turjumaysay dadka aan wax badan haysan.

Arrintaas, dhibta ay leedahay cidna kuma baraarugin. Wax hal (1) Qarni ku dhow ka dib ayaa laga jawaabay, erayadii carruurtu isku xifaalayn jirtay ama ay ku kaftami jirtay. Sidii looga jawaabay iyo sida ay hadda wali u sii taagantahay waan la soconaa. Waxay meesha ka saartay wada noolaanshihii iyo is kaashigii, waxayna boos siisay ciddii doonaysay inay Soomaaliya daciifiso ama dawlad la'aan ka dhigto. Waa nabar nafsaani ah oo mar hore samaysmay oo aad u xunuun badan aanna biskoonayn waligi. Sidaasi, waa sida ay u shaqayso nafsadda Bani'aadanku, waxayna u baahantahay in markasta laga taxaddaro waxa lagu shubayo maskaxda dadka. Haddii ay yaryaryihiin iyo haddii ay waaweyn yihiin labadaba.

Sida ay nafsadda qofka bani'aadanka ah, u saamayso wixii loo sheego, ama uu arko, ama uu maqlo, si ka weyn oo aad uga xoog badan ayaa waxaa saameeya wixii uu isagu isugu sheekeeyo ama uu ku fikiro naftiisa dhexdeeda. Waa taas midda Alle uu qofka u tiiriyay isaga naftiisa,

haggaajinta nafsaddiisa ama wasakhaynteeda. Alle isaga ayuu u tiiriyay, isaga oo og, in qofkasta borogaraam lagu shubo oo nafsaddiisa la diyaariyo isaga oo yar oo aan qaan gaarin. Mas'uuliyad weyna ay ku leeyihiin mujtamacii uu ku dhexnoolaa iyo dadkii soo tarbiyeeyay. Waxaas oo dhan oo jira haddana mas'uuliyadda weyn waxay saarantahay qofka naftiisa. Waa inuu doortaa isagu waxa uu rabo iyo waxa uusan rabin, markii uu qaan gaaro, oo uu bilaabo inuu mas'uul noqdo.

Culummada cilmu-nafsigu waxay aamminsanyihiin inay aad u xoog badantahay waxa qofku isugu sheekeeyo naftiisa dhexdeeda. Waxaasi saamayn weyn ayay ku yeelanayaan noloshiisa iyo caafimaadkiisa iyo waxa uu noqon doono. Waxay aad uga xoog badan yihiin wixii kor uga yimaada oo dad kale isku dayaan inay ku shubaan. Sidaas daraadeed waxay aad ugu taliyaan in qofku naftiis borogaraam gareeyo oo isagu wax ku shubo, isla markaasna uu ka waardiyeeyo in cidkale wuxuusan rabin ku shubto maskaxdiisa, si ay u qaabayso nafsaddiisa iyo sida uu u fikirayo. Had iyo jeer, waa inuu doortaa waxa runta ah ee wanaagsan, uuna diidaa waxyaabaha beenta ah oo aan wanaagsanayn. Waa inuu doortaa Wax yaabaha kaalmaynaya horumarkiisa iyo caafimaadkiisa, uuna diidaa qisooyinka iyo sheekooyinka xumaanta baraya, ama naftiisa caayaya.

Carruurtu waxay marka hore ka qaataan, qaymaynta nafsaddooda waalidkood. Haddii waalidku qadariyo, qiimeeyo, ammaano, aammino, jaclaado waxay arrimahaas u turjumayaan inay wax fiican oo qiimo leh yihiin. Xumaanta

way iskala waynaanayaan. Nafsaddoodana way qiimaynayaan. Haddii ay lab yihiin iyo haddii ay dhadig yihiinba. Sidaas daraaddeed, dadka cilmu-nafsiga wax kayaqaan, waxay dadka waydiiyaan, meeshii, iyo sidii ay u soo koreen. Taasi waxay qayb ka qaadanaysaa in la ogaado, qofkaas nafsaddiisu sida ay tahay, ama ay ahaan jirtay.

Soomaalida, dhaqannada laga fiican yahay oo ay leedahay, waxaa ka mid ah dhaqanka yasidda iyo qiimo ridka dadka qaarkood oo lagu sheego Midgo, Yibro, tumaallo, gabooyo, iyo magacyo kale oo lamid ah. Bulshadu kuma baraarugsana dhibaatada arrintaasi leedahay iyo sida ay uga soo horjeedo Diinta Islaamka iyo akhlaaqda Bila'aadanka isla markaasna ay u tahay ceeb weyn iyo caddaalad daro ummadda korka kasaaran. Waxaa layaab leh, inaysan arrintaas ku baraarugin, waxna ka qaban Culumada Diintu oo intabadan iyagu dadka ku baraarujiyay wax yaabaha Munkarka ah ee Diinta ku xun. Iyaga laftigooda ayaa dhaqanka ka mid ah. Uma haystaan in arrintaasi Munkar weyn tahay. Runtii waa Munkar iyo ceeb weyn.

Halka ay arrintaas mawduucaan xiriirka kala leedahay waxaa weeye sida ay u saamaysay nafsiyaadka dadka Qabiiladaas ah. Waxaa la sheegaa inta badan inaysan Diinta iyo shaqada midna ku fiicnayn. Waxaa kale oo la sheegaa inaysan lahayn hanti badan oo ay isaga qanacsan yihiin kaliya maalintaas waxay cunaan, maxaa yeelay nafsaddooda, ayaa mujtamacu dhaawacay. Dadkaasi waa Muslimiin Diin ahaan, dad ahaanna waa Soomaali, haddana

waxay rumaysteen ama qaateen wixii mujtamacu ku sheegayay.

Maxaa dhici lahaa haddii aysan rumaysteen oo ay diidi lahaayeen warkaas iyo midab kala soocaas? Runtii way adagtahay arrintaasi oo "**Dad kaabadan iyo biyo kaabadan labaduba way ku hanfajiiyaan**". Laakiin haddana ma aysan saamayseen aftooda haddii ay iyagu u diidi lahaayeen. Oo ay oran lahaayeen, waxaa dad liita ah, dadka waxaas rumaysan ee ma aha annaga. Waxaa bakhtiga cuna dadka aan ka xishoonayn dulmiga iyo caddaalad darrada ee ma aha annaga. Haddii aysan rumaysteen oo ay heli lahaayeen baraarugsanaan, iyo cid kale oo arrintaas ku dhiiri galisa nafsaddooda uma saamayseen sida ay hadda u saamaysay, oo ay hadda uga muuqato meelo badan oo noloshooda ka mid ah. Waan jeclaan lahaa inaan arko arrintaas oo dhammaatay oo taariikh kaliya noqotay.

Caddaaladda Alle iyo sida nidaamka rabbaaniga ah u shaqeeyo waa layaab! Waxaa Alle qadaray, intaan aakhiro iyo maalinta abaal marrinta la gaarrin, in Soomaali oo dhan ay midgo noqdaan caalamka kale agtiisa. Haddii aad la joogto Afrikaanka kale waxay kuu arkaan, qaxooti aan xishoonayn oo been iyo sharci darro waddankooda ku soo galay oo aan maslaxaddiisa aqoon. Way ku xaqirayaan wayna ku dulminayaan. Haddii aad haysato warqadahooda sida basaboorka iyo warqadda dhalashada, waxay u arkaan been abuur iyo wax la farsameeyey. Haddii aad joogto, waddammada reer Gelbeedka waxay kuu arkaan sidoo kale, waxayna dheer yihiin inaad ku nooshahay iyaga

dhididkooda iyo waxay iyagu shaqeeyeen ee aadan adigu shaqaysanayn. Taasi waxay dhalisay in arrintaasi saamaysay nafsiyaadka dadka Soomaalida ah oo ay noqdeen dhammaantood dad la xaqiro oo aan sharaf ku lahayn halkaas.

Waxay qaataan, wax la siiyo oo ay tuugsadeen. Waa loo taliyaa ee iyagu ma tashadaan. Haweenka iyo carruurta waxaa maamula cidda biilka ka bixisa. Odaygii wuxuu noqday shaqo la'aan. Wuu moral jabay. Markaas ayuu bilaabay inuu daroogo isticmaalo. Dhallin yaradii waxay garan waayeen, meel ay ka yimaadeen iyo waxa ay yihiin. Waxay dhumiyeen haybkoodii iyo qoomiyaddoodii. Waxay illaaween Diintoodii iyo dhaqan koodii. Waxay bilaabeen daroogo iyo tuugo, markaas ayaa xabsiyada la dhigay, midgaannimaduna waa sidaas. Waa qof niyad-jabay oo dhumiyay isla waynidii iyo rajadii. Waana mawduuca arrintaani ku saabsantahay. Waa mawduuca nafsadda iyo sida ay u shaqayso iyo waxyaabaha saameeya ee kor u qaadideeda ama hoos u dhigiddeeda ku lug leh. Soomaali oo dhan Alle wuxuu qadaray, intaan aakhiro lagaarin inay adduunka Midgo ku noqdeen - Sida ay iyagu rumaysan yihiin-.

## Camalku  waa niyada

“**Qof  walba, waxaa la siiyaa, wixii uu niyaysto**”

Qaybtaan  koowaad,  waxay  ka koobantahay, 7 cutub, oo ka hadlaya, sidii aad  naftaada u fahmi lahayd. Sidii aad u adeegsan lahayd iyo sidii aad naftaada iyo nafta dadka kalaba u qaabayn lahayd. Qaybtaan, waxaad ka baran doontaa, sidii aad naftaada ugu shubi lahayd ama  u galin lahayd waxaad adigu rabto. Haddii  aad barato inaad naftaada qaabayso oo aad ka dhigto sida aad rabto, waxaa meesha kabaxaya, inaad aqbasho, nafsad aadan adigu diyaarin oo aadan sifayn. Waxaad  noqonaysaa, qofka aad rabto inaad noqoto. Waxaad qaybtaan ka baranaysaa, Ruuxda, Nafsadda waxyaabaha ku saabsan.

“**Waxaad u baahantahay inaad noqoto qofka aad istaahisho**”

Soo sidaas  ma  rabtid?  Haa waan rabnaa.  Kulligeen, waan rabnaa inaan ahaanno qofka jira, jiritaankiisana la ictiraafsan yahay.  Waxaad u baahantahay,  xaalad  nafsadeed  oo  kuu saamaxaysa  inaad  leedahay kalsooni, dhiirani, awood, wax qabad, waasacnimo iyo jacaly.  Ka sokow,  cilmiga  farsamada iyo caqliga waxaad u baahantahay nafsad qani ah oo xoog leh  oo intaas  oo dhan  kuu  keeni  karta  ama  qaadi  karta. Nolosha  dhabta  ah  ee  ficilka  ah  ee  aan kunoolnahay waxaan  ka heli karnaa  tusaale  dhab ah  oo  arrintaas  ku saabsan.  Waxaan  heli karnaa,  Borofaysor, Dector, Engeneer,

waayo-arag, qaadka iyo daroogada u-go'ay oo aan naftiisii meel ku ogayn. Waxaan kale oo aragnaa, wiil ama gabadh aan waligood iskuul dhigan oo cibaadaysanaya, dadka wax taraya, waalidkood u adeegaya, qaraabadii xiriirinaya, shaqaynaya oo carruurtii korinaya, wax baraya, kor u socda oo nolosha ka lib keenay.

Waxaan aragnay hooyo toban iyo kabadan carruur agoon ah dhashay. Kadibna korisay, wax bartay, hanti ay ku noolaadaan u tacabtay, cid u kaalmaysay oo aan Allaha weyn ahayna ayna jirin. Hooyadaasi nafsad nool oo Alle kuxiran oo cibaadaysata oo sadaqada bixisa ayay leedahay. Halka dakhtarka cilmiga leh oo qaadka u go'ay, uu leeyahay nafsad daciif ah. Haddii nafsadii cilladi ku dhacday, cilmigii, caqligii iyo khibraddii midna wax ma tarayaan. Taas waa mid aynu naqaan oo aynu nolosheenna soomaaliyeed ku aragnay oo aynu ku ognahay. Taasi waxay ina tusaysaa, sida dhisidda nafsaddu muhim u tahay, adna aad ugu baahantahay. Haddii aad rabto inaad asaagaa la tartanto ama ka fiicnaato -kala fiicnaantu wax kale ma aha ee waa aa nafsad kala dooroon- Kudadaal sidii aad nafsaddaada u baran lahayd una dhisi lahayd. Waana midda buugaani ku saabsan yahay. Markaad wax bixiso, waa xaalad nafsi ah. Markaad dadka kale caawiso waa xaalad nafsi ah. Markaad u bareerto inaad qabato hawl weyn oo dadka kale ka baqeen waa xaalad nafsi ah. Wax qabadkii Mahantiir Gaandi uu Hindia ku xoreeyay, wuxuu ahaa xaalad nafsi ah oo uu haystay. Nelson Mandeella, markii uu xornimo South Africa u halgamay oo

uu ku samray dhibtii iyo xabsigii dheeraa, wuxuu ku sugnaa xaalad nafsi ah oo arrintaas u saamaxaysa. Xaaladda nafsaddu markaas ku sugantahay waa muhiim. Markii aad ku sugantahay xaalad nafsadeed oo intaas lid keeda ah, waxaad ku sugantahay, xaalad nafsadeed oo liidata oo aad u baahantahay inaad badasho oo aad wax ka qabato. Mar fiiri macnaha ayaadaan Quraanka ah.

" وطائفة قدأهمتهم أنفسهم، يظنّون بالله غيرالحقّ، ظن الجاهلية، يقولون هل لنامن الامرمن شيء قل انّ الامركله لله"

Alle wuxuu inoo sheegayaa xaaladda nafsadeed ee ay ku sugnaayeen qaar ka mid ah Asaxaabtii Nabiga Maalintii dagaalkii Uxud. Wuxuu yiri :

(**koox idinka mid ah maalintaas waxa mashquulisay naftooda cabsi darteed, Ilaahay bay waxay ku maleeyeen malo jaahilnimo ah oo an qaban, iyagoo yiri miyaan anaga talada waxba ku lahayn, deeto rasuulka lagu yiri ku dheh talada oo dhan allaa iska leh**)

Alle wuxuu inooga waramayaa sida ay ahayd nafsadda qaar asaxaabta ka mid ah, maalintii dagaalka Uxud. Alle wuxuu ka cabbiray, in nafsaddoodu mushquulisay. Xaaladda ugu daran waa markii nafsaddaadu culays kugu noqoto oo ay ku mashquuliso. Waa xaalad nafsadeed aad u dhib badan.

Waxaan aragnaa in dadku kala duwanyihiin, waxa ay rabaan oo ay raadinayaan. Waxa ay jecelyihiin. Sida ay u fikirayaan. Waxa ay qiimaynayaan. Nolosha ay rabaan

ama ay doonayaan. Waxaas oo dhan dadku way ku kala duwan yihiin. Qof ayaa waxaa qancinaya wax yar oo la siiyay. Haddii la yiraahdo waxaad rabto sheego waad helaysaaye, waxaa laga yaabaa inuu sheegto waxii uu baska ku raaci lahaa ama uu maanta ku qadayn lahaa. Qofkale wax weyn ayuu rabaa. Dhibta dadkiisa iyo dalkiisa haysata inuu xalliyo wax ka yar uma cuntamayaan, mana lagu dayayo, mana looga yaabo in wax yar oo laaluush ah, lagu sasabo. Xaaladdaas nafsaddu sarrayso, waxaa jira dad ku caanbaxay, taariikhdaan dhow iyo caalamkaan aan hadda joogno. Waxaa dadkaas ka mid ah Nilson mandale, koofur Africa.

Waxaa ka mid ah, mahadtiir Gaandi, oo Hindiya gumaysigii Ingiriiska ka xoreeyay. Dadka noocaas oo kale ah, waxay leeyihiin nafsad sarraysa oo aad u xoogbadan. Dadka qaarkood, markay dhibta arkaan markaba way niyad jabayaan. Waxaaba la adkaanaysaa in la isku dayo oo xal looraadiyo. Markaba way quusanayaan. Dadka noocaas oo kale ah, waa dad nafsaddoodu jilicsantahay ama liidato. Wax qabadka qofka iyo himmaddiisu waxay ku xirantahay xaaladda nafsaddiisa. Waa muhiim inaan nafsadda daawayno oo kor u qaadno. Liibaanteenna adduun iyo midda aakhiraba waxay ku xirantahay inaan nafsaddeena daawayno oo kor u qaadno oo ku xirno Eebbe abuuray.

## Dabeecadda Nafsadda Aadanaha

Nafsadda insaanku waa daciif. Waa wax jilicsan oo aan adkaysi badan lahayn. Dhib badan iyo dheef badan midna uma adkaysan karto. Alle wuxuu Quraankiisa ku yiri: "**Insaanka waxaa lagu abuuray daciifnimo**" Waxaa kale oo Alle yiri: "**Insaanka waxaa lagu abuuray, adkaysi la'aan"**. Haddii dhib taabto aad ayuu u argagaxayaa. Waa quusanayaa. Wuu is nacayaa. Haddii khayr taabtana waa ku bakhaylayaa. Wuxuu isku dayayaa inuu iska haysto oo uu san cid kale wax kasiin. Alle wuxuu ku yiri aayada kale: "**Insaanku waa dheef jacel yahay, waana dhib neceb yahay**"

"وخلق الانسان ضعيفا "

"**Insaanka waxaa la abuuray isaga oo daciif ah**"

"أنّالانسان خلق هلوعا، اذامسّه الشرّ جزوعا واذامسّه الخيرمنوعا"

"**Insaanka waxaa lagu abuuray, baqdin iyo argagax, haddii dhib gaaro, wuu naxayaa, haddii khayr taabto, wuu diidayaa inuu gudbiyo, waa bakhayl**."

"وأنةّ لحبّ الخيرلشديد"

"**Insaanku jacaylka uu xoolaha uqabo waa mid xad dhaf ah**"'

Aayadahaasi, waxay tusinayaan dabeecadda runta ah ee joogtada ah ee Insaanka. Haddaba nafsadda Insaanku waa

taas. Dabcigeeda joogtada ahna waa sidaas. Waxaa kaliya oo wax ka qaban kara waa barnaamijka- (borogaraamka) Alle ugu talagalay.

Dabeecaddaas insaanku waa middii dhulka ka dhalatay. Waa middii dhaqanka iyo rumayntu samaysay. Ma aha middii ruuxda. Tan waa midda loo badan yahay, oo ka timid wixii la bartay, wixii lala kulmay, wixii la maqlay, iyo waswasada shaydaanka. Nafsadaan hadda la tilmaamay waxaa lagu magacaabaa “Nafsaddii beenta ahayd”. Waxaa sidaas loo yiri, waa nafsad baqdin iyo kalinimo ku dhisan. Waa nafsad rumaysan inaan cidna u maqnayn. Waa nafsad rumaysan in ninkii xoogle xabagta goosto. Waa nafsad rumaysan halganka iyo kala adkaanshaha. Waa nafsad aan Alle xiriir lalahayn warna ka hayn. Waa nafsad iyada iyo abuureheedu kala xiriir furteen, sida ay u aragto. Waa nafsadda laquda Englishka lagu dhaho “Ego”

Marka Nafsadda halkaan lagu sheegay iyo Ruuxdu waa kala laba. Adiga ayaa lagaa rabaa inaad rabbaani noqoto ama aad fulay noqoto aad ku sifowdo, tilmaamahaas Quraanku sheegay.

## Ruuxda & Nafta

Haddii aad rabto waa isku mid, haddii kalana waa kala laba. Muhimmaddu ma aha inaan cilmi qota dheer oo aan la inoogu talagalin aan ka ogaanno Ruuxda iyo Nafsadda. Muhimmaddu waa inaan ka barano wixii inaga quseeya.

Waxaan ognahay in xayawaanka oo dhan uu naf leeyahay. Haddii naftaasi ka baxdo inuu dhimanayo. Insaankuna waa lamid. Haddii naftu qof ka dhacdo waa mayd. Waa in la aaso oo jirkiisa la iska asturo. Haddana waxaan ognahay in Insaanku Caqli iyo garasho leeyahay. Xayawaanka kale oo dhan malaha caqli. Waxaan ognahay in Alle uu Nibi Aadam ruuxdiisa ku afuufay.

Nafsadda, Ruuxda, caqliga waa shay jira oo aan wax qabadkiisa aragno, laakiin aynaan awood u lahayn inaan isaga aragno. Waa nooc ruuxi ah, oo aynaan arki karin, taaban karin, sawiri karin, haddana waxaan aragnaa wax qabadkoodii iyo shaqadoodii, waxaan kale oo naqaanaa magacyadooda. Muhimmaddu waa inaan ogaanno sida ay inoo saamaynayso iyo wax qabadkeeda, laakiin magacu waa is kumid. Haddii aad nafsad ku magacawdo iyo haddii aad ruux ku magacawdo ujeedadu waa isku mid. Waxaana Alle inoo sheegay inaynaan ruuxda wax badan ka ogaan karin.

Cilmu-nafsi ama (psychology) waa daraaso ku saabsan dhaqanka dadka iyo maskaxda aadanuhu sida ay u shaqayso oo la waafajiyay cilmi iyo nidaam lagu daraasaynayo nafsadda aadanaha, Sidaasi waa tilmaanta ugu fudud ee (Psychology) Cilmu-nafsiga. Marka cilmu-nafsigu waa ruuxda, caqliga iyo wax yaabo la xiriira caalamka ruuxda ee aynaan wax wayn ka garanayn. Alle wuxuu Quraankiisa ku yiri:

ويسئلونك عن الرّوح، قل الرّوح من أمرربّى وماأوتيت من العلم الاّقليلا" (الاسراء) أية "
85

(**Waxay ku waydiinayaan cilmiga ruuxda ku saabsan. Waxaad ku tiraahdaa, ruuxdu waxay ka mid tahay, wax yaabaha Alle u gaarka ah, cilmigana wax badan idinka la idin kama siin**.)

Sidaas daraadeed, sirta ruuxda ku saabsan, Alle kaliya ayaa og salkeeda iyo xaqiiqadeeda. Aadanuhu wuxuu ka hadlayaa wixii uu ka ogaaday ama uu isku dayay inuu ogaado.

Intabadan waxaa cilmigaan loo adeegsadaa daawaynta jirrooyinka maskaxda la xiriira. Maskaxduna waa xubin jirka ka mid ah oo neerfayaal badan ku taxan yihiin oo wax laga ogaan karo. Waxaan la ogayn xiriirka ruuxda iyo maskaxda iyo waxa ruuxdu tahay. Sida ugu fiican ee loo ogaan karo waa in la rumeeyo sidii uu Alle u sheegay. Alle wuxuu yiri:

"الَّذِي أَحْسَنَ كُلَّ شَيْءٍ خَلَقَهُ ۖ وَبَدَأَ خَلْقَ الْإِنسَانِ مِن طِينٍ (7) ثُمَّ جَعَلَ نَسْلَهُ مِن سُلَالَةٍ مِّن مَّاءٍ مَّهِينٍ (8) ثُمَّ سَوَّاهُ وَنَفَخَ فِيهِ مِن رُّوحِهِ ۖ وَجَعَلَ لَكُمُ السَّمْعَ وَالْأَبْصَارَ وَالْأَفْئِدَةَ ۚ قَلِيلًا مَّا تَشْكُرُونَ (السجدةأية

(**Alle wax kasta abuuriddiisa wanaajiyay, isla markaasna Insaanka dhoobo ka abuuray, kadibna firkiisa ku saleeyay dhacaanka manida iyo ukunta , kadibna ruuxdiisa ku afuufay, oo u yeelay maqalka iyo aragga, iyo garashada, waxaa yar, inta aad qaddarinaysaan arrimahaas iyo nicmooyinkaas**)

Alle wuxuu sheegay inuu Insaanka ku afuufay ruux oo markaas uu yeeshay caqliga, maqalka, iyo wax aragga. Haddana Alle ayaa og sirta ruuxda innaguna wax badan kama ogin. Maxaa yeelay, cilmiga ruuxda wax yar ayaan ka ognahay. Waa taas midda lagu magacaabay (Psychology) ama cilmu nafsi.

Midda kale oo layaabka leh, waxaa weeye wax kasta oo dhib ah waxaad ku xallin kartaa qaab ruuxi ah. Jirrada, faqriga iyo wax kasta oo aad u baahantahay waxaad ku heli kartaa xiriirka Alle iyo ruuxdaada oo aad adeegsato oo aad u dirto waxa aad u baahantahay. Markii aad si dhab ah u rumaysantahay xiriirka adiga iyo Alle iyo inaadan marna kaligaa ahayn ee mar walba oo aad Eebbe gargaar waydiisatid Alle kula jiro, waxaad helaysaa awood aad ku amarto wax alle iyo wixii aad u baahantahay. Mucjisooyinka Anbiyada iyo Awliyadu wax kale ma aha ee xiriir xoog badan iyo iimaan adag oo iyaga iyo Alle ka dhexeeya. Marka ogow inaad haysato sababtii aad wax walba ku heli lahayd haddii aad adigu diyaar u tahay inaad adeegsato awoodda wayn ee Alle ku siiyay. Waxaad u baahan tahay iimaan adag oo dhab ah iyo ku xirnaan Alle. Markaas waxaad helaysaa wax kasta oo aad Alle waydiisatid.

## Daawada dabeecadda insaanku waa iimaanka iyo cibaadada

Nafsadaas aadanuhu waxay ku hagaagi kartaa marka lagu shubo, ruuxdii Alle u soo dajiyay, taas oo laga heli karo Quraanka Kariimka ah. Wax yaabaha aadanuhu ku faano, sida caddaaladda, Ixsaanka, Ilaalinta xuquuqada aadanaha, bilaa'aadannimada waxaas oo dhan maxaa sal u ah haddii aysan marka horaba, jirin iimaan, cabsi Alle iyo rajayn naxariistiisa maalinta aakhiro. Haddii aysan marka horeba arrintaasi jirin maxaa sal u ah, wanaaga aadanaha laga filayo. Hadiiba layiri waxaan nahay asal xayawaan oo xayawaanka kale lamid ah, maxaa ku kallifaya inuu caddaalad sameeyo, maxayse tahay insaaniyadda la sheeganayo haddiiba ladiiday, wixii Alle ku saabsanaa ee insaanka quseeyay oo dhan. Insaaniyad waxaan sheegan karnaa marka aan aqbalno wixii Alle inagu sheegay iyo ruuxdii uu inagu afuufay iyo mas'uuliyadda ina saaran. Waxaas oo dhan way is wataan, wayna xiriiraan. Haddii taas la waayo, dabeecadda dhabta ah ee aadanuhu waa sidaan Alle sheegay.

( إن الإنسان خلق هلوعا ( 19 ) إذا مسه الشر جزوعا ( 20 ) وإذا مسه الخير منوعا ( 21إلا المصلين ( 22 ) الذين هم على صلاتهم دائمون ( 23 ) والذين في أموالهم حق معلوم ( 24 ) للسائل والمحروم ( 25 ) والذين يصدقون بيوم الدين ( 26 ) والذين هم من عذاب ربهم مشفقون ( 27 ) إن عذاب ربهم غير مأمون ( 28 ) والذين هم لفروجهم

حافظون ( 29 ) إلا على أزواجهم أو ما ملكت أيمانهم فإنهم غير ملومين ( 30 ) فمن ابتغى وراء ذلك فأولئك هم العادون ( 31 ) والذين هم لأماناتهم وعهدهم راعون 32 ) (والذين هم بشهاداتهم قائمون ( 33 ) والذين هم على صلاتهم يحافظون ( 34 ) أولئك في جنات مكرمون( ( 35 )

"Alle wuxuu inoo sheegay, in Insaanku argagax iyo walwal ku sugan yahay, illaa kuwa tukanaya oo salaaddooda joogteeya mooyee. Kuwaas oo maalkooda ka qoondeeyay qayb loogu talagalay, dadka bulshada ka go'ay oo aan waxba ka filanayn, iyo kuwa tuugsanaya. Labadaas qaybood oo mujtamaca ka mid ah, ay xoolo ugu talagaleen. Waayo waxay rumaysan yihiin, Maalinta abaal marinta. Maalintaas ayay filanayaan inay helaan kaydkii ay dhigteen. Waxay kale oo ka baqayaan cadaabka Alle. Maxaa yeelay, cadaabka Alle waa mid aan laga aammin ahaan karin. Sidii uu rabo, iyo markii uu rabo ayuu kuu imaanayaa. Waa kuwa iska ilaaliyay shahwo gudasho aan xalaal ahayn. Xubnahooda tarankana waxay ka ilaaliyeen meel aan xalaal u ahayn. Waxay ku ekaadeen, lammaanahooda kaliya. Sideedaba qofkii raadiya shahwo gudasho bilaash ah waa khaldan yahay.

Ninka doonaya inuu raaxaysto, oo laga yaabo raaxadiisii inay keentu, danbi Alle laga galo, uur, ummul iyo cunug aan cidna kuugu xil qabin sow ninkaasi ma collaytamin. Wuxuu la collaytamay, dabeecadda, wuxuuna diiday inuu qaado wixii ka dhashay, raaxadiisii, wuxuu uga tagay, gabadh yar oo miskiin ah iyo waalidkeed iyo mujtamaca. Wuxuu sababay dhaawac iyo sharaf dhac joogto ah. Nin kaasi wuu collaytamay. Wuxuu la collaytamay, Alle xeerkiisa, gabadhii uu ka zinaystay iyo dhammaan mujtamaca. Sidaas daraadeed

ayaa Alle ku magacaabay zinada collaytan. “Kuwaasi Alle ayay la collaytameen” Waa kuwa shahaadadooda ilaalinaya” Waa maxay shahaado? Waa sharftaada, sumcaddaada, qofnimadaada, diintaada iyo akhlaaqdaada. “Waa kuwa markhaatigooda ilaalinaya”

Haddii qofku cibaadaysto wuu caafimaadayaa. Nafsaddiisu waxay noqonaysaa mid degan, faraxsan, isku kalsoon, aan baqayn, aan argagaxsanayn. Runtii xiriirka ka dhexeeya iimaanka, cibaadada iyo nafsadda insaanku waa sir Alle kaliga garanayo. Haye ahaatee waxaan aragnaa natiijada ka dhalatay cibaadada. Waxa ugu weyn oo aadanuhu maanta raadinayo, waa deganaan iyo xasillooni. Si ay u helaan magaranayaan, balse naftii Alle rumaysay, haddana cibaado ku darta way biskoonaysaa. Waa taas midda aan aragnaa had iyo jeer.

Soomaaliya, dadka dadaalaya oo wax isku dayaya, waa dadka Diinta ku dadaala. Waa dadka masaajidda aada. Waa dadka quraanka akhriya. Dadkaas waxaa laga yaabaa inay bixiyaan wax uun khidmo ah; Khidmo Alle, khidmo waalid, khidmo qaraabo, khidmo waddan, khidmo wax barid. Way dadaalayaan. Haddii la eego xaaladda ay ku sugan yihiin iyo waxa hareerahooda ka jira, wax dhiiri galiya kama muuqdaan, haddana way faraxsan yihiin oo way dadaalayaan. Taasi waa calaamadda iimaanka iyo cibaadada.

Dhallinyaradii reer galbeedka aaday ama u qaxay, waxaa xil isa saara kuwa Quraanka akhriya oo salaadda tukada. Kuwaas ayaa hooyo soo waca. Kuwaas ayaa aabbe

ixtiraama. Kuwaas ayaa qaraabo xirriiriya. Xattaa haddii aysan wax barasho lahayn. Xattaa haddii aysan luqada iyo dhaqanka aqoon. Xattaa haddii aysan gaari wadi karin, waxaas oo dhan wax weyn ma'aha. Waxay ku dadaalayaan inay khidmo bixiyaan. Khidmo Alle iyo khidmo waalid iyo khidmo mujtamaca iyo khidmo waddan. Ma aanan ogayn kumana baraarugsanayn, mardhow kahor, farqiga cilmiga iyo iimaanka.

Wiilka shahaada jaamacadda haysta oo xeerka iyo luqada aadka u yaqaan, oo shaqada fiican haysta, khidmo ma bixin karo wuuna rafaad san yahay. Waxaana laga yaabaa inuusan soowicin hooyadi bilo badan, ilaa ay illowday. Haddii ay kuu simanto, inaad carruurtaada quraanka iyo cibaadada barto iyo inaad cilmiga iskuulka barto, dooro quraanka kaliya. Waayo qofka quraanka akhriya oo cibaadaysta wuu nool yahay. Waxa nool ayaa wax ku tari kara. Midka shahaadada haysta ee aan iimaanka lahayn ma noola ee waa mayd.

Markaan sidaas lee yahay, ma dhiiri-galinayo jahliga iyo wax barasho la'aanta ee waxaan kaliya dhiiri-galinayaa iimaanka iyo cibaadada. Ma u dhiiri-galinaayo, sidii caadiga ahayd ee kaliya inay diin tahay. Waxaanu inay daawada nafsadda tahay. Waxaan u dhiiri galinayaa Iimaanka iyo cibaadada inay daawada nafsadda tahay. Markaan rabno nafsad caafimaad qabta oo wax qaban karta, waa inay iimaan leedahay. Dhammaan dadkii aadanaha wax u qabtay oo mushkilaadkooda xalliyay, waxay lahaayeen nafsad qawi ah oo aad u xoog badan. Fiiri Nilsen mandeella, south Africa. Fiiri Mahatir gaandi, Hindia. Martin Lutherkin iyo kuwii la

mid ka ahaa. Dadkaasi waxay dadka kale uga duwanaayeen waxay la haayeen nafsad adag oo wax qaban karta. Wax nafsadda xoojiya waxaa ugu wayn iimaanka iyo cibaadada.

Cilladaha dabeeciga ah ee lagu abuuray insaanka, waxaa daawayn kara oo kaliya iimaanka iyo cibaadada. Haddii kale insaanku waa xarig la'. Waa khatar. Waxaa Alle yiri.

"أم لهم نصيب من الملك فاذالايوتون النّاس نقيرا"

**"Milkiga Alle miyay wax ku lee yihiin. Haddii wax laga siin lahaa, qofna wax yar kama ay siiyeen"**

Insaanku waa bakhayl. Dabciga xasadnimada ayaa lagu dabeeceeyay, illaa qof Alle iimaan ku daaweeyay mooyee.

"قل لّوكنتم تملكون خزائن رحمة ربّى اذا لامسكتم، خشية الانفاق، وكان الانسان قتورا"

**"Haddaad milkin lahaydeen maqaasiinnada raxmadda Alle, dadka ayaad u diidi lahaydeen, oo waad ka xabbisi lahaydeen, maxaa yeelay, waxaad ka baqaysaan, wax bixinta, insaanku waa bakhayl"**

Alle wuxuu yiri:

" والعصرانّ الانسان لفى خسر، الّ االّذين أمنوا وعملوالصّالحات، وتواصو بالحقّ وتواصو بالصّبر"

**"Dhab ahaantii waxaan ku dhaaranayaa Casriga insaanku khasaare ayuu ku sugan yahay. Kaliya waxaa khasaarahaas ka badbaaday, kuwa Alle rumeeyay isla markaasna camal wanaagsan ku daray oo xaqa iyo sammirka isku waaniyay"**

Khasaaro weyn oo naf iyo maalba gaaraya ayaa la khasaarayaa haddii iimaan iyo cibaado lawaayo. Wax yaabaha ugu waawayn oo ugu dhaliyay inaan mawduucaan ka fikiro, qoro, daraaseeyo waxaa ka mid ah, dhallinyarada faraha badan ee Soomaalida ah ee xabsiyada reer galbeedka ku jira. Runtii dal iyo dawlad waan waynay, dullina waan dhaxalnay, laakiin dhallinyaro xabsiyo ku jirta oo xummaan oo dhan kula kulmay ma aannan lahaan jirin. Waxay ka mid tahay wax yaabaha soo kordhay. Waa shay xanuun badan.

Waxyaabaha aan buuggaan ku qoray, ee ku saabsan nafsadda iyo daawadeeda, waxaan ugu talagalay inay dad badani ku biskoodaan, gaar ahaan dhallinyarada. Gaar ahaan kuwa waddammada reer galbeedka kunnool. Waxaa laga yaabaa inaysan luqada soomaaliga wax ku akhrin ama aysan si fiican u fahmin. Taasi waa shay immaan kara. Haddana haddii xal la helo, si uunbaa loogu gudbin, ama luqada ay markaas garanayaan ayaa loogu qorin. Arrinta muhiimka ah waxaa weeye inaan mushkiladda waa jahno oo aan xal u raadino. Waxaan ilaahay ka rajaynayaa in dad badan ilaahay ku biskeeyo buuggaan oo ay ka helaan waxay u baahnaayeen. Ilaahay quluubta wuxuu ku nooleeyaa Erayo - Kalimaad- Waxa xaddaaradaha sameeyay ee aadanaha ka dhigay sida uu yahay waa kalimaad. Waa erayo la sheegay. Wixii Alle aadanaha u sheegay ee rusushiisa ku soo dajiyay, erayo ayuu ugu sheegay. Xikmaddii iyo cilmigii bini'aadanku sheegeen, waxay u adeegsadeen Erayo. Sidaas oo kale ayaan rajaynaynaa in erayo afsoomaali lagu qoray oo buuggaan lagu

sheegay ay quluub badan ku daawoobi doonto. Waan rajaynayaa.

Horumarka iyo khayrka aadanuhu keeno waxaa asal u ah nafsad xooggan. Nafsad isku kalsoon. Nafsad inay wax bixiso rabta. Nafsad caafimaad qabta. Cilmiga, xirfadda, caqligu, waa markaas kadib. Haddii aan nafsad fiican la helin, cilmigii iyo caqligiiba way dhumayaan. Ummadda nafsad ahaan nool, laakiin aan cilmi lahayn, waa soomaali oo kale. Markaad rabto inaad mawduucaan si fiican u fahamto Soomaali fiiri. Soomaali waligeed waxay can ku ahayd nafsad caafimaad qabta. Nafsad caafimaad qabta, waxay leedahay, xidid iyo xigaalo.

Waxay leedahay, xasaasiyad. Waxay leedahay wax ay diido oo aan lagu dayin. Waxay leedahay xishood iyo wax quur. Waxay garanaysaa xil iyo xigaalo. Waa nafsad nool oo wax qaban karta waxna dhalin karta. Tusaale ahaan: Soomaalidu markay islaysay, meel ay u cararto waxaa ugu dhawaa dalalka Kenya iyo Itoobiya: Dad badan oo maato u badan ayaa ku soo qaxay dalka Kenya. Dadkaasi, xoolo ma wadan, cilmi badan malahayn, luqada waddanka lagaga hadlo ma'aysan aqoon, dhaqanka iyo xeerka waddanka ma aysan aqoon, haddana danta ayaa ku khasabtay inay Keenya soo degaan.

Dadka ay u yimaadeed ee Kenyanka ah, waxay ahaayeen dad wax bartay oo tacliintu si xoog leh ugu fiday. Waxay ahaayeen dad dalkoodii iyo dawladdoodii dhex jooga. Waxay haysteen fursado badan oo aysan Soomaalidu haysan. Laakiin waxay ahaayeen dad xagga nafsadda kaga duwan Soomaalida

oo aan sida Soomaalida islawayni badan lahayn. Inkasta oo ay wanaag badan lahaayeen haddana xagga nafsadda Soomaalida ma gaari Karin. Way isla yaabanaayeen. Qoloba qoloda kale ayay la yaabanayd.

Wakhti yar kadib, Soomaalidii way dhaqdhaqaaqeen, waxayna xaqiijiyeen inay dad jira yihiin waxna soo kordhin karaan. Jahligooda iyo qariibnimada ay waddanka qariib ku yihiin kama celin inay jiritaankooda sugaan, oo ay dad badan oo Kenyaan ah shaqo siiyaan oo ay baraan ganacsiga iyo xarakaadka dhaqaale raadinta, ilaa soomaalida loo aqoonsaday, dad aan la dhayalsan Karin, oo hanti badan haysta, isla markaasna ay si xoog leh u dageen waddanka Kenya. Soomaalidu ma aysan lahayn dad badan oo kumaankun gaaraya oo “Jookoraa” la dhaho oo jidadka seexda. Dadkaasi waa dad nafsiyan dhintay oo rajadii dhumiyay. Waxayna ka dhalatay Zinada oo ku faaftay oo ay dhasheen dad badan oo aan qoys lahayn iyo is xiriirin la’aanta guud ee bulshada Keenyaatigu leedahay. Waa mushkulo Ijtimaaci ah.

Soomaalidu xagga nafsadda way fiicantahay inta badan. Waxaana loo baahan yahay in si ula kac ah loo ilaaliyo nafsaddaas diiran oo nool oo Alle ina siiyay. Waa taas midda aan isku xiriirinayno oo aan wax isugu hurayno, haddana qiiro daraadeed aan isugu laynayno. Maxaa yeelay, waxaan ka qiiroonaynaa wax aan macno weyn lahayn. Nafsadda caafimaadka qabta oo xoogga leh, marba waa sidii loo adeegsado. Haddii aadan wacyi kugu filan lahayn oo aadan sharta iyo khayrka kala sooci Karin, waxaa laga yaabaa in

nafsaddaada Qiirada badan meel khaldan loo adeegsado ama ay keento khasaare aan xad lahayn. Ummad nafsadda ka dhimatay, mas'uuliyad maqaadi karto, xaddaaradna ma samayn karto.

Haddaba buuggaan waxaan ugu talagalay, inaan ku uruuriyo, xeelado farsamo fiican lagu dhisay oo nafsadda aadanaha, gaar ahaan Soomaalida soocelisa oo ka dhigta ummad mar kale soo kacda oo cagaheeda ku istaagta oo aadanaha kale wax u qabata. Qof kasta, gaal iyo Muslim, caddaan iyo madaw oo Soomaali u dhabagala, wuxuu ogyahay inay Soomaalidu nooc gaar ah oo caalamka kale wax uga duwan ay tahy. Waxaan joognaa caalam uusan noolaan karin qof aan wax baran, iskaddaa inuu magac yeeshee. Haddana Soomaalidu waxay isku dayaysaa inay waddo samaysato ayada oo aan wax barasho lahayn. Ma dhiirigalinayo, mana yaraynayo khatarta wax barsho la'aanta iyo jahliga ee kaliya waxaan rabaa inaan muujiyo in Soomaalidu diricnimo fara badan leedaahy.

## Haybta aadanaha

Qaybtaan labaad, waxay ku saabsantahay, haybta Insaanka iyo meeshii uu kayimid iyo waxa uu yahay. Markuu abtirsado oo dhalashadiisa iyo meeshii uu ka yimid caddeeyo, waxaad ogaanaysaa inuu nasab yahay. Waxaad ogaanaysaa inuu Eebbe qiimeeyey noolaha dhanna ka isir iyo ab fiicnaysiiyey. Waxaa meesha ka baxaya aragtidii, Charles Darwin. Ninkaasi wuxuu ahaa nin u dhashay, waddanka Ingiriiska oo ku takhasusay, cilmiga noolaha. Wuxuu soo bandhigay, aragti oranaysa, in asalka aadanu ka yimid, xayawaan caadi ah, kadibna malaayiin sono, uu ku soo gaaray, qaabka uu hadda yahay. Wuxuu meesha kasaaray, in Alle SWT, uu Insaanka, si gaar ah u abuuray. Reer galbeedka oo wakhtigaas dagaal kula jiray, kaniisaddii cilmiga iyo caqligaba diiday, waxay u riyaaqeen aragtidaas Darwin.

Waxaana loogu magac daray, Cilmi. Aragtidaas, insaanka waxay u horseeday, khasaare aad u badan oo ay ka mid tahay, Daroogo, Qulub iyo inay xammili waayaan nolosha oo ay isdilaan. Baahidii ruuxda oo ahayd, inay u baahantahay, Iimaan, cibaado iyo inay ku xirantahay khaaligii abuurey. Fikraddaas Darwin, waa lagu khasaaray.

Haddii Alle gacantiisa aadam ku abuuray, isla markaasna ruuxda ku afuufay, innaga oo dhana aan aadam ka nimid oo Alle aan ognahay in Eebbe ina abuuray, soo iyadaasi wax lagu faano ma ahan, intii aan wax ka sokeeya ku faani lahayn.

Miyaysan sharaf ahayn in Alle S.W.T gacantiisa kugu abuuray.

Abtirsiinyaha aadanaha, qoowmiyadaha, dawladaha, qabiilada waxaa ka rasmi san oo run ah, abtirsiin xaqiiqiga ah ee ah meesha aan ka nimid oo ciidda iyo ruuxda ah. Soo kuguma filla inaad tiraahdo waxaan ku faanayaa in Eebbe gacantiisa igu abuuray, ruuxdiisana igu afuuday, isagaas ayaan ku xirnaanaya. Waa Alle aan wax waayin, laga adkaan, wax loo sheegin, wax ku cuslaan, aan walwal iyo armaa lagaa guulaystaa aysan ku jirin.

Haddii aad rabto millions dollar oo lacag ah, Alle si sahlan oo u dhiganta “Kun” (Ahow) ayuu kugu siin karaa. Haddaba isku xir Allahaas intii aad ku xirnaan lahayd qabiil iyo dawlad iyaguba faqri iyo dulli ka baqaya.

Qabiilku kuma abuurin, kumana arzuqo, hadhowna uma noqonaysid. Marka haddii aad intaas yaqiinsantahay meelsha aad ku xirmayso ha iska xumayn oo adiga oo heli kara inaad ku xirnaato meel sare oo awood leh oo wax ku tari karta ha isku koobin qabiil adiga wax kaa damcaya ama awood iyo hiil adiga kubidaya. Marka waxaad tahay kii Alle abuuray ee ruuxdiisa ku afuufay ee ma’laa’igtiisa ku amray inay u sujuudo. Ha is yaraysan ma yarid. Ha baqin kaligaa ma tihid ee waxaad leedahay Eebbe hodan ah, awood leh, xakiima oo yaqaana wax walba halka ay ku habboon yihiin.

## Karaamaynta Alle ee uu Insaanka karaameeyay

In Alle aadanaha karaameeyay oo malaa'igta ku amray inay aadam u sujuudaan oo dhulka wakiil uga dhiga oo cirka iyo dhulka iyo inta u dhexaysa loo sakhiray, waxay wax ka taraysaa xoojinta nafsadda insaanka. Marka horaba, qofka aadanaha ah wuxuu rumaysanayaa inuu wax macna leh yahay oo ay nafsaddiisu qiimo leedaahy. Fahamka noocaas ah qiimo weyn iyo dhiirigalin ayuu u noqonayaa nafsadda.

"ولقد كرّمنا بنى أدم. وحملناهم في البرّوالبحر، ورزقناهم من الطّيبات"

"**Waxaa dhab ah, inaan insaanka karaamaynay oo aan siinay, gaadiid ay fuulaan badda iyo birriga labadaba**"

Karaamadaas Alle uu huwiyay aadanaha, waxay u baahantahay, in mabda' laga dhigo oo qawaaniinta dawladaha lagu daro oo iskuulada lagu dhigo. Macne aad u ballaaran iyo sir weyn ayaa halkaas ku jirta. Haddii insaanka la karaameeyo oo xaqiisa la siiyo, isaga ayaa hawlaha kale oo dhan qabanaya. Isaga ayaa fikiraya. Isaga ayaa sanco loo baahan yahay soo saaraya. Isaga ayaa faqriga waa jahaya ee qani isu balaya. Isaga ayaa mushkilaadka kale oo dhan xallinaya.

Dawladaha aqoonsaday oo tixgaliyay, xuqquuda Insaanka way ka faa'iideen. Waxay soo saareen ayaa aadanaha oo dhan isticmaalayaan. Sidaas daraadeed waxay meesha ka saareen faqrigii iyo gaajadii. Waxaa u haajiray oo u cararay dadkii wax garadka ahaa ee aqoonta lahaa ee ka tirsanaa dadka aan wali tixgalin xuquuqda Insaanka. In Insaanka la karaameeyay,

macnaheedu waxaa weeye in la tixgaliyo fikirkiisa, doonistiisa iyo hal abuurkiisa. Haddii aan taas la tix-galin insaanka lama karaamayn. Karaamaynta, Insaanka waxaa ku xiran gudashada iyo u qummidda wixii aan u baahnayn oo hormarka keenayay.

Wax kasta oo aadanuhu haysto waxaa sal-dhig u ah, maskaxda iyo garashada aadanaha. Waxa aan ku raaxaysanayno iyo waxa aan haysanno, waxaa soo saaray Insaan. Dareenka iyo ku baraarugidda xuquuqda Insaaku, waa furaha xalka dhibaatooyinka aadanaha, gaar ahaan kuwa aadka u baahan oo aadka u dhibaataysan.

Culumada cilmu-nafsigu, waxay ku dadaalaan inay siiyaan qofka jirran, sawir kaduwan midka uu adduunkaan ka haysto. Maxaa yeelay, intabadan waxaa jirrada nafsadda asal u ah, waxa qofku nafsaddiisa iyo caalamka ku hareeraysan uu ka haysto. Waxaa laga yaabaa inuu u haysto qofka nafsadda ka jirran, in dadka kale oo dhan cadaw u yihiin. Dabeecaddu inay cadwgiisa tahay ayuu u haystaa. Qof walba inuu isaga necebyahay ama xaqirayo ayuu u qabaa. Kaliya waxay sameeyaan culumada nafsaddu, inay qofkaas jirran siiyaan sawir iyo muuqaal ka gedisan midkii uu horey u haystay. Kaliya waxay ka badalaan wixii uu rumaysnaa ee uu iska dhaadhiciyay. Wax wanaagsan ayay u sheegaan. Sidoo kale nafsaddiisa waxay u tusaan inay aad u qiimo badan tahay. Intaas kaliya ayay qabtaan markaas ayay lacag badan ku qaataan. Mararka qaarkood waxay ugu daraan Kaniini uu liqo hase yeeshii kiniinigaas waxa laga yaabaa inay ku xooginayaa sawirkii iyo muuqaalkii ay siiyeen ruuxa jirran.

Alle sidaas, si kafiican ayuu nafsadda insaanka u dhiiri galinayaa, isaga ayaana abuuray oo og daawadeeda iyo waxa u roon. Daawada runta ah ee nafsaddu waa in la rumeeyo kutubtii Alle soo dajiyay iyo rusushii Alle soo diray. Waxa ugu weyn oo keena jirrada nafsadda oo aad ugu badan waddamada sancada ku hormaray, waa kufriga iyo ka fogaanshaha waddada Alle aadanaha ugu talagalay.

Sida ay sheekaan daraasado rasmi ah oo la sameeyay waddamada sancada iyo warshadaha ku hormaray, sannadkii waxaa is dila 30 ilaa 40 kun oo qof, cel-celis. Waxaana isku dayda in ka badan 100 kun oo qof sannadkii. Dadbadan oo nool waxay ku noolyihiin nolol dhib badan oo aan haba yaraatee wax daganaan iyo raaxo ah lahayn. Runtii ma aha wax aynu innagu garan karno ama aan qiyaasi karno. Waa dhib aad u wayn.

Marka Alle inoo sheegayo inuu qiimeeyay nafsaddeenna oo karaameeyay, waxaa ka dhalanaya inaan innaguna karaamayno oo qadarino nafsaddeenna. Alle wuxuu quraankiisa ku yiri:

" واذقال ربّك للملائكة، أنّى خالق بشرامن طين، فاذاسوّيته ونفخت فيه من رّوحى فقعو له ساجدين"

**"Waa tii Allee malaa'igta u sheegay inuu damacsan yahay inuu bashar abuuro oo dhoobo ka abuuro. Markii uu hagaajiyo basharkaas oo uu ruuxdiisa ku afuufo, waa inaad sujuud la dhacdaan oo aad u sujuuddaan"**

Waa karaamayn Alle aadanaha karaameeyay. Sidoo kale waxaa Alle yiri:

"واذقال ربك للملائكة انّى جاعل فى الارض خليفة"

"**Waa tii Alle malaa'igta u sheegay inuu dhulka u samaynayo khaliif isaga u matala, ama u kala dambeeya**"

Waxaa ilaahay sheegay inuu ammaanada u bandhigay, cirka, dhulka iyo buuraha oo ay diideen. Way qaadi waayeen. Waxaa qaaday Insaanka.

"اناعرضنا الامانه على السموات والارض والجبال فابينا ان يحملنها و اشفقن منها و حملها االانسان انه كان ظلوماً جهولاً"

"**Waxaan ammaanada u bandhignay, cirka, dhulka iyo buuraha. Waydiideen inay qaadaan. Way ka baqeen. Waxaa qaaday insaanka, maxaa yeelay, Insaanku sidiisaba, waa jahli badan yahay, waana dulmi badan yahay**."

Halkaas waxaan ka garanaynaa in xilku ammaano yahay. Xilka insaanka saaran ee naftiisa, qooskiisa, qoomkiisa, dadka kale ee bilaa'aadanka ah, cirka iyo dhulka kan saaran waa ka weyn yahay. Wax loo bareeri karo, waa ka weyn yaahy. Waxaa insaanku ugu bareeray, qaddarta Alle ka sokoow, waa jahliga uusan mas'uuliyadda qadarinayn ama uusan la socon xilku inta uu le'egyahay.

Waxa Soomaalidu Abtirsiinyaha u taqaan waa wax weyn. Insaanku wax badan ayaa uga hallabay jahli iyo aqoon xumo. Waa dabeeci oo layaab malaha. Wax badan ayaa insaanku

beeniyay ama diiday, maxaa yeelay cilmigiisu magaarin, mana uusan fahmin xikmadda ku jirta. Alle wuxuu yiri:

" بَلْ كَذَّبُوا بِمَا لَمْ يُحِيطُوا بِعِلْمِهِ وَلَمَّا يَأْتِهِمْ تَأْوِيلُهُ"

"**Waxay beeniyeen wax aysan cilmi ahaan u koobin, isla markaasna uusan u imaan fasirkiisa**"

Wixii sidaas oo kale jahli ugu dhaca, waa wax lagaran karo. Laakiin waxaa jirta aragti kale oo layaab leh. Aragtidaasi waxay oranaysaa, waxaa jira qayb aadanaha kamid ah oo ulakac wax u halaysa. Kas aadanaha u marin habaabisa. ogaansho diinta ula dagaasha. Ulakac wax kasta u kharibta. Kooxdaas aadanaha kamid ka ah, waxaa lagu magacaabaa "Shayaadiinu-insi" Waxaa laga qaatay Aayadda Alle:

" كذلك جعلنا لكل نبي عدوا شياطين الإنس والجن يوحي بعضهم إلى بعض زخرف القول غرورا "

"….. **Shayaaddiinta Insiga iyo jinniga, waxay isu wax yoodaan, been iyo waxaan jirin**"

Kooxdaas shayaaddiinu Insiga ah, waxay keeneen, laba qarni kahor, fikrad oranaysa, insaanku waa xayawaan. Wuxuu markii hore ahaan jiray wax dixiriga lamid ah. Wakhti dheer kadib, wuxuu noqday daanyeer, kadib, wakhti dheer kadib ayuu u ekeeday sida hadda aadanuhu u egyahay. Fikraddaasi waxay la kawsatay casrigii warshadaha iyo cilmiga. Waxaa lagu dhisay falsafado badan oo dhammaantood cilmi iyo saynis loo aaneeyay, Alla iyo diinna laga fogeeyay. Markii la yiri, ma jirin Alle aadanaha abuuray iyo shaqo loo dirsaday

midna ee wuxuu ahaa xayawaan xayawaannada kale ee jira ka mid ah, insaanku wuxuu noqday wax aan qiimo lahayn.

Markaas ayay nafsadda insaanku hoos u dhacday oo jirratay. Waxaa samaysmay oo iskuulada oo dhan lagu dhigay in Insaanku xayawaan caadi ah yahay. Markaas ayuu ka tagay, xishood, naxariis, rajo, iimaan, ixsaan, cibaado, baryo Alle labaryo. Wuxuu noqday xayawaan ugaarsanaya. Boob, khiyaano, dhac, ayuu u soo jeestay. Waddamaddii fikraddaasi aad uga hirgashay, waxaa ku batay, tuugada, boobka hubaysan, maafiyada iyo daroogada. Dadka nool oo shaqaysanaya waxay kunool yihiin ilaalin xoog badan iyo is waardiyayn. Maxaa yeelay waa xayawaan. Waxay aad ula yaaban yihiin, dad aan dawlad iyo ciidamo ilaaliya lahayn oo haddana nool oo shaqaysanaya oo xoola haysta, maxaa yeelay iyaga suuragal kama aha xaggooda. Soomaaliya oo 20 ( labaatan) sanadood wax ka badan aan wax nidaam ah iyo dawlad midna ka jirin haddana wali nool oo dad shaqaysanaya joogaan, waa wax lala yaabo. Waxay ku calaacaleen, “Waa in Soomaaliya wax laga qabtaa. Maxaa yeelay, waxay adduuka tusayaan in dawlad la’aan lanoolaan karo” Ma aha, in iyaga loo turo oo loo naxariisto oo dawlad loo keeno ee waa inaysan caalamka tusin in dawlad la’aan la noolaan karo. Waa run. xaqiiqdii waxaan adduunka tusaynaa inaan insaanku xoog ku dhisnayn ee uu akhlaaq iyo diin ku dhisan yahay.

Falsafaddaas, ku dhisan Ilaah diidnimada iyo xayawaanimada aadanaha, waxay abuurtay cudurro waaweyn oo insaanka nafsaddiisa ku dhaca. Maxaa yeelay, waxay insaanka ka

cayrtaysay wixii uu haystay oo dhan. Wuxuu haystay, Ilaah abuuray oo u naxariisanaya oo caawinaya. Wuxuu haystay in la karaameeyay oo malaa'igtu u sujuuday. Wuxuu haystay in isaga dhulka boqor looga dhigay. Wuxuu haystay in cirka iyo dhulkaba loo sakhiray oo isagu ku shaqaysanayo. Insaanka waxaa Alle u sheegay inuu gob yahay oo lakaraameeyay. Waxaas oo dhan ayaa laga qaaday si uu isula yaraado oo uusan wax weyn u raadin

Ufiirso, faa'iidada abtirsiinyahay wanaagsan ee meesha fiican ee la garanayo ku abtirsada. Kawarran, wiil ama gabar nasab ah oo taqaan, waalidkeed, qaraabadii oo dhan, qabiilkeeda ilaa meesha ugu danbaysa, ma la mid baa, qof aan waalidki garanayn, Qabiilkiisa garanayn, waddankiisa garanayn, meel uu ka yimid garanayn, meel uu aadidoono aan garanayn. Kawaran arrintaas. Insaan aan wax abtirsiinyo ah lahayn, meel uu ka yimid iyo meel uu kalana aan aqoonin, kaliya waxa uu maqlayna ay tahay inuu asalkiisa xayawaan ahaa, nafsaddiisu seebay noqonaysaa?

Maxaa keenay in dhallinyarada Soomaalida ah ee waddamada reer Galbeedka jooga ay aad u dhibaataysan yihiin. Waxaa dhumay abtirsiinyihiin. Dal malaha. Dawlad malaha. Diin lama barin. Cibaado iyo meel lagu cibaadaysanayo iyo wax cibaadaysanaya midna ma arkin. Abtirsiinyo mujtamac ma yaqaan. Asagu isma yaqaan. Wuxuu is arkay isaga oo dhextaagan bulsho ka duwan, xagga midbka, dhaqanka, diinta, luqada, cilmiga iyo dhaqaalaha. Iskuulka waxaa loogu sheegay inuu xayawaan yahay. Waxa xayawaanka kale u baahan yahay uu isna u baahan yahay. "Biological need".

Markaas ayuu bilaabay inuu xayawaan noqdo. Mar haddii uu xayawaan noqday, isaga insaanka waadi wayn ayaa u dhexeeya. Halkaas ayay ka dhalatay nafsad jirran oo dhaciif ah oo aan xoog lahayn waxna qaban karin.

Markii aan u cararaynay waddamada kale ee galbeedka waxaa nahayay, baahi xagga jirka ah. Waxaan u baahnayn, raashin, dhar, guryo, wax lacabbo iyo meel aan xabbadi ka dhacayn oo aan ku nabad gallo. Xagga jirka baahidii ahayd runtii waan helnay, haseyeeshee waxaa nagu soo baxsaday, baahi tii hore kadaran oo ayaduna u baahan meel loo qaxo. Waa baahida ruuxda iyo nafsadee xaggee u xaqnaa?

Yaa nafsadda iyo ruuxda wax siin kara. Baaritaan dheer kadib iyo baahi xadkii dhaaftay, ayaa waxaa la helay, inay suuragal tahay in Soomaaliya haddii loo qaxo, nafsadda iyo ruuxdu ay helayaan wixii ay u baahnaayeen. Hadda ayaan bilownay qaxii labaad ee ruuxda ku saabsanaa. Dhallinyaro faro badan ayaa ka soo qaxay waddamada reer galbeedka oo door-biday, soomaaliya. Taas oo ay runtii ka heleen xero qaxooti oo aad u raaxo badan oo xataa ay uga sii hijroon karaan, jannadii iyo Alle la kulankiisa.

## Mas'uuliyaddii uu Alle insaanka u dhiibay

Alle aadanaha wuxuu u doortay cammiraadda iyo maamulidda dhulka. Alle malaa'igta ayuu u sheegay inuu makhluuq bashar ah abuuridoono oo uu markaas dhulka khaliif uga dhigayo. Arrintaas malaa'igtu ma aysan fahmin xikmadda ku jirta. Alle ayay su'aal waydiiyeen oo ku dheheen "Mawaxaad dhulka u dhiibaysaa dad fasaadinaya oo dhiig ku daadinaya. Annaga ayaaba joogna oo tasbiix, taqdiis iyo cibaado la joognee" Sideebay arrintaasi ku dhici kartaa. Marka xikmadda ma aysan fahmin. Kaliya waxay u qaateen in Cibaado Alle loo baahan yahay ee danbi iyo cisyaan aan loo baahnayn. Hase yeeshee, insaanku waa makhluuq nooc gooni ah. Waa makhluuq loogu talagalay mas'uuliyad aad u weyn. Waxaa la siiyay awoodda wax kala doorashada. Waxaa kale oo la siiyay awoodda cilmiga iyo cammiraada dhulka.

Waxaa lagu abuuray awoodo shar iyo khayr isugu jirta oo had iyo jeer wuxuu ku jiraa dagaal iyo kala doorasho. Cirka iyo dhulka waxaa loo sameeyay in insaanka lagu imtixaano camalkiisa iyo niyadiisa. Arrimaha mas'uuliyadda insaanka la xiriirta aad ayay u qoto dheer yihiin. Waxaas oo dhan malaa'igtu ma aysan fahmin, way la yaabeen. Alle wuxuu yiri:

" وَإِذْ قَالَ رَبُّكَ لِلْمَلاَئِكَةِ إِنِّي جَاعِلٌ فِي الأَرْضِ خَلِيفَةً قَالُواْ أَتَجْعَلُ فِيهَا مَن يُفْسِدُ فِيهَا وَيَسْفِكُ الدِّمَاء وَنَحْنُ نُسَبِّحُ بِحَمْدِكَ وَنُقَدِّسُ لَكَ قَالَ إِنِّي أَعْلَمُ مَا لاَ تَعْلَمُونَ (30) وَعَلَّمَ آدَمَ الْأَسْمَاءَ كُلَّهَا ثُمَّ عَرَضَهُمْ عَلَى الْمَلاَئِكَةِ فَقَالَ أَنبِئُونِي بِأَسْمَاءِ هَٰؤُلَاءِ إِن كُنتُمْ صَادِقِينَ"

“Xusuuso markii rabi malaa’igta ku yiri: waxan ku abuuraynaa dhulka mid aniga iga wakiil ah, markas ayay yirahdeen ma waxad ku abuuraysaa dhulka mid fasaadiya oo dhiig ku daadsha, anaguna an nahay kuwo ku tasbiixsada mahad-celintaada oo ku dahira adiga, wuxuu yiri Alle, aniga waxaan ogahay waxydaan ogayn, markaasuu baray Adam magacyada oo dhan, kadibna wuxuu u bandhigay mala’ igta oo uu ku yiri bal iisheega magacyadan hadaad tihiin kuwo run sheegaya”

Alla aadanaha wuxuu ku saaday, xirfaddii iyo cilmigii ay ku qaban lahaayeen, mas’uuliyadaas Alle u doortay. Alle wuxuu quraankiisa ku yiri:

" وَعَلَّمَ آدَمَ الْأَسْمَاءَ كُلَّهَا ثُمَّ عَرَضَهُمْ عَلَى الْمَلاَئِكَةِ فَقَالَ أَنبِئُونِي بِأَسْمَاءِ هَٰؤُلَاءِ إِن كُنتُمْ صَادِقِينَ"

Malaa’igtii way garan waayeen. Markaas ayaa Alle aadam waydiiyay, magacyada shay kasta, markaas ayuu sheegay. Kolkii uu magacyadii malaa’igtu garan wayday sheegay, ayaa Alle malaa’igtii ku yiri, haddaba aadam u sujuuda. Dhammaan malaa’igtii way sujuuday waxaan ibliis ka ahayn. Ibliis wuu diiday amarkii Alle, waana iska waynaysiiyay aadam. Wuxuu ku dooday, sidee ugu sujuudayaa aniga ayaa isaga ka khayr badane. Maxaa yeelay, anna Naar

ayaad iga abuurtay isagana dhoobo ayaad ka abuurtay. Sidaas daraadeed, xaq ma aha inaan anigu isaga u sujuudo.

Duruusta mawduucaan laga qaadankaro, waxaa kamid ah:

1. Qisadaas aadanaha iyo asalkiisa ku saabsan waxay xoojinaysaa nafsadda bilaa'aadanka. Waxay noqonaysaa, wax qiimo leh oo Alle karaameeyay, isla markaasna mas'uuliyad wayn saaray oo camalkiisa lagu imtixaanayo, sidoo kalena cilmi la baray oo la siiyay awooddii uu dhulka kumaamuli lahaa.

2. Waxay qisadaani tusinaysaa, qiimaha cilmiga iyo sida uu muhiim ugu yahay arrimaha dhulka la xiriira. Waxaa muhimmaddaas tusinaya baridda Alle aadam baray, dhammaan magacyada shay kasta iyo malaa'igta uu ku amray inay u sujuudaan. Taasi waxay tusinaysaa in la qadariyo oo laqiimeeyo, cilmiga. Waxay kale oo tusinaysaa in xil kasta u baahan yahay in aqoon cilmi loo leeyahay. Maxaa yeelay Alle aadam wuxuu ku saaday cilmiga magacyada si uu hawsha ugu qabto.

3. Waxaa kale oo halkaas ka soo dhexbaxay cadaawadda insaanka iyo shaydaanka. Waxaad halkaas ka garanaysaa muhimmadda taariikhdu leedahay. Shaygu markuu taariikhda galo qiimo weyn ayuu yeelanayaa. Cadaawadda taariikhiga ah iyo saaxiibtinimada taariikhiga ah labaduba qiimo weyn ayay nafsadda ku leeyihiin. Haddii kaliya, la inoo sheegi lahaa, waxaa jira wax shaydaan la dhaho oo aad u dhib badan oo

xumaantiina doonaya ee iska jira, waxaa laga yaabaa inaan wax weyn laga soo qaadeen oo la iska fududaysan lahaa. Laakiin markii taariikh loo sameeyay oo malaa'ig, sujuud, iyo abuuriddii nabi aadam lala xiriiriyay, waxay noqotay wax weyn oo taariikhda gala, oo aan aadanuhu marna illaawi karin. Waa qiso xikmad badan ku jirto.

Hadda muhimmadu waa inaan xusno, sida arrimahaasi nafsadda insaanka u saamaynayso, oo ay wax ugu kordhinayso.

## Insaanka iyo xikmaddii loo abuuray

Allihii aadanaha abuuray, wuxuu sheegay sababtii uu u abuuray. Sababta uu u abuuray waa inay isaga caabudaan. Haddaba inay isaga caabudaan, maxay macno leedahay?

Dadka qaarkood waxay u fahmi karaan, in Alle isagu u baahan yahay in la caabudo oo uu ku raaxaysanayo cibaada addoommankiisa. Sida ay boqorada iyo maxaweynayaalku ugu raaxaystaan marka loo khudduuco oo salaan iyo qaddarin khaas ah lasiiyo. Cibaadada Alle noo abuuray ma saas oo kalaa?

Inkasta oo Alle xaq u leeyahay, wixii uu doono oo weynaantiisa iyo hufnaantiisa waafaqaya, haddana cibaadadaan uu inoo abuuray macna kale ayay leedahay. Macnahaasi waxaa weeye, innaga ayaa cibaadada u baahan. Alle waxba inoogama baahna. Waa inaga kaaftoomaa. Laakiin innaga ayaa u baahan inaan caabudno. Ruuxdeenna iyo nafsaddeennu waxay u baahantahay inay Alle caabudo. Haddii ay caabudi waydo way dulloobaysaa, wayna rafaadaysaa. Nolosheenu waxay u baahantahay inaan qawaaniintiisa iyo sharcigiisa raacno. Haddii aan raaci wayno, nolosha ayaa kharaabaysa. Wax walba way isdaba-marayaan. Dulmi iyo caddaalad darro ayaa adduunka qabsanaya. Si aan nabad iyo wanaag ugu noolaano, waxaan u baahan nahay inaan Alle caabudno. Sidaas daraadeed,

cibaadada innaga ayaa u baahan ee Alle uma baahna. Waana danteenna ee dantiisa maha. Alle wuxuu yiri:

"وماخلقت الجنّ والانس الّاليعبدون"

´´Kaliya waxaan u abuuray jinni iyo insiga inay I cabudan´´

"وَهُوَ الَّذِي خَلَقَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ فِي سِتَّةِ أَيَّامٍ وَكَانَ عَرْشُهُ عَلَى الْمَاءِ لِيَبْلُوَكُمْ أَيُّكُمْ أَحْسَنُ عَمَلًا"

"**Alle, (Hufnaan iyo ceebla'aan ahaaye) Samaawaatka iyo dhulka wuxuu ku abuuray 6 casho, carshigiisuna biyo korkood ayuu saarnaa, Waxaa loo abuuray waxaas oo dhan inuu adin imtixaano, kiinnii camal wanaagsan**"

Aayaddaan waxay jawaab u tahay su'aalo badan oo nafta ku dhex-wareegaya. Waxaa ku sugan sababta cirka iyo dhulka iyo inta u dhexaysa loo abuuray. Waxaa ku sugan sababta Insaanka loo abuuray. Xikmadda adduunkaan oo dhan oo ah meel loo dhisay in dadka lagu kala saaro oo lagu imtixaano. Waa yaab! Waxay ina tusaysaa muhimmadda ay leedahay sida aan u fikirno iyo waxa aan samaynayno. Markaad fiiriso dadka adduunkaan ku nool fikirkooda, hammigooda, cammalkooda iyo waxa ay samaynayaan waa wax kala duwan, aadna u kala fog. Waxaad arkaysaa, xumaan xaddii ka baxday iyo wanaag aad u badan oo dhammaan ku saabsan aadanaha adduunkaan ku nool. Waa wax istaahila, in cirka iyo dhulka daraadood loo abuuro. Waa wax istaahila inay ka dhashaan Janno iyo Naar, waana wax wayn.

Halka ay ka qusayso mawduuca oo ah Cilmu-Nafsiga, waxaa weeye wuxuu qofku ogaanayaa, cidda abuurtay, sababta loo abuuray, sababta cirka iyo dhulka loo abuuray iyo sida insaanka loo karaameeyay oo sha'nigiisa loo wayneeyay.

Qofka Muslimka ah ee Quraanka rumaysan, macnihiisana fahma, wuxuu ogaanayaa in xil weyn la saaray oo la doortay, isla markaasna samaawaadka iyo dhulka isaga dartii loo abuuray. Wuxuu ogaanayaa xikmadda ku jirta abuuriddiisa iyo dantii laga lahaa. Wuxuu helayaa jawaabaha dhammaan su'aalaha dabeeciga ahaa ee nafta ku soo dhaca. Alle wuxuu yiri:

"ألذى خلق الموت والحياة، ليبلوكم أيّكم أحسن عملا"

"**Alle waa kii dhimashada iyo nolosha abuuray, si uu idiin imtixaano oo uu u caddeeyo kiinnii camal wanaagsan**"

Nolosha iyo geerida waxaa loo abuuray, in la ogaado keennii camal wanaagsan sameeyay iyo kii xumaan sameeyay. Cirka iyo dhulka iyo maalinta iyo habaynka waxaa loo abuuray in bilaa'aadanka lagu imtixaano oo lagu ogaado koodii fiican iyo koodii xun. Waa arrin weyn oo runtii layaab leh. Uma malaynayn, in camalkeennu sidaas muhiim u yahay. Geerida iyo nolosha waxaa loo sameeyay in la ina imtixaano. Ayaamo ayaan noolaanaynaa, kadibna waan dhimanaynaa, markaas ayaa camalkeenna la arkayaa. Ayaamihii aan noolayn camalkii aan samaynay ayaa la ogaanayaa. Haddaba waa inaan is jirno ayaamaha yar ee aan noolnahay.

Aayaddaan waxaan ka faa'iidaysanaynaa wixii la inoo abuuray. Waxaan kale oo ka faa'iidaysanaynaa muhimmadda camalka oo ah midka la fiirinayo. Wax kasta oo aad tahay iyo si kasta oo xaalkaagu yahay muhimmaddu waa imtixaan iyo in la ogaado sida aad u fikiraysid.

Waa layaab! Cirka iyo dhulku waxay u yimaadeen in la ogaado waxa aan samaynayo subaxdaan saaka ah oo aan qorayo sadarradaan; inta aan qof salaamay, inta aan wanaag u sheegay, inta aan booqday, run iyo beentaan sheegay, inaan shaqeeyay iyo inaan ciyaarayay ama aan wax kharibayay, irka iyo dhulka xikmadda loo abuuray ma saasbaa?

Haddaba anigu qiimo badniyaa! Anigu muhiimsaniyaa! Anigu maxaan ahay? Waa layaab. "Cirka iyo dhulka waxaan u abuuray inaan ogaado waxa aad samaynaysaan" Waa Alle oo waxkasta og, haddana wuu noo sheegayaa waardiyaha na saran iyo qiimaha aan leenahay.

Arrintaas oo la ogaado waxay ka qaybqaadanaysaa nafsadda qofka. Waxay ka jawaabaysaa su'aalo muhiim ah oo nafsadda ku wareegaya. Waxay ka qayb qaadanaysaa raaxada iyo deganaanta nafsadda. Waxay aad uga duwantahay, qofka bilaa'aadanka ah ee aan aqoon waxa loo abuuray, sababta cirka iyo dhulka loo sameeyay, sababta uu adduunkaan u yimid. Ruuxa aan wax jawaab ah u hayn Su'aalahaas, waxay saamaynaysaa nafsaddiisa oo wuxuu noqonayaa qof wareersan oo aan garanayn meel uu ka yimid, cid leh, meesha uu aadi doono ama uu ku danbayn doono, waxaas oo dhan magaranayo.

Qofkaas nafsaddiisu waa daciif aan haysan meel ay ku istaagto iyo wax ay iskula waynaato midna. Waa sidaas sababta ay nafsadda u saamaynayso, waayo nafsaddu waxay u baahantahay quudin lagu naaxiyo imaan iyo ku xirnaan Eebbe, hadday taas waydana way walaahoobaysaa.

Insaanku wuxuu Insaan ku yahay ruuxda, taasuuna waa middii Alle aadam ku afuufay, kadib markii uu jirkiisa dhoobada ka sawiray. Ruuxdaasi, waxay marwalba u baahantahay, inay la xiriirto, calaaqo dhawna la yeelato Khaalqii abuuray. Waxay u baahantahay, inay hesho qaab iyo luqad ay ku fahamto oo ay kula xiriirto, Rabbigii abuuray. Insaanku intii la garan karo, wax uun ayuu caabudayay. Marna ma dhammaan baahida Insaanka ee ku saabsan waxa lacaabudo oo Ilaah laga dhigto, sax iyo khalad kii ay rabtaba ha noqotee.

Xaddaaraddaan cilmiga ku dhisan ee maanta caalamkaan ka jirta, waxay ku dhisan tahay, aragti ka duwan middii Diimuhu sheegeen. Dhammaan Diimihii Alle soo dejiyay, Insaanka iyo taariikhdiisa, waxay u celinayaan abuuristii Alle SWT iyo ku afuufiddiisii ruuxda. Aragtida dhammaan Iskuulada adduunkaan ka jira lagu dhigo oo markii u horaysay, uu keenay, nin Waddanka Ingiriiska u dhashay oo magaciisa la oranjiray, Charles Darwin, ayaa wuxuu qoray, buug la yiraahdo, "**Asalka noolaha**" Wuxuu buugaas qoray, **1859**kii. Ilaa iyo hadda, waxaa iskuulada lagu dhigaa oo xaddaaraddu ku dhisantahay, aragtidaas maadiga ah oo aan Insaanka asalkiisii iyo wuxuu ahaa aan u celinayn.

Aragtidaas, insaanku wuxuu ka dhaxlay, Diin la'aan, iimaan Alle la rumeeyo la'aan, Cibaado la'aan iyo kaliya inuu u khidmeeyo, baahida jirka kaliya. Wuxuu insaankii lamid noqday oo uusan waxba uga gadisnayn xayawaanka kale. Kaliya, waxaa loo sheegay oo lagu barbaariyay, insaanka maanta jooga, gaar ahaan kuwa reer galbeedka, inay xayawaan yihiin. waxaa laga dhaadhiciyay inay u shaqeeyaan, ka fikiraan baahida jirkooda, sida cuntada, cabbida, shahwada, hooyga iyo wixii lamid ah oo jirku u baahan yahay. Waxaa meesha laga saaray, wax ruuxda iyo baahideeda la xiriira. Maxaa laga dhaxlay?

Waxaa laga dhaxlay, naf is-dilaysa, daroogo qaadanaysa, waalanaysa. Waxaa asal ah, in nooluhu nolosha jeclaado oo uu mawdka iyo dhimashada naco. Maxaa keenay, in wakhtigaan aan hadda joogno, ay is-dilaan dad gaaraya ilaa 40 kun oo qof sannadkiiba waddammada qaarkood? Maxay ku dhacday, in daroogada halista ah, ay aad qaali uga noqoto, waddamada reer galbeedka. Waxaas oo dhan waa baahi ruuxdu leedahay, oo la diiday in la daryeelo. Waxaad Qaybtaan ka baranaysaa , arrimo ruuxda la xiriira, gaar ahaanna ricirta soo socota.

## Baahida Insaanka ee ku saabsan Ilaah iyo wax la caabudo

Insaanku wuxuu u baahan yahay inuu wax caabudo. Ma jirto taariikh sheegtay wakhti uu insaanku wuusan waxba caabudayn ama uusan u baahnayn wuxuu caabudo. Inta badan wuxuu caabudaa wax uu la xiriiriyay awoodda qorsoon ee caalamkaan wadda. Marna wuxuu insaanku caabudaa waxa uu isagu jecelyahay ama uu rabo. Marna suuragal ma aha in Bani'aadanku cibaado ka maarmo ama Eebbe ha caabudo ama hawadiisa waxay u qurxisay ha caabudee.

Arrinta muhiimka ah waxaa weeye in aadanuhu uu wax caabudayo inta uu noolyahay. Ilaah xaq ah ama ilaah baadil ah oo uu isagu sameeyay. Sida Quraanka kariimka ah lagu sheegay arrintaasi waxay la xiriirtaa abuurid insaanka lagu abuuray oo dabeeci ah oo Alle ku sameeyay aadanaha baahida inuu Alle caabudo. Asaga oo ka turjumaya baahidaas cibaadada ee Alle ku abuuray, ayuu ama Alle caabudayaa ama wax kale caabudayaa. Waxaase lagama maarmaan aadanaha u ah inuu wax caabudo. Diinta iyo cibaadadu waa baahi daruuri ah, oo uu san insaanku ka maarmin, sida uu san raashinka iyo biyaha uga maarmin. Waxay kamid tahay daruuriyaadka aadanaha. Haddii uu waayo iyo cibaado wuu is dilayaa qofku.

(وإِذْ أَخَذَ رَبُّكَ مِن بَنِي آدَمَ مِن ظُهُورِهِمْ ذُرِّيَّتَهُمْ وَأَشْهَدَهُمْ عَلَى أَنفُسِهِمْ أَلَسْتُ بِرَبِّكُمْ قَالُواْ بَلَى شَهِدْنَا أَن تَقُولُواْ يَوْمَ الْقِيَامَةِ إِنَّا كُنَّا عَنْ هَذَا غَافِلِينَ ( 172) أَوْ تَقُولُواْ إِنَّمَا أَشْرَكَ آبَاؤُنَا مِن قَبْلُ وَكُنَّا ذُرِّيَّةً مِّن بَعْدِهِمْ أَفَتُهْلِكُنَا بِمَا فَعَلَ الْمُبْطِلُونَ (173) وَكَذَلِكَ نُفَصِّلُ الآيَاتِ وَلَعَلَّهُمْ يَرْجِعُونَ (174)

Arrintaasi waxay meesha ka saaraysaa aragtiyada oranaya ama ku dhisan in la noolaan karo ama nolol fiican oo caadi ah uu insaanku ku noolaankaro isaga oo aan Alle ictiraafsanayn ama aan caabudayn. Markii aadanaha lagu tababaray loona sheegay nolol aan Alle aqoonsanayn, waxaa aadanaha ku dhacay jaah-wareer iyo waalli ay noloshu ka hortimid oo ay uga fududaatay inuu is dilo oo nolosha ka takhaluso, si uu uga nasto ama uga raaxaysto ciriiriga iyo cadaabka naftiisu dareemayso. Taariikhda aadanaha hadda ayuu ugu cilmi badanyahay uguna dhaqaale badanyahay. Wax badan oo aan horay loo aqoon ayuu hadda bartay oo ku saabsan cilmiga caalamkaan aan kunoolnahay iyo nafsadda aadanaha. Wakhtigaan aan ku jirno waa markii aadanuhu ugu awood badnaa dhinac kasta, noloshana uu u sakhiray sida uu rabo. Waayo wuxuu fahmay xeerarka caalamkaan maamula iyo shay kasta nidaamka uu ku dhisan yahay.

Haddaba, iyada oo xaal sidaas yahay wakhtigaan hadda ah ayaa aadanuhu ugu dhib badanyahay oo uusan ku raaxaysan karin wixii uu abuuray. Marna ma dareemayo raaxo nafsadda iyo ruuxda ah, wuxuuse dareemayaa ciriiri iyo baahi wayn oo xagga ruuxda ah, taas oo gaarsiisay inuu naftiisa dilo.

Warbixinadii ugu danbeeyay ee lagu sameeyay sida ay dadku dareemayaan, 70% ayaa murugo iyo walwal aad u

badan ku nool oo khaatir ka taagan xaaladda ay ku suganyihiin. Waddamada aad u hormaray, sida Jabbaan, USA, Jarmal, Shiinaha, waxaa is-dila sannadkii dad gaarayaa ilaa 40,000, in ka badan, boqol kunna way isku daydaa. Xaddaaradda hadda jirta waxay ku guulaysatay inay xalliso baahidii jirka, sida: raashinkii, daawadii, biyihii, gaadiidkii, sancadii birta iyo wixii lamid ah, haseyeeshee waxay si wayn ugu fashilmeen baahidii ruuxda ee bilaa'aadanka. insaanku waa ruux jasad wadata ee ma ah Jasad ruux wata ama Jasad kaliya, sida ay ku fasireen culumadii sheegtay in insaanku ka yimid ambenbe ka dibna uu maray maraaxil badan oo kala duwan ilaa uu yeeshay suurada hadda lagu yaqaan. Fikraddaas waxaa keena "Darwiin"

Insaanku wuxuu la rafaadayaa baahidaas ruuxda ee aan waxba loo qaban. Haddii Ruuxdeenu dhimato ama ay jirrato ama ay daciifto, waxaan ka guuraynaa insaaninimadii Alle inaga dhigay iyo Ruuxdii Alle ina siiyay ee qiimaha badnayd. Waxaan waayaynaa dareenkii mas'uuliyadda iyo ku xirnaantii caalamka sare. Waxaan noqonaynaa caleen geedkii ay kutaalay ka go'day. Waxaa dhacaya wareerka hadda jira iyo daganaan la'aanta. Waxaa badanaya is cunka, dulmiga, hunguri badnaanta iyo is dulminta aadanaha, maxaa yeelay waxaa hoggaaminaya baahida jasadka kaliya. Akhlaaqdii iyo ruuxdii keenaysay bilaa'aadanimada way dhamaanaysaa. Waa hoog aan hoog ka danbayn ee insaanka u soo hoyday.

الذى احسن كلّ شىئ خلق هو بدء خلق الانسان من طين، ثمّ جعل نسله من سلالةمن " ماءمهين، ثمّ سوّاه ونفخ فيه من رّوحه، وجعل لكم السّمع والابصار والأفئدة، قليل اماتشكرون" ألسجدة، أية 93

Haddii insaanka camalkiisa iyo cilmigiisa ay ka maqantahay ku xirnaan Eebbe oo uusan cibaadaysan, waxa uu hallaynayo ayaa ka badan waxa uu wanaajinayo. Insaarka kawaa Eebbe galiyay Ruux taas oo cuntadeeda iyo cabbitaankeedu yahay xiriirka wanaagsan ee ay Alle la leedahay iyo cibaadadiisa. Si bilaa'aadanku u dharjiyo baahida ruuxda, wuxuu u baahan yahay inuu wax caabudo. Cibaado diini ah oo ruuxda la xiriirta oo Allihii xaqa ahaa ku xiriirisa haddii uusan helin, wuxuu samaysanayaa wax uu caabudo oo baadil ah. Sidaas ayay ku dhacday in aadanuhu caabudaan sanam iyo wax yaabo lamid ah. Marna ma noolaan karo aadanuhu cibaado la'aan iyo ilaah la'aan, maxaa yeelay waa lagu dabeeceeyay. Waa lagu abuuray oo Alle ayaa ugu talagalay inay isaga caabudaan.

Awoodda ay diintu ku leedahay ruuxda bani'aadanka aad ayay u xoog badantahay. Qofkii lagu qabsado magac diineed si rasmi ah oo abad ah ayaa loo qabsaday. Qabsashada ruuxda oo ku timaada iimaanka iyo diinta, waa qabsasho daa'im ah. Gumaysigii Reer Yurub wuxuu meela badan oo caalamka kamid ah ku qabsaday Kiristiyanka. Waxay fidinayeen Diinta Nasaarada ee ayba ku yartahay inta ku sii hartay ee diintii saxda ahayd ah, maxaa yeelay iyagaa wada badalay.

Meelihii iyo waddamadii ay kiristanka galiyeen oo ay dadkii qaadeen aragtidaas diimeed, ilaa iyo hadda way haystaan. Haddii markii hore ay xoog iyo xabbad ku qabsadeen, hadda waxay ku haystaan saldada Diinta. Waxay xukumaan hadda iyaga oo raalli ah oo ogol. Qabsashada ciidanka iyo xogga la isku qabsado qabsiino rasmi ah ma aha. Xukunka Diintu aad ayuu u xoog badan yahay, waana daa'im.

Quwadihii casrigaan aan joogno isku dayay inay sameeyaan xaddaarad aan Diin lahayn iyo dad aan diin haysan oo aan waxba caabudayn way ku fashalmeen, waxaana kamid ahaa Midawgii Sofeetka ee Ruushku hoggaaminayay. Fikraddii lagu sheegay inay cilmi tahay ee Alle inkiriddu way socon wayday, waxayna u muuqataa in ay ka hareen dadkii dabada kawaday ee doonayay inay Insaanka dhumiyaan oo ay ku dhumiyaan magaca Cilmiga.( Result of Scientific research )

Taariikhdii aadanaha saldadda runta ah waxay ahayd saldadda diinta. Xukuumadaha siyaasaddu waxay u baahnaayeen inay amaahdaan awoodda weyn ee diinta si ay u xukumaan shacabka. Waxay u baahnaayeen in Kaniisadda ama wadaadda diintu ansixiyaan oo ku duceeyaan xukunkooda, haddii kale ma ansaxayso. In kasta oo qaabku kala duwanyahay, ayada oo loo eegayo wakhtiga iyo meesha ay arrintu ku saabsan tahay, waxay ka midaysnaayeen inay Diintu ama Saldadda ruuxdu tahay midda ugu weyn uguna muhiimsan nolosha aadanaha. Ayada oo si rasmi ah Diinta loo inkiray, noloshana looga fogeeyay, haddana madaxda siyaasaddu waxay ku

dhaartaan diinta ay aamminsanyihiin ama dadka ay xukumayaan aamminsanyahay marka ay rabaan inay xaafiiska awoodda fariistaan. Diintu waa inay xalaalayso xukunkiisa iyo mooralkiisa. Sidaas awgeed waa lagama maarmaan awoodda Diintu.

Xukunka siyaasadda iyo maamulku wuxuu marwalba ku dhisanyahay xukunka Diinta. Haddii Qofka xukunka siyaasadda haya uu khilaafo Xukunka Ruuxda, khatar ayuu ku jiraa. Si muuqata ama si qarsoon wuxuu dhuminayaa sharciyaddii uu wax ku xukumay. Dabcan wakhtiyada iyo taariikhda aadanuhu soo maray arrintaasi way kala duwantahay. Mar ay xoog lahayd iyo mar ay daciif ahayd sida samankaan aan hadda joogno.

Muhimmadda mawduucaan waxaa weeye inaan fahmno Saldadda rasmiga ah ee ruuxiga ah haddii si fiican loo maamulo oo Allaha xaqa ah la caabudo wax badan oo hadda halaysan ayaa hagaagi lahaa.

Mar haddii aan ogaanay in xaakim kasta iyo qof kasta oo raba awood uu ku yeesho aadanaha dhexdiisa u baahanyahay inuu wax ka amaahdo awoodda weyn ee rasmiga ah ee ay Diintu ku leedahay Ruuxda aadanaha. Awoodda dhabta ah waa midda Diinta. Hadda waxaan aragnaa Culumo Muslimiin ah oo Fatwo ku soo saaraya dawladda, xaakimka dawladda iyo dastuurka dawladda oo oranaaya waa sax oo Islaamka ayuu waafaqsan yahay ama waa baadil iyo gaalnimo oo Islaamka ayuu khilaafsan yahay. Sidaas daraadeed Kaniisddu Yurub waxay

xukumaysay wax ka badan 16 qarni oo ay fatwo ka soo saaraysay cilmiga iyo fikirka iyo dhaqaalahaba. Haddana culumada Muslimiintu ee dhammaan caalamka Islaamka xukunka ayay wax ku leeyihiin.

Iyaga ayaa fatwo ka soo saara in la adeeco Amiirka, Imaamka iyo in kale. Marna xukunka siyaasaddu kama maarmo xukunka Ruuxda iyo diinta oo ay awoodiisa gacanta ku hayaan wadaada Diintu.

Haddii uu aadanuhu ku fikiro inuu cibaadada iyo diinta ka maarmo, wuxuu dhadhaminayaa cadaabka Alle isaga oo nool oo wali naftii ku jirto. Wuxuu dareemayaa, ciriiri, walwal, walbahaar iyo baqdin aan dhammaanayn. Aad ayuu u baqayaa marwalba, maxaa yeelay ma lahan meel uu u noqdo markii wax ka xumaadaan ama uu dhib dareemo. Waa lagama maarmaan in aadanuhu dhib dareemo inta uu nool yahay. Haddii uusan helin wax caawiya iyo meel uu u noqdo iyo Ilaah uu baryo oo uu rumaysan yahay inuu caawinayo oo baryadiisa aqbalayo. Haddii uusan haysan Ilaahaas xaggee ayuu aadayaa? Waa inuu Isdilo markii dhibku ka bato. Maxaa yeelay ma rumaysna gurmadka sare ee xagga rabbi ka imaanaya iyo gargaarka khaaliqii isaga abuurtay.

" أمّن يجيب المضطرّ اذا دعاه، ويكشف السّوء، ويجعلكم خلفاء الارض، أأله مع الله، قليلا ما تذكرون" (النّمل، أية- 62)

**"Waa kuma kan ajiiba midka dhibataysan marka uu baryo oo dhibaatada ka dulqaada oo misna idinkaga dhigay**

**dhulka wakiil ma ilaah kale ayaa Alle wax la wadaagaa?! Maya! Alla yaraa intaad wansamaysaan**"

Awooddaas rasmiga ah ee ruuxda ku dhisan mar hore ayuu aadanuhu aqoonsaday. Waxaa saamaysmay awoodda Diinta ku dhisan ee xaddaaradaha samaysay ee xeesha dheer. Kadibna aadanuhu wuxuu sameeyay awoodda xukunka iyo siyaasadda oo maamusha nolosha aadanaha. Saldanadda diinta oo joogto ah, aan cidna baddali Karin, wakhtina aan lahayn iyo saldadda xukunka oo ayadu cimri gaaban ayaa aadanaha xukumayay wakhti dheer, haddana wali xukuma. Sidaas daraadeed awood kasta oo doonaysa inay wax fuliso oo amarkeeda la qaato waa inay fasax ka haysato diinta. Dadkii diinta hayay ee aqoonteeda lahaa waxay ahaayeen bashar dana leh oo danbina ka dhaco, qaar ka mid ahna waxay rabeen inay gaaraan danahooda khaaska ah inkasta oo aysan sidaas wada ahayn. Haddaba kuwaasi si ay danahaas u gaaraan waa inayd daliil keenaan. Haddii aan daliil rasmi ah diinta laga heli karin waxay samayn jireen ama haddana sameeyaan daliil, diinta la waafajiyay.

Inta badan daliilka noocaas ah ka ma imaan karo Quraanka kariimka ah iyo axaadiithta Nabigeenna (N.N.K.H) ee waxaa laga keenaa dhinaca Xaddithka aan saxiixa ahayn, ama Fatwada culumada qaar ka mid ah iyo rayigooda. Markasta waxaa jira dad raba inay diinta ku daraan qaybo aan ka mid ahayn balse iyagu ay rabaan inay danahooda khaaska ah ku gaaraan. Tusaale xilliyadii hore waxaa jiri jirey niman axaadiith sameeya oo Nabiga kubeen abuurta si ay

badeecadooda ama danohooda kale ugu fushadaan, maadaama ay ogyihiin in diintu tahay awood xoog badan oo lagama maarmaan ah. Si kastaba ha ahaatee, diintu waa awood aadanuhu u baahan yahay inuu danihiisa ku gaaro mid adduun iyo mid aakhiro ba.

Awoodda kale ee xukunka siyaasadda isagu waa is badlaa, wixii uu diinta uga baahdana Culumada Diinta ayaa u qabta oo uu uga badashaa waxa ay u baahan yihiin. Laakiin iyagu wixii ay sameeyaan culumada diinta ay u tiiriyaan oo ay fatwo waydiiyaan.

## Diintu waa xiriirka muuqda ee Alle iyo Aadanaha

Dabciga diintu waa wax ka sareeya caqliga iyo cilmiga aadanaha, waayo wuxuu ka yimid kii aadanaha abuuray. Diin kasta waxay toos u la xiriirtaa caadifadda iyo dareenka aadanaha. Markasta oo ay diintu tahay wax caqliga iyo tijaabada aadanaha ka saraysa, waxaa la xaqiiqsanayaa inay ka timid Eebbe weyne xaggi. Intabadan waa calaamad diinta lagu garto, inay tahay wax aad uga sarreeya waxa aadanuhu dejiyay ama hindisay, kana warramaysa waxyaabo aan aadanaha maankiisa iyo maskaxdiisa isaga soo dhici karin. Sidaas daraadeed waxay ka aqbalid iyo soo jiidasho badan tahay waxkasta oo kale, sababtuna waxaa weeye:

1. Waxay ka timid ama ka turjumaysaa Allihii aadanaha abuuray, dareenka iyo caadifadda aadanaha waxaa ka buuxa u diyaarsanaan iyo aqbalid wixii Alle ka yimid ama lagu sheegay inay Alle ka yimaadeen, xataa haddii aysan fahmin ujeedada iyo xikmadda ka danbaysa. Taas weeye midda keentay in aadanuhu aqbalaan oo qadariyaan xataa wax aan sax ahayn haddii loogu sheego in Alle keenay ama ay xagga Alle ka yimaadeen, waana taas midda keentay in dadka aan ka sheekaynay oo axaadiista sameeyay la iska aqbalay iyada oo aan digtooni la qabin.

Si kale haddii aan u niraahno, wixii Alle ka yimaada ama lagu sheego inay Alle ka yimaadeen waxay nafsadda

aadanaha ku leeyihiin awood. Marna isku mid ma aha Allaa yiri iyo aniga waxay ila tahay, xataa haddii la fahami karo sida ay adiga ku la tahay, waxa Alle loo tiiriyayna aan la fahmi karin –Alle addoomadiisa waxaan la fahmi karin uma sheegee- . Waxa Alle loo tiiriyay waxay wataan awood qadarineed oo aad u weyn, taas oo aysan haysan fikrad kasta iyo rayi kasta oo aadanaha loo nisbeeyay.

2. Diin kasta waxay ku dhisan tahay oo ugu weyn tiirarkeeda in wax la rumeeyo. In la rumeeyo wax kaa maqan oo aadan waligaa arag. Tusaale ahaan Diinta Islaamku waxay amaraysaa in qaybka la rumeeyo. Alle, Rasuulka inuu isagu soo diray, Mala’igta, Jinniga, Jannada, Naarta, Maalinta qiyaamaha iyo dhammaan arimaha la xiriira dhimashada iyo aakhiro.

"الذين يومنون بالغيب ويقيمون الصلوة ومما رزقناهم ينفقون * والذين يومنون بماأنزل اليك وماأنزل من قبلك وبالاخرة هم يوقنون، ألئك على هدى من رّبهم وألئك هم المفلحون"

“K**uwa rumaynaya waxa qarsoon oo salaadda tukanaya, wixii aan ku irsaaqnayna wax ka bixinaya iyo kuwa rumaynaya wixii laguugu soo dajiyay iyo wixii lagu soo dejiyay kuwii adiga ka horeeyay, aakhirana rumaysan, kuwaasi waxay ku sugan yihiin hanuun xagga rabbigood kaga yimid waana kuwaas kuwa guulaysanaya**.”’

3. Waxaa jirta qaybo badan oo diinta arkaanteeda ka mid ah oo aan caqliga lagu keeni karin lagaagana baahanyahay inaad sidooda ku aqbasho. Tusaale ahaan

salaadda cishuhu waa afar rakcadood, waxaana la tukadaa xilli aad loo daallan yahya, subxiguna waa laba rakcadood waxaana la tukadaa iyada oo aad loo firfircoonyahay oo la nastay hurdo iyo nasiinana laga soo kacay. Haddii aad caqligaaga u bandhigi lahayd sidaas ma ahaateen balse Alle ayaa maslaxadda iyo xikmadda ku jirta yaqaan, waana looga dambaynayaa.

Inta badan qaybtaasi waa arrimaha Caqiidada iyo cibaadada la xiriira. Wax yaabaha nolosha adduunkaan la xiriira ee aadanaha ku saabsan waa wax caqliga lagu fahmi karo, laguna miisaami karo caqliga iyo garashada aadanaha. Wax kasta oo nolashaan adduunka kusaabsan oo Alle ina amaray waxaan garan karnaa xikmadda ku jirta iyo ujeedada laga leeyahay. Arrimaha ku saabsan in aadanuhu is maamulo oo danihiisa u adeegsado cirka iyo dhulkaba, waxay u baahan tahay in la barto qawaaniinta xukunta oo ay ku dhisan yihiin cirka iyo dhulku, markii xeerkaas Alle u sameeyay la fahmo, markaas ayaa laga faa'iidaysanayaa oo la maamulayaa. Taasina waa shaqada caqliga aadanaha iyo maskaxdiisa.

Intabadan waxaa aadanaha isaga qasma ama iska dhexgala, goorta iimaan kaliya loo baahan yahay iyo goorta fikirka iyo caqliga loo baahan yahay. Kala saarid la'aantaas, ayaa keenta in aadanuhu labada dhinac mid u bato oo uu marna Caqliga iyo fikirka uga tago Diinta daraadeed, isaga oo isleh Diinta xooji oo iimaankaaga sug, marna uu Diinta ka tago isaga oo isleh caqligaaga ka faa'iidayso iyo

cilmiga xooji. Xaddaaradda wakhtigaan adduunka hogaaminaysa waxay ku tiirsantahay ama ku dhisantahay Caqli aan diin lahayn. Cilmiga nolosha adduunka ku saabsan waxaa keenay oo daaha ka qaaday caqliga insaanka. Laakiin xaddaaradaas reer Galbeedku hogaaminayaan waxaa ka maqan qaybtii ku saabsanayd in Qaybka la rumeeyo. Dad badan oo ka mid ah kuwa reer Galbeedka u fikira iyo culumadooduba waxay u maleeyeen inaan loo baahnayn Qayb oo khuraafo tahay aan sal iyo raad lahayn. Waxay ku dhiseen xaddaaradoodii caqli aan caqiido iyo iin midna wadan.

Haddaba waxaa is-waydiin mudan, maxay ka dhaxleen afkaartaas qalloocan?

Rumayn la'aanta Jiritaanka Alle iyo Kutubta Alle soo dajiyay, aadanuhu waa eeday. Intaan aakhiro iyo dhimashada waxa ka danbeeya lagaarin ayuu adduunkaan ku rafaaday. Runtii aadanuhu wuu eeday Diin la'aantii iyo rumayn la'aanta Eebbe oo aad iyo aad ayaa loogu rafaaday. Bani'aadamku wuxuu garan waayay; wuxuu ahaa, meeshii uu ka yimid, sababtii uu u yimid, ciddii keentay iyo waxay u keentay. Iskudayiddii in jawaab loo helo su'aalahaas waa suuroobiwaayeen, waayo run ma aysan ahayn , caqliga iyo ruuxdana ma qancin karin. Wixii la soo sheegay aragtidii Darwiin ee ahaa in Insaanku ka soo jeedo Ambeebe, kadibna isubadalay xayawaan, ilaa uu soo gaaray sida uu hadda yahayay, ma ahayn wax lagu qanci karo ama wax sax ah. Fasirka Insaanka ee ka duwan sidii Alle ku sheegay

ee diinta lagu wariyay, waa fasir aan macquul ahayn oo aan shaqayn karin.

Sidoo kale fikradda oranaysa wax walba dabeecadda ayaa abuurtay, waa fikrad khaldan oo aan wax lagu dhisi karin. Cirka, dhulka iyo inta u dhaxaysa, dadka, iyo xayawaanka waxaa abuuray dabeecadda wax la fahmi karo ma aha, wax jirana ma aha. Dabeecadda waxaas oo dhan abuurtay, haddana socodsiinaysa oo maamulaysa cilmi iyo caqli maleedahay?

Waxay ku jawaabayaan: Dabeecaddu caqli iyo cilmi midna malaha. Mar haddii aysan cilmi iyo caqli midna lahayn sideebay wax u maamulaysaa. Sideebay wax u abuurtaa. Insaanka oo caqli iyo cilmi leh, yaa siiyay caqliga iyo cilmiga haddii wixii abuuray ba aysan Caqli iyo cilmi midna lahayn?

Insaanku wuu ku habsaamay wuuna ku khasaaray inuu rumaysto aragtida maaddada ku salaysan ee aan ku salaysnayn wixii Alle soo dejiyay ee uu inoo sheegay. Nuqsaanta ku jirta xaddaaradda aadanaha ee wakhtigaan, waa ilaah diidnimada iyo wax walba oo si maaddi ah loo fasiro. Runtii caqliga iyo cilmiga aadanuhu wax weyn ayuu qabtay, noloshii aadanahana waxbuu ka badalay. Nuqsaanta ku jirta waa diin la'aanta iyo ka fogaanshada wixii Alle soo dejiyay. Taas meel kala ayaan uga hadlaynaa.

Mar haddii dabeecada diinku ku salaysantahay wax caqliga ka sareeya iyo wax maqan oo aan la arag oo la rumeeyo, wax badan oo aan diin ahayn ayaa aadanuhu ku

dari karaan. Wax badan oo khuraafaad iyo been ah ayaa aadanuhu keeneen kadibna diin ka dhigeen ama u ekaysiiyeen. Halkaas ayaa dhibaatada aadanaha ku dhacday waligeed ka soo jeeday. Waa sababtaas midda ay kaniisaddu ula dagaashay cilmigii iyo caqligii wakhti dheer oo Kun sannadood gaaraysa. Waana sababtaas midda Diinta Islaamka looga helayo dad badan oo isku dayaya inay diinta ku daraan wax yaabo aan ku jirin oo aan caqliga, Quraanka iyo axaadiistii Suubanaha midna waafaqsanayn.

Meesha aadanaha lagu imtixaanay oo keentay in dad badan ay Diinta Alle beeniyaan, dadna ay rumaystaan wax aan sax ahayn oo dulaynaya waa arrintaas. Waa arrinta ku saabsan in lakala saaro wixii diin ah iyo wixii aan diin ahayn, waa arrin adag. Mar haddii Diintu ay khilaafayso cilmiga iyo caqligayga hadde diin fiican ma aha, sidaas daraadeed waan ka tagay oo waan beeniyay. Taasi waa khalad. Diin la'aan iyo ilaah la'aan adduun iyo aakhiro midna lama noolaan karo, waana khasaare cad oo aan shaki lahayn.

Caalamka Reer Bariga ee Islaamka ah, waxaa dhib ku haya arrimihii ka dhashay caqliga oo aan shaqayn iyo fikirkii oo lagatagay. Taasi waxay keentay, dib dhac xagga maaddada iyo cilmiga ah. Waxay keentay inay caalamka kale ka haraan oo gaajo, jehli iyo cudur ay la rafaadaan. Waxay keentay inay u baahdaan oo marti u ahaadaan Bani'aadamkii fikiray oo caqligiisa ka shaqaysiiyay, isla markaasna qawaaniinta Cirka iyo dhulk fahmay. Reer Galbeedka oo caqligooda iyo fikirkooda isticmaalay waxay noqdeen dad wax qabsan kara oo xalliyay wax yaabo badan oo nolosha la xiriira. Taasi

waxay keentay, xaddaaradda hadda adduunkaan hoggaaminaysa ee Reer Galbeedku madaxda u yihiin.

Haddii Muslimiintu la rafaadeen rumayntii khuraafaad aan diintu sheegin lakiin qolo rabta in aan caqliga bini'aadamka laga shaqaysiinin ay fikirka iyo cilmiga ka horistaagtay, sidoo kale Reer Galbeedku waxay la rafaadeen noloshii gaalnimada iyo diin la'aanta ahayd. Way noolaan waayeen, wixii ay soo saareenna khasaare ayay noqotay, maxaa yeelay waxay nolosha ku galeen cadaab. Wax weyn ayaa kakhaldan, haddana ma jirto cid sheegi karta in waxa khaldan uu yahay diin la'aanta iyo Ilaah la'aanta, waayo waxaa jira kooxo xoog badan oo saamayn weyn ku leh bulshada oo aan danteedu ku jirin in Alle meesha lakeeno. Laakiin waxaan arkaynaa, dad badan oo is-dilaya oo noloshii xammili waayay. Waxaan arkagnaa xiriirkii dhadigga iyo labaka aadanaha oo sii baaba'aya. Waxaan arkaynaa Qoyskii oo dhintay oo aan jirin.

Nin iyo naag iyo carruur ma jiraan. Waxaa loo sameeyay nidaam waxaas oo dhan diidan. Waxaan arkaynaa naagihii oo dhalmadii diiday, waayo waxay ka kharibaysaa raaxdii shahwada iyo quruxdii ay nimanka ku soo jidan lahayd. Waxaan aragnaa dumidda qoyska iyo kala tagidda ninka iyo naagtu inay sii badanayaan. Waxaan aragnaa bulsho kala go'aaysa oo aan waxba isu ahayn. Waxaas oo dhan waxay sameeyay hab-dhaqan lagu badalay kii Alle aadanaha ugu talagalay. Waxaas oo dhan way muuqdaan. Waxayna aad uga muuqataa xaddaaraddii Reer Galbeedka ee maaddada iyo sancadu hoggaaminaysay.

Xalku waa dhex-dhexaadnimo. Xalku waa in wax lakala saaro oo aan wax la isku qasin. Xalku waa in sida wax u jiraan loo dhaba-galo. Xalku waa dhexdhexaadnimada Islaamka sida Alle ba u yiri:

"وكذلك جعلناكم أمّة وسطا لتكونو شهداء على النّاس ويكون الرّسول عليكم شهيدا"

**“Sidaas ayaan idinkaga dhignay ummad dhexdhexaad ah, si ad uga maragkacdaan dadka, rasuulkuna uu u ahaado mid idin marag-gashada idinka”**

Xalku waa in Reer Barigu caqliga xorriyad siiyo oo uu dulmiga ka daayo. Reer Galbeedkuna ay helaan baahida ruuxda, taas oo ah, in Alle la caabudo, Diintiisana loo noqdo.

## Nafsadda Insaanka Iyo Rumaynta Diinta

Alle Insaanka wuxuu uga jawaabay su’aalo muhiim ah, oo qof kasta is waydiiyo marka ugu horaysa ee uu adduunkaan yimaado. Carruurtu marka ay yar yar yihiin su’aalahaas way qabaan. Intabadan way isku qariyaan, haddii ay ku dhiiradaan inay waalidkood waydiiyaan ama qof kale waydiiyaan waxaa laga yaabaa inuusan jawaab shaafi ah siinin.

Su’aalahaas waxaa ka mid ah: Anigu maxaan ahay? Xagge ka imid? Yaa i abuuray? Maxaa la’ii abuuray oo la’iga rabay? Xaggee baan ku danbayn doonaa? Haddii aan dhinto xaggee aadayaa? Cirka iyo dhulka yaa abuuray? Ilaahay

xaggee jiraa? Naarta iyo Jannadu waa maxay? Iyo su'aalo aad u badan oo si aan ulakac ahayn isaga imaanaya oo kulligood ku saabsan in la fahmo sirta ka danbaysa caalamkaan aan ku noolahay iyo awoodda maamulaysa ee ka danbaysa.

Qofka su'aalahaas looga jawaabay ee laga shaafiyay iyo qofka aan looga jawaabin ee loo sheegay wax yaabo aan dhab ahayn nafsaddooda farqi weyn ayaa u dhexeeya. Waana farqiga u dhexeeya qofka Muslimka ah iyo qofka aan Muslimka ahayn. Waa Muslinimada mabda'a ah ee ma aha midda aan ka hadlayo midda juquraafiga ah ee dad gaar ah iyo meel gaar ah loo yaqaan inay kaligood Muslim yihiin.

Alle, (isaga ayaa ceeb la'aan ah oo sareeyee) Su'aalahaas oo dhan ayuu ka jawaabay. Markaas ayay nafsaddu xasishay oo ay degtay oo ay heshay, wehel iyo deganaan.

Macluumaadka nafsaddu u baahantahy oo aad u badan, waxaa Islaamku ku soo koobay, Shuruudda iimaanka oo lixda ah iyo Arkaanta Islaamnimada oo shanta ah. Shuruuddaas iyo arkaantaas waxaa lagu soo koobay wax badan oo laga yaabo inaan nafsadda caadiga ah qaadi karin sharaxaaddiisa iyo kala bixintiisa. Kaliya waxaa lagu soo koobay wax qof kasta fahmi karo, baran karo, xifdin karo, haddana koobaysa dhammaan wixii loo dan lahaa.

Shuruudda IImaanku waa inaad rumayso, Alle, Malaa'igtiisa, Rusushiisa, Kutubtiisa, Maalinta danbe ee aakhiro, iyo qadarka Alle khayrkiisa iyo sharkiisa, labadaba.

Arkaanta Islaamku:

- Waa inaad qirto in Alle kaligi yahay oo uusan jirin midkale oo xaq lagu caabudo.
- Waa inaad qirto in Nabi Muxammad Rasuulkii Alle yahay.
- Waa inaad Salaadda wakhtigeeda ku tukatid.
- Waa inaad Zakada bixisaa.
- Waa inaad Rammadaanka soontaa.
- Waa inaadxajka aadaa, haddii aad saadka haysato. Taasina waa Arkaanta Islaamnimada.

Haddii aad u fiirsato, farqiga u dhexeeya Shuruuda iimaanka iyo Arkaanta Islaamka, waxaad arkaysaa Iimaanku dhammaanti, waa qayb la rumaynayo. Waa shaqo qalbiga iyo nafsadda ku saabsan ama waa wax laguu sheegay oo aadan ogaan karin oo lagaa dalbaday inaad rumayso. Waana halkaas meesha ay ummuurtu macnaha kaleedahay.

Waa sirta kaladuwanaanta aadanaha. Waa sirta kala duwanaanta nolosha iyo qaab dhaqanka aadanaha. Waa waxa ka maqan dad badan oo adduunkaan maanta ku nool, waana sababta ay u rafaadsan yihiin. Waa waxa keena deganaanta iyo xasi loonida nafsadda. Waa wax aan cilmi iyo xoolo lagu heli Karin. Waa shayga Alle kaligiis bixiyo. Dadka rumeeya lixdaas shardi iyo dadka diida farqi weyn ayaa u dhexeeya noloshaan adduunyada. Aakhirana farqi kaas ka sii wayn ayaa u dhexayn-doona. Arrintaasi, waa arrinta muhiimka ah. Markaad fiiriso sida erayadu u kooban yihiin way kula yaraanayaan. Laakiin markaad fahamto sida

ay nolosha iyo hab-dhaqanka bilaa'aadanka u saameeyaan, waxaad fahmaysaa sirta wayn oo ay xanbaarsan yihiin.

Markaad fiiriso, Arkaanta Islaanimada, inteeda badan waa camal. Waa shaqo la qabanayo. Waa shaqadii ka dhalatay, lixdii shardi ee aad rumaysay. Waa dhisiddii nolol iyo xaddarad. Waa natiijadii ka dhalatay, iimaanka.

Haddii marka horaba, shaki galo, lixdaas shardi ee Iimaanka, waxay saamaynaysaa, nafsadda qofka. Nafsadda qofka bilaa'aadanka ah, waxay ku jiraysaa mugdi iyo su'aalo aysan ka jawaabi karin oo soo wajaha. Marka horeba ma garanayso, sababta ay u timid meeshaan ay joogto iyo waxa ay ka qabanayso, cid keenta, iyo xikmadda dhammaan khalqigaan, mood iyo noolba leh ee adduunkaan jooga. Marka u horraysa oo ay waydo jawaab qancisa oo arrimahaas ku saabsan, waxay bilaabaysaa inay jirrato. Waxay bilaabaysaa, inay isla qiimo darraato oo ay noqoto baadi dhuntay oo wax leh aan lagaranayn.

Halkaas ayay ka bilaabaysaa inay isku daydo inay ka jawaabto, su'aalaha dabeeciga ah ee marka u horaysaba nafsaddu is waydiiso. Yaa i abuuray? Yaa cirka iyo dhulka abuuray? Makhluuqaan faraha badan ayaa abuuray? Maxaase loo abuuray? Dantee laga lahaa? Habaynka iyo maalinta yaa sameeyay, yaase maamula? Run ahaantii, su'aalahaasi waa kowo aan laga jawaabi Karin. Cid jawaab u haysa oo aan Allaha khaaliqa ahayna ma jirto. Dhammaan jawaabaha aadanuhu ka bixiyay ee aan kitaabka Alle laga qaadan waa jawaabo aan sax ahayn.

Sidaas ayay ku timaaddaa, kala duwanaanta dadka rumaysan arrimahaas iyo dadka aan rumaysnayn. Si kalana haddii aan u niraahno, dadka gaalada ah iyo dadka Muslimiinta ah. Jawaab la'aanta, su'aalahaas muhiimka ah ee ay nafsaddu iswaydiinayso, ama si khaldan looga jawaabo oo la yiraahdo, Insaanku dixiri ayuu ka yimid, kadibna wuu koray, ilaa uu qof u ekaaday, wuxuuna soo maray, inuu u ekaado, daanyeerka. Markii sidaas oo kale looga jawaabo su'aalaha muhimka ah, waxaa nafsadda ku dhalanaya wareer, walwal, walbahaar, maxaa yeelay waxaa laga gooyay ama la iska hortaagay sidii ay ahayd inay u fakarto iyo ciddii ay ahayd inay ku xirnaato ah Allihii abuuray, waxaana la taagay meel cidla ah oo cid u naxariisata aysan jirin. Waxaa nafsadda laga jaray waxii naxariis ahaa oo Alle u sheegay inuu siinayo. Waxaa laga dhigay insaankii inuu xawayaanka qashinka ka dhasha lamid yahay oo uusan wax macno gaar ah uu san lahayn, waliba maraaxisha la mariyay ma ahan xayawaano aadanaha dhexdooda laga ixtiraamo ee waa dixiri iyo daanyeer.

Halkaas ayuu Iimaanku kasoo galayaa caafimaadka nafsadda ama jirradeeda. Marka laga hadlayo nafsadda bilaa'aadanka iyo wax qabadkeeda waa lagama maarmaan ah in lala xiriiriyo waxa ay aamminsantahay iyo diinteeda ama diin la'aanteeda.

Waxyaabaha Iimaanka la xiriira, nafsaddana saamaynaya waxaa ka mid ah, mas'alada "Tawxiidka iyo shirkiga". Diinta Islaamka waxaa tiir u ah tawxiidka. Haddaba waa maxay tawxiid? Runtii waa muhim in si fiican oo waafi ah loo fahmo,

macnaha Tawxiidka. Waxaa nolosha bilaa’aadanka la xiriira marar badan oo uusan qofku go’aamin karin, meeshii iyo ciddii uu ku kalsoonaan lahaa, taladiisana u dhiiban lahaa. Awoodaha adduunkaan ka jira oo cabsi galin iyo rajagalin kuu soo bandhigaya way badan yihiin. Markaas oo kale weeye marka aad u baahantahay inaad doorato inaad muwaxid noqoto oo aad ka doorato, waxa muuqda oo laguu soo bandhigay, waxa qarsoon ee Alle kuu yaboohay.

Markii ay nafsaddada ku hardamaan, haah iyo maya, waa markaas marka aad u baahantahay inaad muwaxid noqoto. Waxaa jira quwado badan oo doonaya inay qaataan shaqadii Alle. Quwado badan oo doonaya, inay go’aan ka gaaraan xalaal iyo xaaraam. Quwado badan oo doonaya inay go’aan ka gaaraan waxa xun iyo waxa fiican. Quwado badan oo doonaya inay go’aan ka gaaraan, sida fiican mustaqbalka iyo sida xun. Waxaa jira quwado badan oo aan Alle wax waydiinayn kuna xirnayn.

Markaas oo kale ayaa lagaa rabaa inaad muwaxid noqoto oo aysan nafsaddaada ku diririn, ilaahyo badan. Markaan sidaan u hadlo, waxaan u muuqanayaa, wadaad diin fidinaya. Waan ahay wadaad diin fidinaya. Waan ku faanayaa, waanna ku faraxsanahay, waxaanse hadda ka hadlayaa xiriirka ka dhexeeya caafimaadka nafsadda iyo arrimaha diinta la xiriira, sida Iimmaanka iyo cibaadada. Waana xiriir dhab ah oo ay citiraafeen dhammaan culumada cilmu-nafsiga iyo kuwa nafsadda daaweeya ama wax ka sheega.

Sideedaba, nafsaddu waxay wax ku dhisantahay, waxay maqashay, waxay aragtay, iyo wax ay dareentay. Dhammaan daawada iyo jirrada nafsaddu waxay ka yimaadaan dareemayaasha aadanaha. Waxaa nafsadda deganaanta iyo raaxda siinaya wixii loo sheegay oo ay ku qanacday. Taas ayay ka dhalanaysaa qiimaha nafsadda iyo islawayninkeedu. Wax loo sheego nafsadda oo looga jawaabo, waxaa ugu muhiimsan awoodda iyo xikmadda ka danbaysa caalamkaan aan ku noolnahay, waxa muuqanaya iyo waxa aan muuqanaynba. Waa su'aalaha dabeeciga ah oo cunug kasta marka u horraysa uu is waydiiyo, inta bandanna uusan helin wax uga jawaaba –umadaha aan diinta ku dhaqmin-. Xiriir wayn ayaa ka dhexeeya jawaabaha su'aalahaas iyo caafimaadka nafsadda aadanaha iyo wax qabadkeeda.

## Iimaanku waa daawada nafsadda

Arrimaha ku saabsan abuuridda aadanaha iyo wixii loo abuuray, waxay xoojinayaan nafsadda bani'aadamka. Xikmadda ballaaran ee Alle ina baray waxay xoojinaysaa nafsaddeenna. Alle wuxuu inoo sheegay, waxyaabo isaga ku saabsan. Wuxuu inoo sheegay, inuu Allaheen yahay, caalamkaan oo dhan wax yar iyo wax weyn, wax kor jira iyo waxa hoos jira, wax muuqda iyo wax qarsoon inuu isagu abuuray. Waxaa Alle inoo sheegay inuu ina imtixaanayo oo cirka iyo dhulka iyo inta u dhexaysa uu u abuuray inuu ina imtixaano. Inuu fiiriyo keennii camal fiican. Dhammaan arrimahaas aan kor ku soo sheegnay waxay dhisayaan nafasddeena. Iimaanku waa daawada nafsadda. Daawooyinka kale oo dhan, waxaa ka fiican daawada Iimaanka. Maxaa yeelay nafsad Alle rumaysan ma jirrato. Nafsadaha jirrada waa kuwa aan Alle rumaysnayn ama ka shakisan Diinta iyo Alle.

Dhibaatada weyn ee ina haysata ee ku saabsan Qaadka, daroogada kale, shaqo la'aanta iyo xoolo mabadirnimada, waxaa daawo u ah, Iimaan iyo Cibaado. Runtu waa saas. Maxaa yeelay, Qaadka iyo daroogada naf Iimaan wayday oo cabaadaysa oo qaylinaysa oo Alleheed raadinaysa ayaa lagu seexiyaa. Ninka Qaadka cunaya maxaa gaynaya? Muxuu u cunayaa? Maxay tahay baahida u gaynaysa ama ku khasbaysa qaadka? Waa nafsad cabanaysa oo muddaharaad ku jirta oo rafanaysa oo ku cabanaysa: Waxaan rabaa

Iimaan, waxaan rabaa cibaado Alle. Waxaan rabaa xasilloonida xusidda Alle. Alle ayaan raadinayaa. Dikriga Alle ayaan rabaa. Nafsaddaas harjadaysa ayaa qaadka lagu dejiyaa iyo daroogada kale oo dhan, si miyirka iyo dareenka looga qaado loona galiyo koomo dheer.

Si aad uga faa'iidaysato duruustaan waa inaad samaysaa arrimahaan:

1. Waxaad u baahantahay inaad Alle rumaysid.
2. Waxaad u baahantahay inaad samayso wixii Alle ku amray, sida cibaadada, iyo ixsaanka.
3. Waxaad u baahantahay inaad is ogaatid, waxa aad tahay, meeshaad katimid, sababtii laguu abuuray, waxa lagaa rabo.
4. Waxaad u baahantahay inaad hesho, macluumaad arrimahaas Qaybka ah ku saabsan.
5. Waxaad u baahantahay inaad si joogta ah Qur'aanka u akhriso, kuna fikirto oo aad macnihiisa u dhaba-gasho.
6. Waxaad u baahantahay inaad fikirto oo caqligaaga shaqo galiso. Maxaayeelay, fikirku wuxuu yimaadaa, mushkuladda ka dib, xalkuna wuxuu yimaadaa, fikirka ka dib.
7. Waxaad u baahantahay inaad xirfad shaqo aad barato oo aad si fiican u sugto xirfaddaada, markaasna aad ku shaqaysato.

Wixii aan halkaan ku soo sheegnay oo qiso iyo akhbaar ahaa waa wax nafsaddaada xoojinaya oo kaa dhigaya qof u

adkaysan kara imtixaanka. Mar waxaa lagugu imtixaanayaa shahwo, xoolo, xukun, awood, marna waxaa lagugu imtixaanayaa; cudur, faqri, dulmi, ihaano lagu ihaneeyo iyo dhibaatooyin badan. Labada noocba waa in aad u adkaysan karto oo nafsaddadu imtixaanka ku baasi karto. Markaas ayaad nafsad fiican haysataa. Wax alle, wixii aan soo sheegnay ee ku saabsanaa, Insaanka waxaa loola jeeday inay nafsaddaada dhisaan oo aad noqoto qof gob ah oo laandheere ah oo aan xayawaan iyo dixiri ka imaan ee Insaan Alle abuuray haddana karaameeyay ah.

Hadda waxaan ku siinayaa tusaalayaal imtixaanka kusaabsan oo loo baahanyahay inaad ku baasto. Waxaan tusaale kuugu soo qaadayaa nafsadihii dhisnaa ee Alle karaameeyay qaar kamid ah iyo sidii ay ugu adkaysteen Imtixaankii soo maray. Markii aad arrintaas fahamto, waxay u badantahay inaad imtixaanka ku baasayso oo aadan Qaad iyo daroogo iyo khamri aadan nacfi ka raadin.

Dadkii Bani'aadamka ka mid ahaa oo taariikhda caalamka wax badalay, waxay haysteen nafsad adaga oo dhisan. Markaas ka dib ayay awoodeen inay mas'uuliyadda dhabarka u ritaan. Ma jiro qof macna lahaa oo adduunkaan wax ka badalay, haddiise uu jiro, wuxuu u adkaystay imtixaan iyo dhibaato, uusan u dulqaadan karin qof nafsad jilicsan leh.

Nabi Mohammed -Nabad iyo Naxariis korkiisa ha'ahaatee- Wuxuu u samray, nooc kasta oo dhibaato iyo imtixaan ah. Haddii ay tahay mid dabeeci ah, sida faqriga, arradka, jirrada,

waayidda waalid, walad iyo xaas iyo haddii ay tahay mid halganka iyo wax ka badalka caalamka ku saabsan. Nabiga waxaa soo maray dhibaatooyin waaweyn oo ayna suuragal ahayn inuu qof kale xammilo. Wuxuu ahaa, agoon aan aabihi arkin, hooyadina isaga oo yar ayay dhimatay. Wuxuu arkay, waxa ay leedahay agoonimo iyo rajaynimo, hooyo la'aan iyo aabbe la'aan.

Waxaa koriyay oo dhaqaalayn jirey, adeerki Abuu daalib. Markii xilka dacwada Diinta la saaray, waxaa caawin jirey, adeerki Abuu Daalib. Sannadkii tobnaad ee xilka risaalada ayaa Abuu Dhaalib dhintay. Wuxuu dareemay, kalinimo iyo kaalmo la'aan, tolkiis dhexdiisa ah. Waxaa kale oo caawin jiray, xagga dhaqaalaha iyo xagga nafsadda iyo wehelkaba, xaaskiisii Khadiija Bintu Khuwaylad. Isla sannadkii Abuu-Dhaalib dhintay oo ahaa sannadkii 10 aad ee Risaalada ayaa khadiijana dhimatay. Gurigii iyo golihii labadabu way ku cidloobeen. Cidla iyo wehel la'aan ayuu dareemay. Carabtii ka xishoon jirtey, markii adeerki noolaa way ku soo dhiiradeen oo waxay u diideen fursad uu dadka kula hadlo, wayna go'doomiyeen.

Markaas, ayuu go'aansaday inuu meel kale oo aan Maka ahayn iskudayo. Wuxuu aaday Daa'if oo ay daganaayeen, niman Reer Thaqiif la yiraahdo. Waxay Maka u jirtaa 60 mayl. Nimankii odayaalka u ahaa reerkaas markuu la hadlay, way ku jees-jeeseen, wayna diideen inay marti galiyaan. Intaas kaliya kumay dayn ee ciyaalkii iyo sufahadii ayay ku direen. Dhagax ayaa lagala daalay, ilaa uu lugaha dhiig ka siidaayay. Cararkii uu carayay, ayuu maciin biday, beer nin iyaga ka mid

ahaa oo la oranjiray Rabiica. Halkaas ayuu mar kale isaga oo baqaya Maka ku soo noqday. Markaas ayuu Alle codsi u dirsaday. Erayo, xeel dheer oo taariikh Muslimiinta galay ayuu ku hadlay. Waa kuwaan eraydii uu Nabigu ku ducaystay:

" اللهم إليك أشكو ضعف قوتي ، وقلة حيلتي ، وهواني على الناس ، أرحم الراحمين ، أنت أرحم الراحمين ، إلى من تكلني ، إلى عدو يتجهمني ، أو إلى قريب ملكته أمري ، إن لم تكن غضبان علي فلا أبالي ، غير أن عافيتك أوسع لي ، أعوذ بنور وجهك الذي أشرقت له الظلمات ، وصلح عليه أمر الدنيا والآخرة ، أن تنزل بي غضبك ، أو تحل علي سخطك ، لك العتبى حتى ترضى "

’’Ilaahoow adaan kuu sheeganyaa tabar daradayda iyo xeelad la’aantayda iyo sida dadku iidullaysanayan, inta naxariisata midka ugu naxariista badanoow adigaa ah rabbiga kuwa la liido, adigaa ah rabbigay yaad ii talo saaranaysaa? Ma mid iga fog oo iweeraraya? Mise cadow aad milkisiisay taldayda? Haddiise ayan waxa igu dhacaya iigu dhacynin abaal-marin ka timid caradada umma aabayeelayo laakiin mar kasta dalabka cafiskaaga ayaa ah midka ii wasaca ah. Waxaan magangalay nuurka wajigaaga, kaas oo aad ku iftiimisay mugdiyaalka oo aad ku hagaajisay arrimaha dunida iyo midda maalinka xisaabta. Eabbiyoow adigay cabasho kuu sugnatay ilaa ad raali iga noqoto.”

Isla aayaamahaas, ayaa nabiga loo sheegay, inay dhagaysteen oo rumeeyeen koox jinniga ka mid ah. Waxaa Nabiga ku soo degay, Qul’uuxiya suuradda la yiraahdo. Taasi waxay Nabiga tusinaysay mar haddii jinnigii fahmay oo rumeeyay inay fududahay in Insaanku rumeeyo oo uu san iska dhagamari karin Quraanka.

Dagaalo badan oo lagu hoobtay ayaa Nabiga iyo Muslimiinta lagu soo qaaday. Waxaas oo dhib iyo imtixaan ah, Nabigu waa u adkaystay.

Nabi Yuusuf, Calayhi salaam, isaga oo yar ayaa walaalihi ceel ku rideen. Dhimasho silic leh, ayuu ku sigtay. Mugdigii ceelka, baahidii iyo cabsidii, waxaa ugu darsamay, in lagatay oo addoon laga dhigtay. Dhibtaas inta ay le'egtahay iyo xanuunkeeda bal u fiirso. Wuu u samray, wuxuuna ka gudbay, isaga oo caafimaad qaba oo nafsaddiisu fiicantahay. Markii uu Imtixaankii ceelka, gaajada, baqdinta iyo addoonnimada ka gudbay oo uu u samray, ayaa waxaa yimid imtixaan kale oo ka daran kii hore. Waxaa yimid imtixaankii jacaylka iyo shahwada. Wuxuu ahaa nin dhallin yaro ah oo caafimaad qaba, qurux xadka ka baxsanna ku darsaday. Haddana nin xor ah oo isagu ismaamula ma uusan ahayn ee wuxuu ahaa, addoon la leeyahay. Waxaa jeclaatay, naagtii Boqorku qabay ee uu gurigeed ku noolaa. Way sasabatay. Kadibna markay kari wayday, ayay xoog ku qabsatay. Iyaga oo isku maran oo lagdamaya ama iscayrsanaya ayaa ninkeedi uu soo galay. Waxay ku calaacashay, 'Ninkaan wuu damcay inuu i kufsado, waa in la xiro'.

Haddii kiiskii mudo socday, waxaa go'aan lagu gaaray in Yuusuf xabsiga la dhigo. Sannado badan ayuu xabsi ku jiray. Muddo kadib, ayaa cilmigiisa iyo Ixsaankiisa la ogaaday. Markii uu riyadii Boqorka fasiray, ayaa madax laga dhigay oo xilkii dhaqaalaha waddanka Masar ee wakhtigaas loo dhiibay. Wuxuu ku samray, Imtixaankii dhibta, kii shahwada, kii xabsiga iyo kii xukunka. Waxaas oo dhan waxay u

baahantahay, nafsad caafimaad qabta oo nool oo xil qaadi karta. Ma jiro qof xil weyn qaaday, haddiise uu jiro wuxuu lahaa, nafsad sare oo dhal-dhalaalka adduunkaan ka saraysa.

Sidoo kale, Nabi Ibraahim dab ayaa lagu riday. Nabi yuunis, badda ayaa lagu tuuray, markaas ayaa xuut liqay, markaas ayuu Alle baryay. Alle wuu u naxariistay. Nabi, Ayuub, jirro adag ayaa ku dhacday. Kadibna Alle wuu caafiyay. Imtixaanku waa qaab nafsadda lagu tababaro, si ay u noqoto, nafsad adag oo adkaysan karta oo xil qaadi karta. Nelson Mandeela, inkasta oo uusan islaam ahayn haddana labaatan iyo todobo sano ayuu xabsi u adkaystay. Dadka caalamkaan wax ka badalay oo dhan waxay ka sinnaayeen nafsad adag oo caafimaad qabta. Inta aan anigu ogahay, ka sokow abuuridda Alle ee asaliga ah, wax nafsaddu ku xoogaysato, waxaa ugu fiican Cibaada Alle iyo Iimaanka.

## Nafsadda iyo camalka wanaagsan

Ilaahay nafsadda aadanaha wuxuu u diray camallo fara badan. Qaar waajib ah ama faral ah oo aan sinaba, marnaba laga tagi Karin iyo qaar kale oo aad loogu dhiiri galiyay loona ballan qaaday abaal weyn oo uu ku farxo qiyaamaha. Shaqooyinkaas la isu diray waxay isugu jiraan wax qofka iyo Ilaahiisa ka dhexeeya oo aan cidna garanayn waxa ay faa'iidaynayaan iyo kuwo kale oo qofka iyo dadka uu lannool yahay ka dhexeeya. Waxyaabaha Alle iyo addoonkiisa ka dhexeeya waxaa ka mid ah, Salaadaha waajib iyo sunnaba, Soonka, xajka, iyo kuwo kale oo badan. Kuwa qofka loo diray, haddana bulshadu ka faa'iidaysanayso waxaa kamid ah, Zakada, sadaqada, xirriirinta waalidka, qarraabada, dariska, masaakiinta, caawinta dadka liita, wanaagga iyo tacliinta oo laga shaqeeyo iyo cammalo kale oo badan.

Cammaladaas cibaadada ah oo diiniga ah waxay xirriir toos ah la leeyihiin nafsadda aadanaha. Haddii ay nafsaddu qabato cammaladaas cibaadada ah ee Alle u diray waxay noqonaysaa nafsad dhisan oo caafimaad qabta oo wax qabsan karta. Daroogo iyo qaad, fisqi iyo dhillaysi iyo acmaashaas cibaadada ah meel mawada galaan. Haddii uu qofka dhallinyarada ah laasimo, cibaadada, kana nabadgalo daroogada iyo qaadka wuu badbaadayaa adduun iyo aakhiraba. Halkaas ayay nafsaddiisu ku fiicnaanaysaa cibaadada iyo baryada Alle. Sidee ayay nafsaddu ugu nooshahay cibaadada oo markay cibaadaysato u caafimaad

qabtaa marka kalana nafsaddu u jirranaysaa? Sirtaas Alle ayaa garanaya. Laakiin innagu waxaan aragnay inay arrintu sidaas tahay. Wiilka ama gabadha Maraykanka iyo Yurub jooga haddii ay Alle caabudaan, nafsaddoodu way fiicantahay. Ilaahood iyo waalidkood iyo qaraabadiiba way xusuusanayaan. Waa sidaas arrintu. Nafsadda aadanuhu waxay ku biskoon kartaa Iimaanka iyo cibaadada Alle.

Markasta oo qofku camal wanaagsan sameeyo, waxaa xoogoobaysa nafsaddiisa, himmaddiisa ayaa kor u kacaysa. Gaar ahaan marka uu qofku sameeyo cammallada Diiniga ah sida salaadda, soonka, zakada, xajka, sadaqada, ixsaanka, wax tarka iyo caawinta dadka liita, waxaas oo dhan waxay xoojinayaan nafsadda qofka bilaa'aadanka ah. Waxaa la'ogaaday qofba qofka uu ka cibaado badan yahay inuu ka fiican yahay, caafimaad ahaan, cood ahaan iyo waliba faraciisa iyo nasligiisa. Haddii uu qofku xaaraanta iska ilaaliyo, xalaasha iyo cibaadadana ku dadaalo ciribta danbe isaga ayaa yeelanaya adduun iyo aakhiraba. Marka cibaadadu waxay kabtaa oo kor u qaadaa nafsadda bilaa'aadanka.

إن الإنسان خلق هلوعا إذا مسه الشر جزوعا وإذا مسه الخير منوعا إلا المصلين الذين هم على صلاتهم دائمون والذين في أموالهم حق معلوم للسائل والمحروم والذين يصدقون بيوم الدين والذين هم من عذاب ربهم مشفقون إن عذاب ربهم غير مأمون والذين هم لفروجهم حافظون إلا على أزواجهم أو ما ملكت أيمانهم فإنهم غير ملومين فمن ابتغى وراء ذلك فأولئك هم العادون والذين هم لأماناتهم وعهدهم راعون والذين هم بشهاداتهم قائمونوالذين هم على صلاتهم يحافظون أولئك في جنات مكرمون"

"ان الصلاة تنهى عن الفحشاء والمنكر والبغي"

Aayadahaas iyo kuwa kale oo lamid ah waxaa Alle ku sheegay inay salaadda iyo cibaadooyinka kale ayay nafsadda xumaanta iyo jirroyinka nafsiga ah ka ilaalinayaan. Wax yaabaha diinta la xiriira, haddii camal ahaan loo qabto waxay xoojinaysaa nafsadda, waxay kale oo badinaysaa iimaanka iyo xasilloonida nafsadda. Nafsad cibaadaysanaysa waa nafsad saraysa oo himmad iyo rajo badani ku jirto. Nafsaddu marka ay cibaado samaynayso, waxay u samaynaysaa rajo ku jirta, inay maalinta danbe ee aakhiro ay ajri hesho, cadaab iyo ciqaabna ka badbaado. Waa himlo iyo rajo weyn oo aysan samayn karin nafsad niyo jabtay oo quusatay. Nafsadda niyo jabtay wax shaqo ah ma qaban karto. Haddii ay tahay shaqo aduun iyo haddii ay tahay shaqo aakhiro midna maqaban karto. Marka waxaa masaajidda Alle cammira oo cibaadaysta qof nafsad sare leh oo caafimaad qaba. Qaadka iyo daroogada kale waxaa loo isticmaalaa in lagu dejiyo nafsad jirran oo harjadaysa oo aan daganaan iyo xasilooni haysan.

## Sidaad maskaxdaada uga faa'iidaysan lahayd

Haddii aadan maskaxdaada ilaashan, waxaa laga dhigi karaa meel lagu tijaabiyo, afkaarta cusub ee markaas soo baxday oo aan wali la'ogaan dhibteeda iyo dheefteeda.

Xiriirka ka dhexeeya caafimaadka nafsadda iyo fahamka suuban ee Diinta waa mid aad u adag. Waxaa aad u adag in la daaweeyo nafsadda iyada oo aan la daawayn waxa ay rumaysantahay iyo sida ay u fikirayso. Aniga oo arrintaas tixgalinaya ayaan halkaan kaga hadlayaa arrimo aan u arko inay nafsadda iyo maskaxdaba daawo u yihiin oo la xiriira fahamka Diinta Islaamka. Sidoo kale waa waajib diini ah in la isku baraarujiyo xaqiiqada Diinta Islaamka, gaar ahaan markii la illaawo ama laga xiisa dhigo.

Waa muhiim in la isku baraarujiyo. Waxaa laga yaabaa in akhriyuhu is waydiiyo xirriirka ka dhexeeya cilmiga nafsadda iyo arrimahaan diinta ka hadlaya. Xiriirka ka dhexeeya horay ayaan ku xusay. Iimaanka iyo fikirka ayay nafsaddu ka shidaal qaadataa. Haddii fahamka Diintu kuu hagaago fikirka ayaa kuu toosaaya, nafsadduna way xoogoobaysaa. Waxaan rabaa inaan toos ku ifiyo, mawduucyo muhiim ah, laakiin aan la isku baraarujin. Waxaan wax ka sheegi doonaa: Diin, Ilaah, Kitaab, Rusul. Marka waa inaad daraasayso, mawaaddiicdaan si fahamkaagu u hagaago, ka dibna nafsaddaadu caafimaad u hesho.

## Sidaad u fikirto

Sidaad u fikirto iyo waxaad ku fikirto qayb weyn ayay ka tahay sida nafsaddaadu noqonayso. Nafsad caafimaad qabta oo xoog leh waxaa lagu helaa, Iimaan iyo cibaado. Nafsadda Alle rumaysan isla markaasna Alle caabuda oo amarkiisa raacda, waxaa lagu yaqaan, ama lagu arkay inay tahay, nafsad dhisan oo Alle xiriir la leh. Culumada cilmu-nafsiga iyo kuwa maskaxdu waxay dadka kula taliyaan inay ku dhaqmaan waxa ay rumaysan yihiin. Waxay ogaadeen in loo baahan yahay cibaado iyo wax la caabudo, laakiin inay kala doortaan oo xaq iyo baadil u kala saaraan wali ma aysan gaarin ama ma doonayaan. Alle wuxuu qor'aankiisa ku yidhi:

" والعصر انّ الانسان لفى خسرالّا الذين أمنو وعملوا الصّالحات وتواصو بالحق وتواصو بالصّبر"

**Alle wuxuu inoo sheegay in kulligeen khasaare aan ku sugan nahay. Waxaan ka ahayn, kuwa Iimaanka leh isla markaasna camal wanaagsan ku daray. Isuna dardaarmay, xaqa iyo samirka.**

Haddii nafsad wanaagsan oo caafimaad qabta laga hadlayo, waa lagama maarmaan in sida loo fikirayo iyo waxa la rumaynayo laga hadlo. Runtii nafsad wanaagsan waxay xiriir la leedahay fikir wanaagsan. Fikir wanaagsanna wuxuu xiriir la leeyahay wax wanaagsan oo la rumaysan yahay. Lagama yaabo in lahelo nafsad caafimaad qabta, haddii aan la helin fikir wanaagsan oo caafimaad qaba.

Waxaa si xoog leh isugu xiran waxa la rumaysan yahay iyo sida loo fikiro. Fikirkaas iyo iimaankaas ayaa sameeya nafsadda. Lagama yaabo inaad dhiiri-galiso, carada, dagaalka, cadaawadda iyo gooynta dadka kale isla markaasna aad haysato nafsad caafimaad qabta. Caafimaadka nafsaddaadu wuxuu ku xiran yahay, sida aad u fikirto iyo waxa aad rumaysantahay.

Jirrooyinka nafsadda ku dhaca iyo waswaaska la xiriira waxay aad ugu badantahay dadka sida xun u fikira, caalamka kalena u haysta inuu cadaw ku yahay. Haddii uu qofku u qaato dadka kale oo dhan inay cadaw u yihiin, isla markaasna ay cadawga Alle yihiin, wakhti dheer kama soo wareegayso marka nafsaddiisu jirranayso. Wuxuu dareemayaa kalinimo, wuxuu u qaadanayaa inuu dadka kale oo dhan ka duwan yahay, wuxuu caalamka oo dhan u arkayaa si isaga u gaar ah. Wuxuu dareemayaa inuu khaas yahay oo uu san haysan caalamkiisii ku habboonaa isaga. Dhallinyarada Diinta ku dadaala isla markaasna si khaldan u fahma oo ka duwan sidii ay salafku u fahmeen ayaa ugu badan dadka nafsad ahaan jirran. Waxaad arkaysaa dhallinyarada qaar kood oo kayimid waddamada Reer Galbeedka oo ku waydiinaya raashinkaan ma xalaalbaa? Makhaayaddaan wax Malaga cuni karaa? Saabuuntaan ma lagu qubaysan karaa? Catarkaan ma la marsan karaa? Soo gaalnimo ma aha, soo gaalo ma samayn?

Fikirka noocaas ah, wuxuu isu badalayaa jirro xagga nafsadda ah, wuxuuna qasayaa nolosha iyo caafimaadka qofka sidaas u fikira. Xaaladda noocaas ah iyo nafsaddaas

jirran aad ayay noogu badantahay haddaan Soomaali nahay. Wax jira iyo waxaan jirin, wax run ah iyo wax been ah, markaan rumayno ama aan ku fikirno waxaas oo kale waxaa ka dhalanaya jirro xagga maskaxda iyo nafsadda labadaba wax yeelaynaysa. Tusaale ahaan daaraha dhulka korkiisa laga dhiso, waxaan ugu necebnahay, Kaniisadaha. Waxaan halmaansanahay ama aannaan ku baraarugsanayn in Alle amray in la ixtiraamo meelaha ay dadka kale wax ku caabudaan ee diinaha oo dhan iyo sidoo kale in xiriir xagga diinta ah uu naga dhexeeyo annaga iyo Ahlul-kitaabka. Culumadii fiqhiga Madhabka shaaficiga ah, ayaa soo bandhigay, kee fadli badan salaad kaniisad lagu tukaday ee salaad meel bannaan lagu tukaday, haddii aan markaas la heli Karin Masaajid. Culumada wakhtigaas sidaas u fikiraysay iyo annagu isku diin ayaan nahay, laakiin fahamka ayaa noo kala duwan.

" ولولادفع الله النّاس ، بعضهم ببعض، لهدّمت صوامع وبيع وصلوات، مساجد
يذكرفيهااسم الله" سورةالحجأية 40

“Hadaan dadka qaarkood qaarka kale lagu qaban lahayn, waxaa burburi lahaa kaniisado iyo masaajidyo magaca alle lagu xuso”’

sidoo kale, in xiriir xagga diinta ah uu naga dhexeeyo annaga iyo Ahlul-kitaabka. Culumadii fiqhiga Madhabka shaaficiga ah, ayaa soo bandhigay, kee fadli badan salaad kaniisad lagu tukaday iyo salaad meel bannaan lagu tukaday, haddii aan markaas la heli karin Masaajid. Alle,

wuxuu Quraanka inoogo sheegay, dagaalkii dhexmaray, Ruum iyo Faaris. Ruum waxay ahaayeen Nasaraa,(Ahlulkitaab) Faarisna, waxay ahaayeen kuwa dabka caabuda. Markay dagaalameen, waxaa laga adkaaday, Ruum. Quraan ayaa ka soo degay, ilaa Qiyaamaha la akhrinayo. Alle, wuxuu yidhi:

ألم غلبت الرّوم، فى أدنى الارض، وهم من بعدغلبهم، سيغلبون، لله الامر من قبل ومن بعد ويومئذ يفرح المومنون، بنصرالله، ينصرمن يشاء، وهو العزير الرّحيم" سورةالرّوم ، أية 1-5

"Ruum, waa laga adkaaday. Dhulkii udhawaa, ayaa laga qabsaday. Wixii dhacay, amarka Alle, ayay ku dheceen, mar hore iyo mar danbaba. Guushe Alle ayaa bixiyay, ciddii uu doonana wuu siiyaa Laakiin Room, ayaa rayndoona oo guusha ku danbayn doonta. Maalintaas ay Ruum guulaysato, ayay Mu'miniintu farxidoonaa."

Halkaas, waxaa ku cad in Mu'miniintu ku farxayaan guusha ay guulaysatay Ruum, maxaa yeelay, waa Ahlul-Kitaab. Ummadihii kitaabka la siiyay iyo ummadda Nabi Muxammad xiriir xagga Diinta ah, ayaa ka dhexeeya. Alle wuxuu inoo banneeyay, haweenkooda inaan guursano, raashinkoodana cunno. Xiriir weyn oo xagga diinta ah, ayaa inaga dhexeeya. Laakiin, hadda waxay u muuqtaa inaan arrintaas lagu baraarugsanayn ama aan la tixgalin. Waxaa xoogga la saaray, wixii aan kukala duwanayn ee waxba lagama sheegin, wixii naga dhexeeyay ama aan isku waafaqsanayn. Waxaa Alle yiri

"اليوم أحل لكم الطيبات وطعام الذين أوتوا الكتاب حل لكم وطعامكم حل لهم والمحصنات من المؤمنات والمحصنات من الذين أوتوا الكتاب من قبلكم إذا آتيتموهن أجورهن " الاية. المائدةأية 5

Alle, wuxuu yiri: "**Maanta, waxaa la'idiin xalaaleeyay, rashinka, iyo gabddha Ahlul-kitaabka, iyagana sidoo kale, cuntadiinaa xalaal u ah, gabdhaha dhawrsoon oo mu'miniinaadka ah ayaa idiin bannaan iyo kuwa dhawrsoon ee ehlu kitaabka ah, haddii aad siisaan meherkooda."**

marka, waad gaydaan gabdhahooda wanwanaagsan , waadna is martigalin kartaan. dhallinyaro, muslimiin ah oo doonaya inay diintooda fuliyaan oo ku dhaqmaan, ayaan jeclayn inay makhaayadaha aan mulimiintu haysan inay wax ka cunaan. waa caadi inaad maqasho, su'aasha ah, ma xalaalbaa? wax xalaal ah ma hayaan? raashinkooda ma lacuni karaa? iyo wixii la mid ah. xalaal miiradka noocaas oo kale ah, shaykhul islaam, ibnutaymiya, wuxuu ku magacaabay, xalaal miiradka, beenta ah. الورع الكاذب.

Waayahaan danbe, dad badan oo Muslimiin ah, ayaa u janjeera xagga ad adayga iyo xag-jirnimada, ayaga oo u malaynaya inay arrintaasi, iimaan kooda iyo diintooda wax u tarayso, ama ay xoojinayso. Laakiin arrintu sidaas way ka duwantahay. Waxaa Nabiga ka sugnaaday, (Nabad iyo naxariis korkiisa ha ahaatee) Axaadith, badan oo uu kaga digayo, xag-jirnimada iyo lagdanka Diinta iyo Isku adkaynta arrimaha Diinta.

Ilaah waaxid ah

"والهكم اله واحدلااله الاهوالرحمن الرحىم"

**"Ilaahay waa waaxid. Kaligi ayaa abuuray cirka iyo dhulka. Ma jiro Ilaaha kale oo xaq lagu caabudi karo."**

Alle wuxuu inoo sheegay inuu mid kaliya yahay. Haddaba Alle wuxuu rabaa inuu xoreeyo bani'aadamka. Aadanaha waxaa la socda ama la xiriira baahi iyo baqdin aan dhammaanayn oo la xiriirta nuqsaanta uu dareemayo iyo inuu mar walba u baahanyahay cid kale oo caawisa. Baahidaasi waxay isugu jirtaa mid jasadka la xiriirta iyo mid ruuxda la xiriirta. Midna shirki lama ogola. Waa haddii aadanuhu rabo inuu xoroobo.

Dadkii hore ee jiray wakhtigii Nabi Muxammad la soo saaray, waxay caabudi jireen Sanam. Sanamkaas nafahaantiisa way ogaayeen inuusan wax ta'rikarin laakiin waxay ku lifaaqeen qisooyin iyo akhbaar sheegaysa inuu Alle xiriir la leeyahay, sidaas daraadeed ay suuragal tahay in Alle loo siimaro. Cibaadada noocaas ah waxay la xiriirtaa arrimaha ruuxda iyo diinta. Haddii shurako loo sameeyay waa lagafay.

والذين أتّخذو من دونه أولياء ما نعبدهم الّ اليقرّبونا الى الله، زلفى ، انّ الله يحكم بينهم، " فيما كانو فيه يختلفون"

Shirkiga kale oo nolosha adduunyada la xiriira, waa marka laguu sheego in sidii aad adduunkaan ugu noolaan lahayd loo baahanyahay in cidkale kuu sheegto. Xaaraan iyo xalaal. Waxa la diiday iyo waxa la ogolyahay. Wax fiican iyo wax xun. Waxa danbiga ah ama ceebta iyo waxa aan

ahayn. Sidii adduunkaan aad ugu noolaan lahayd. Waxaas oo dhan waxaa iska leh oo horey noogu caddeeyay Eebbe weyne. Haseyeeshee haddii ay soo baxdo quwad aadan ka maarmin oo intaas oo dhan kuu sheegaysa ama kuu sharciyaynaysa waxaad luminaysaa xorriyaddii asaasiga ahayd ee Alle ku siiyay. Waxaadna ku dhacaysaa Shirki. Adiga ayaa naftaada dulmiyay.

Aadanuhu markii uu ka ilbaxay cibaadada Wathanka ama Sanamka ah ee la xiriirta arrimaha ruuxda iyo Diinta, waxaa haddana loo sameeyay Ilaahyo kale oo u sheegaya sidii ay adduunkaan ugu noolaan lahaayeen. Waxay u sameeyeen nidaam iyo shareeco aysan Allihii cirka iyo dhulka abuuray dadkana abuuray aysan kala tashan. Waxaa halkaas ka dhashay dulmi, caddaalad la'aan iyo in adduunyadu koox yar u afduubnaato.

"أم لهم شركاء، شرعو لهم من الدّين ما لم ياذن به الله,"

Waxaa laga yaabaa in su'aal la iswaydiiyo. Maxaa ku jaban haddii aadanuhu samaysto sharcigii uu kunoolaan lahaa ama uu isku xukumi lahaa. Taasi ma shirki iyo Alle diidnimaa? Sow haddaba bilaa'aadanka kuwa ugu hormarsan oo Dimuqraadiga ah kuma dhaqmaan sharci ay iyagu samaysteen?

Waa su'aalo muhim ah. Runtiina sharaxaadda su'aalahaas halkaan looguma talagalin, laakiin aan wax yar kor maro jawaabaha su'aalahaas. Waa sax Dawladaha maanta adduunkaan aan kunoolnahay ugu wanaagsan ee horumar ka gaaray dhinacyo badan ee nolosha ka mid ah,

Sharcigooda ayaga ayaa samaystay. Laakiin marka aynu leenahay sharci wanaagsan oo horumar leh ayay samaysteen, maxaan u fiirinay? Xaggee qiyaasta ka qaadanay? (Comparing to what?)

Haddii aan u fiirino sida aan innagu u dhaqmayno iyo qaabka aan isu xukumayno iyo sida aan nahay, waa run sharci iyo nidaam keenna ka fiican ayay leeyihiin Reer Galbeedku. Mana noo qalanto inaan wax u sheegno ama aan wax ka sheegno. Laakiin marka loo fiiriyo sida Alle karrabo caalamkaan iyo aadanaha noloshiisa, wax badan ayaa ka maqan ama ka dhiman.

Nuqsaanta iyo liidnimada ku jirta qawaaniinta aadanuhu sameeyo waxaa ka mid ah:

1. Insaanku jahli iyo aqoon yari kama dhammaato, arrimaha shareecada la xiriirana waa arrimo waaweyn oo bani'aadamka noloshiisa taabanaya. Sidaas daraadeed waxaa dhici karta in aadanuhu jahli iyo aqoon yari wax u halleyo.
2. Aadanaha waxaan ka dhammaanayn inuu dan leeyahay oo maslaxo gaar ah uu fiirsanayo. Haddii sharciga loo dhiibo wuxuu ku salaynayaa sida uu rabo.
3. Sharciga fulintiisu waxay u baahantahay damiir iyo cabsi Alle laga cabsanayo, abaal marina laga rajaynayo. Haddii aadanuhu marka u horaysaba waayo cabsida Alle iyo cibaadadiisa, maxaa ku

kallifaya inuu fuliyo qawaaniin iyo shareeco aan dantiisa khaaskaahi ku jirin.

"أأنتم أعلم أم الله" "والله يعلم وأنتم لاتعلمون"

Si aadanuhu uga badbaado arrimahaas ugana xoroobo, awoodaha aadanaha kale, Alle wuxuu farayaa in isaga lagala tashado waxa lasamaynayo iyo sida loo samaynayo, markay timaado sharci dejinta. Ilaahiinnu waa mid kaliya macnahaas oo dhan ayay samaynaysaa. Marka Ilaah kaliya waxay lamid tahay, Nabad, xorriyad, caddaalad, cilmi iyo fikir wanaagsan.

قل أنّما بشرمثلكم يوحى اليّ أنّما الهكم أله واحد، فمن كان يرجو لقاء ربّه فليعمل عملا صالحا ولايشرك بعبادة ربّه أحدا"

"قل انما يوحى الي انما الهكم اله واحد فهل انتم مسلمون"

Aayado badan oo quraanka ka mid ah ayaa sugaya in Alle mid yahay ama hal ilaah jiro. Macnaha aayadahaas waa la yaqaan. Waxaa inta badan laga fahmaa shirki la'aan. Ilaahyadii carabtu caabudijireen inaysan xaq ahayn. Qofkii Alle la caabuda Ilaah kale inuu Gaal yahay. Rutii Macnahaasi waa sax. Waa mid Macruuf ah oo la yaqaan. Waana Macnaha Tawxiidka. Haddii ay jireen kuwa caabuda Asnaam sidii carabtii Nabigu ka dhashay, ku waasi way gafsanaayeen.

Sidoo kale, in Alle mid yahay waxaa laga fahmayaa caalamka uu sameeyay. Sida Cirka, dhulka iyo inta u dhaxaysa. Haddii ay jiri lahaayeen Ilaahya kale oo isaga wax la abuuray ama wax la leh, nidaamka adduunkaan sidaan ma ahaadeen ee waxaa ka dhici lahaa inqilaab iyo is khilaaf iyo is badal

"قل لوكان فيهما الهة كما يقولون اذا لابتغو الى ذى العرش سبيلا"

"لوكان فيهما الهة الا الله لفسدتا "

Qo`raxda, Dayaxa, Xiddigaha, Habaynka iyo Maalinta, Badda iyo Birriga, xilliyada kala duwan ee qalaylka iyo qoyaanka dhulka, hawada iyo xilliyada xisaabta, caalamkaan ballaaran wax inoo muuqda iyo wax inaga qarsoon, waxay tusayaan inuu hal ilaah maamulayo oo uu siiyay qaanuunka ay ku shaqaynayaan, hal nidaamna ay ku wada shaqaynayaan, iyaga oo is-waafaqsan.

Alle dadka oo dhan wuxuu u sheegay in Ilaahoodu mid yahay. Aayado badan oo Qur'aanka ka mid ah ayaa Alle ku sheegay arrintaas. Marka Alle yiri " Ilaahiinu waa ilaah kaliya" wuxuu la hadlayay Aadanaha oo dhan. Haddii ilaaheennu mid yahay, waxay ina tusaysaa in wax weyn inaga dhexeeyaan ooh al meel la inaga maamulo, waxay tusaysaa in uu jiro shay ina ama aadanaha oo dhan midaynaya, kaas oo ah halka Ilaah ee ina wada abuuray, ina wada maamula, ina wada irsaaqa, inana wada xisaabtami doona. Haddaba waxaa inaga dhexeeya hal qaanuun oo uu Eebbe adduunka ugu talagalay in lagu maamulo.

Qawaaniinta Alle u sameeyay caalamka uu abuuray waa qawaaniin is waa faqsan oo wada shaqaynaysa. Wax is jiiraya iyo wax isku dhacaya midna majirto. Xiddigaha faraha badan iyo Kawaakibta caalamka sare cammiray ilaa diqsiga iyo dixiriga dhulka kunnool waxay ku socdaan nidaam iyo qawaaniin Alle u sameeyay. Wax iska horimaanaya iyo shaqadii loo diray wax ka baaqanaya majiraan. Nidaamkaasi wuxuu tusinayaa tawxiid.

Aadanaha adduunkaan kunnool ma tixgaliyaan mana loo sheegin inay rumeeyaan waaxidnimada Alle ee ku saabsan waxa uu ka rabo dadka uu abuuray. (Insaanka). Waxaa nala baray oo nalagu tarbiyeeyay inaan kala duwan nahay. Diintu noo kala duwantahay. Sharcigu noo kala duwantahay. Dhaqanka iyo qawaaniintu noo kala duwantahay. Magacyo kala duwan aan leenahay. Wax qaraabanimo ah ama midnimo ah nalama barin. Waxaan ku barbaarnay gacanta awoodo bilaa'aadan oo kala duwan oo loolamaya, danaha adduunka iyo masaalixdooda bashariga ah isku haya. Awoodahaas iyagu iska soo horjeeday marna nooma sheegin sida runta ah ee wax u jiraan. Waxay isugu kaanna dareen wixii ay iyagu rabeen iyo wixii Alle rabay. Mid kastana wuxuu adeegsanayay magaca Alle iyo kalimaadkii Alle ama erayadii Alle, maxaa yeelay, erayga Alle loo nisbeeyo ama loo tiiriyo xoog badan ayay leeyihiin. Nufuusta dadkana aad ayuu u saamaynayaa. Qolo kasta waa inay ku difaacaan magaca Alle waxa ay rabaan. Wixii lagu difaaco oo lala xiriiriyo magaca Alle way difaacan yihiin. Sidaas ayaa

bilaa’aadanka waxaa ugu samaysmay Diino kala duwan iyo Ilaahyo kala duwan oo qoloba siday rabto ay u caabudo.

Aadanuhu malaha awood uu isku waafajiyo wax yaabo badan oo kala duwan. Jiritaankoodu wuxuu ku salaysan yahay inay iska duwaan kuwa kale ee wax la wadaaga ama la tartamaya si ay u muuqdaan oo loo garto. Qof walba iyo qolo kasta waxay u baahan tahay inay helaan masaafo u dhexaysa iyaga iyo midka kale ee la loolamaya. Jiritaankoodu waxay ku dhisantahay inay inkirto kuwa kale oo dhan. Aniga kaliya ayaa jira. Innaga kaliya ayaa xaqa ku taagan. Kuwa kale oo dhan waa baadil. Sidaas ayay ku sameeyaan jiritaankooda afkaarta basharku.

Shay kasta waxaa ka muuqanaya tawxiidka. Waxaad arkaysaa in Alle kaligi yahay. Roobka, Qoraxda, Biyahay, Hawada, xattaa xubnaha iyo qaabka Alle noo abuuray waxaa ka muuqanaya Tawxiid. Laakiin marka ay timaado qaar aadanaha ka mid ah sida ay wax u fasirayaaan ama wax u maamulayaan, waxaa ka muuqanaya shirki weyn iyo wax yaabo tawxiidka aad uga fog. Inta badan nafta daciifka ah ee aan hagaagsanayn waxay isku dayaysaa inay wax walba sida ay jeceshahay ka dhigato intii ay u dayn lahayd sida Eebbe ugu talagalay adduunka, una raaci lahayd qawaaniinta uu u dejiyay.

Halkaan waxaa isku dhex jira wixii aan annagu rabnay haddaan bilaa’aadan nahay iyo wixii Alle rabay. Mana kala saari karno. Wax kasta oo aan rabno waa in Alle rabaa si ay

xoog badan iyo caadifad u hesho. Haddii kale waxay noqonayaan wax aan annagu rabno kaliya xoog ku filan oo ay ku badbaaddana ma helayso.

Miyayna suuragal ahayn In Alle u maamulo aadanaha sida uu u maamulo cirka iyo dhulka iyo inta u dhaxaysa. Inuu insaanku iskhilaafo oo uu isdilo, ilaa ay arrintu gaarto inuu is dabargooyo ma Allaa doonaya? Haddii Alle qadarkiisa iyo xugumkiisa ay sidaas ku noqotay miyuu ku amray Kutubtii uu soo dajiyay arrintaas? Amarka Alle ee uu ku soo dajiyay "Tawreed" "Injiil" iyo "Furqaan" Ma'inaan is khilaafnaa? Ma inaan islaynaa?

Ma inaan is dabargoyno oo aan is dhamaynaa? Haddii Kawnkaan- (Caalamkaan) aan ku noolahay uu muujinayo in Alle kaliya uu maamulo, sida uu isu waafaqsan yahay oo u wada shaqaynayo iyo sida uu u gudanayo xikmadda Rabbi, Insaanku ma wuxuu tusinayaa in Ilaahyo badan oo kala duwan ay maamulayaan, oo ay isku dirayaan oo qolo walba ay raaligalinayaa Ilaaha ay rabaan. Arrintaasi waxay tusaysaa gafsanaan ku saabsan sida aadanuhu u fahmay raalligalinta Alle iyo waxa Alle karabo inay qabtaan. Waxdaaniyadda alle waxay keenaysaa midnimo ku saabsan wax kasta. Nidaam waaxid. Wada-shaqayn iyo iswaafaqsanaan iyo in qawaaniinta Rabbi dejiyay la wada raaco raallina lagu noqdo.

"ما أتّخذ الله من ولد وماكان معه من أله أذا لذهب كلّ أله بما خلق ولعلا بعضهم على بعض ،سبحان اللّه عما يصفون"

Midnimada Alle waxay tusinaysaa is waafaqsanaan iyo muran la'aan. Haddii Ilaahyo badan ay jiraan, Ilaah kasta dadkiisa wuxuu amrayaa wixii isaga laquman. Markaas ayaa waxaa dhacaya fasaad iyo halaag. Haddaba waa in aadanuhu xusuustaa inay Alle kaliya leeyihiin oo ay joojiyaan marin habaabinta dadka Alle abuuray oo ay u sheegayaan mid kasta in Alle ka rabo inuu midka kale dilo oo uu janno ku galo. Khilaafka iyo ismucaaradidu waa arrin basharku leeyahay. Waa inaan marna laga dhigin arrin Alle doonayo oo uu dadka amray.

Haddii ay ahaan lahayd inaan raacno waxa Alle raalliga ka yahay, waxaan ahaan lahayn dad aad u fiican oo nabad iyo barwaaqo kunool. Dhibta iyo colaadda waxaa sal u ah amarka Alle oo aan la fulin. Sideebay ku dhici kartaa inaan dagaal, isgumaadid iyo Nacayb aan Alle u nisbayno , innaga oo dilaylan laf Eebbe igana xarrimay dilkeeda oo aan niraahno Alle ayaa noo diray inaan sidaas yeelno. Arrintaas waxay ka horimaanaysaa xikmadda Alle. Alle waa caadil. Caddaladda iyo dulqaadka isaga ayaa ina baray. Waa inaan kaga dayanaa, Caddaaladda iyo naxariista iyo dulqaadka. Alle waa waaxid. Waxay keenaysaa inuu isku wax ina amro isku waxna inoo sheego, inoona simanyahay. In kasta oo Alle mid yahay, haddana dadkiisa wuxuu xorriyad u siiyay inay wax kala doortaan. Marka uu isagu xaqa iyo baadhilka kala tusay midna ku khasbi maayo inuu qaato ee wuxuu ku abaalmarin mid waliba midda uu qaatay, waana halka ay ka waajibaan cadaabta iyo jannadu.

Sidaas daraadeed dadka qaar ayaa doortay gaalnimo iyo dulmi. Tafsiirka ama fikradda oranaysa innaga ayaa la inoo wakiishay inaan xaqa ku soocelino fikrad sax ah ma aha ee waa in la aamino in masuuliyaddeenu tahay caddaynta iyoku oogidda xujada iyo xaqa, waayo Alle asba wuu diiday inuu wanaaga ku khasbo. Wuxuuna doortay inuu xorriyaddooda u daayo. Laakiin mar kasta waxaa sugan inaan midaysannahay oo amarka iyo nidaamka ina maamulaya iyo waxa la'inaga rabo ay mid yihiin.

Muhimmadda mawduucaan waxaa weeye inaan tixgalino wax yaabaha inaga dhexeeya oo keenaya nabadgalyo iyo is kaashi. Is kaashigaas waxaa ugu weyn inaan wanaaga isu sheegno oo diinta xaqa ah ee Alle soo dajiyay aan gaarsiino dadka u baahan. Nacaybka iyo xaqiraadda qofka kale waxaba ma soo kordhinayso. Haddii aan ogaan lahayn qiimaha waxa aan hayno runtii waan u hagar bixi lahayn. Wax walba waxaa ka muhiimsanaan lahaa inaan gaarsiino Diintaan dadka u baahan. Laakiin waan isla liidanaa. Waan isla yarnahay. Annaga iyo Kitaabka aan rumaysannahay midna uma haysanno inuu muhiim yahay. Waxaa nalaga asiibay xagga nafsadda. Mar haddii nafsadda la iska asiibana waxba ma soo harin. Qiimaha waxa aan haysanno aad uguma baraarugsanin. Maxaa yeelay, ma aannaan is barbar-dhigin la'aantooda sida ay tahay. Waxaan u qaadannay wax dabeeci ah oo aan muhiim ahayn, laakiin waxaa aad ugaranaya qofka ay kamaqantahay.

Qofkaasi aad ayuu ugaranayaa qiimaha Kitaabka Alle haddii uu helo ama uu rumeeyo. Waayo wuxuu dhadhamiyay nolosha gaalnimada iyo diin la'aanta. Mar haddii aan ka liidano xagga sancada iyo cilmiga, waxaa noo soo baxay inaannaan haysan wax aan dadka kale u sheegi karno ama aan ku faani karno- Marka macnaha faanka laga dhigo shukriga iyo mahadnaqa.

Qof ama ummad haddii nafsadda laga asiibo wax u haray malaha. Diintaan Islaamka ma matali karo qof ama ummad aan nafsaddiisu sarayn oo aysan xoog badnayn. Nafsadda xoogga leh, waa midda iimaanka leh. Iimaanku wuxuu u dhigmaa sarayn. Mana fidin karo Quraankaan qof aan nafsaddiisu sarayn. Ma fidin karo qof baahan ee aadanaha iyo waxa aadanuhu sameeyay u baahan. Waxaa loogu talagalay, kaliya qof xorroobay. Qofka ka xoroobay wixii aan Alle ahayn oo dhan. Qof sareeya oo ka sareeya adduunkaan iyo waxa dhexdiisa yaala. Dadkii markii u horeeyay u shaqeeyay Quraankaan, waxay ogaayeen qiimihiisa, wayna rumeeyeen. Laakiin qofka nafsaddiisu daciifka tahay ma qaadi karo xilka wayn ee fidinta diinta iyo ugu yeeridda dadka jidka Alle. Haddiise la helo dad sareeya oo nafsaddoodu ka sarayso maaddada addunka taalla, waxay qaadi karaan ammaanada Diintaan, wayna gaarsiin karaan dadka u baahan ee xorta ah.

Haddiiba ay jiraan dad xor ah. Runtii dhaqanka Reer Galbeedka ee hadda jira qofka wuxuu siinayaa xorriyadda doorashada. Inkasta oo qofka reer galbeedka ah uu ku shaqeeyo wax lagaliyay oo looga dhigay inuusan ka fakan

karin, haddana xor ayuu u yahay inuu wax rumeeyo iyo inuu wax doorto. Haddii uu fahmo xerada loo sameeyay ee uu ku jiro oo uusan ka bixi karin, uusanna ogayn markii loo sameeyay iyo ciddii u samaysay, wuxuu awood u leeyahay inuu wax doorto oo uu rumeeyo Allihiisii abuuray ee uu u baahan yahay.

## Raaxada nafsadda ee xagga Diinta

Kutubta Alle soo dajiyay iyo Rususha Alle soo diray Waxay wadeen hal farriin oo isku mid ah. Taas oo marba wakhtiga iyo ummadda danaheeda la waafajinayay. Sidaas daraadeed waa ummad kaliya, diin kaliya iyo Alle kaliya. Ma'baa'didaas guud waxay qofka ka caawinaysaa inuu ka nabad galo cuqdad iyo caro badan oo nafsadda wax weyn u dhimaysa.

Mawduucaan aad ayuu muhiim u yahay. Dadka oo dhan waxay u baahan yihiin inay ogaadaan xaqiiqadu waxa ay tahay ee ku saabsan wax kasta. Gaar ahaan Diinta Alle soo dajiyay. Bilaa'aadanka oo dhan waxay u baahan yihiin inay fahmaan xaqiiqada Diinta iyo waxa Alle ka rabo.

Hadda dad badan ayaa og inaan kala duwan nahay, xaga Diinta iyo sida aan Alle u caabudayno. Saas ayaa nala baray oo naloo sheegay. Dad badan oo adduunkaan ku nool ma oga in arintu sidaas ka duwantahay. Xattaa kitaabkii ugu danbeeyay ee Alle soo diray dadka rumaysan ee Muslimiinta ah qaar ka mid ah ma oga mana lagu tarbiyayn inay arrintu sidaas ka duwantahay. Mawduucaan waa muhiim. Waxaana laga yaabaa inuu yahay kii ugu horeeyay oo looga hadlo xaqiiqadaan jirta. Waxa aan ognahay oo la'ina baray oo ah inaan kala diin nahay oo kala rasuul nahay, oo kala Ilaah nahay Ma jiraan. Daliil caqli ah iyo mid Diini ah midna ma laha. Waxaan halkaan ku caddayn doonnaa inaan isku diin nahay, isku rasuul nahay, isku ilaah nahay. Waa arrin muhim ah.

Wixii Alle inaga rabay iyo wixii aan samaynay waa kala laba. Alle wuxuu ina amray inaan kaligi caabudno, shirkigana ka fogaano. Dhammaan Rususha Allana sidaas ayay amrayeen. Annaga ayaa is khilaafnay. Annaga ayaa samaysanay Diimo kala duwan iyo kutub kala duwan. Kala duwanaantu way jirtaa, wayna jiri doontaa. Waxaase gaf ah in Alle loo tiiriyo oo qolo walba tiraahdo aniga Ilaah ayaa i amray ama raalli iiga ah waxa aan samaynayo, xattaa haddii ay tahay in dadka kale oo dhan la laayo ama la baabi'iyo.

"قولوأمنّا بالله ومأأنزل الينا ومأانزل الى ابراهيم واسماعيل واسحاق، ويعقوب ، والاسباط ، ومأأوتى موسى، وعيسى، ومأأوتى النّبيون من رّبهم، لانفرّق بين احد منهم ونحن له مسلمون "

ولاتجادلوأهل الكتاب الّا بالّتى هى أحسن وقولو أمنّا بالّذى أنزل الينا وأنزل اليكم وألهنا " والهكم واحد ونحن له مسلمون"

Dhammaan Kutubta Alle soo dajiyay waxay waa faqayeen Diintii Nabi Ibraahim, 'Calayhi salaam' Rususha Alle soo dirayna waxay ahaayeen wixii Ibraahim ka dambeeyay carruurtii Nabi Ibraahim. Nabi Ibraahim iyo dhammaan Rusushii ka danbaysay waxay ahaayeen Muslimiin, sida Quraanka kariim ah uu sugayo.

"وماجعل عليكم فى الدّين من حرج ملّة أبيكم ابراهيم هوسمّاكم المسلمون"

"Idinkagama annaan dhigin diinta mid dhib badan waa diintii aabihiin ibraahiim isagaana idinku magacaabay muslimiin"'

ومن يرغب عن ملّة ابراهيم الّامن سفه نفسه، ولقد أصطفيناه فى الدنياوانّه فى الاخرة " لمن الصالحين"

“Oo yaa nici kara diinta nabi ibraahiim ilaa nin doqonoobay mooyee,!!!.dhab ahantii waan ka dooranay adduunyada isaga, aakhirana wuxuu ka mid yahay kuwa saalixiinta ah”’

"أتبع ملّة ابراهيم ، حنيفا وماكان من المشركين"

‘”Raac diinta nabi ibrahiim, wuxuu aha mid xumaanta ka iisha kama mid ahayn mushrikiinta”’

“Diintii Nabi Ibraahim, waa diin waasac ah oo aan lahayn ciriiri. Waana Diinkii Alle inoo soo dhiibay. Nabi Ibraahim ayaa Muslimiin idinku magacaabay.”

Alle wuxuu ina amrayaa kitaabka quraanka dhexdiisa, inaan toosino oo la nimaadno axkaantii “Tawreed, Injiil iyo kii innaga la inoo soo dajiyay ee Quraanka kariim ah, iyada oo naloo sheegayo inuu kitaabkaani xambaarsanyahay axkaamtii kutubtii hore ku jirtay wixii Eebbe ugu talagalay inaan innaguna ku dhaqano. Alle Wuxuu yiri.

“ ولوأنهم أقاموالتّورية والانجيل، ومأأنزل اليهم من رّبهم لأكلومن فوقهم ومن تحت أرجلهم"

“Haddii ay toosin lahaayeen oo ku dhaqmi lahaayeen, Tawreed, Injiil iyo kii iyaga xagga Rabbi looga soo dajiyay, waxaa la siin lahaa, barwaaqo aad u badan oo kor iyo hoosba waxbay ka cuni lahaayeen.”

Alle wuxuu yiri sideebay xukun kuugu soo doonanayaan iyaga oo tawreed haysta, xugumkii Allana wuxuu ku sugan yahay Tawreed.”

”وكيف يحكمونك وعندهم التّوراة فيها حكم الله“

Dhammaan Rususha Alle waxaa loo soo dhiibay mabda'a Tawxiidka. In Alle kaligi lacaabudo. Tawxiidkaas oo ah midka adduunkaan oo dhan ku dhisan yahay. Haddii ilaahyo badan jiri lahaayeen adduunkaan sida uu yahay ma ahaadeen. Sidaas daraadeed tawxiidku waa xaqiiqo caalamkaan oo dhan uu ku dhisan yahay. "Alle wuxuu yiri, ma'aannaan dirin adiga hortaada wax Rasuul ah, haddiise aan dirnay, waxaan la dirnay Tawxiid. Alle kale ma jiree aniga I caabuda" Taas ayaan la dirnay.

"ومارسلنامن قبلك من رّسول الّا نوحى اليه أنّه لاأله الّأنا فاعبدون" .

Kutubta Alle soo dajiyay waxay ahaayeen kuwa is dhamaystiraya oo is waafaqsan. Ujeedadoodu waxay ahayd isku mid. Waxayna wadeen hal farriin oo ah tawxiidka iyo waxa ka dhalanaya ama uu keenayo Tawxiidku.

Waxaan filayaa dad badan ma oga anay arrintu sidaas tahay. Maxaa yeelay waxaa muhim ahaa wixii aan ku kala duwan nahay ee muhim ma ahayn waxaan ku kulmi karno ama inaga dhexeeya. Dammaan Dadka ka hadla Diimaha ama dadka Diinta bara, waxay xoojiyaan meelaha lagu kal duwan yahay ee xoogga ma saaraan waxa laga midaysan yahay iyo waxa la isku waafaqayo. Diimuhu waxay u gacan galeen Bilaa'aadan. Balaa'aadana wuxuu leeyahay dana is khilaafsan iyo afkaar kala duwan. Si loo xoojiyo danahaas kala duwan waa in diinta daliil looga helaa. Sidaas daraadeed waxaan dhaxalnay wax inakala fogaynaya oo had iyo jeer iskukeen diraya. Xattaa waxaad arkaysaa, mararka qaarkood Muslimiinta oo iyaga

dhexdooda iskala faquuqaya. Waxaad arkaysaa Shiikh dadkiisa ku wacdinaya inaysan ku tukan Masaajika habel la yiraahdo, ama meel hebla ku yaal. Wuxuu arrintaas waa fajinayaa Diinta Islaamka ee ma oranayo aniga ayaa sidaas qaba ama ay ila tahay. Maah-maah Carbeed ayaa tiraahdo, "Haddii aad rabto in lagu aqoonsado, had iyo jeer, khilaaf kuwa kula mid ka ah"

" خالف تعرف"

Muhimmadda mawduucaan waxaa weeye in kutubta Alle soo dajiyay ay isku mid ahaayeen, isku u jeedana fulinayeen. Wixii la badalay oo ay dad ujeedooyinkooda lihi ay badaleen Qur'aanka ayaa lagu sheegay. Rususha Alle soo dirayna ay mid ahaayeen. Laakiin qaar badan oo ka mid ah bilaa'aadanka waxay u turjumeen siday ahayd diintu si ka duwan. Kutubta Alle iyo Rusushiisa waxaan ka dhignay sabab khilaaf iyo kala fogaansho. Diinta iyo rusushu waxay inoo yihiin sababtii aan kukala duwanayn oo keenaysay inaan iska soo horjeensano.

Dadka oo dhanna Diinta ma wada yaqaanaan ama Mujtahiddiin ma aha ee kaliya waxay fahmaan wixii loo sheego oo waliba ayna ka fikirin. Maxaa yeelay arrimaha Diinta ku saabsan lagama fikiri karo ee kaliya waa la rumeeyaa, waayo, diinta Eebbaa soo dejiyay isagaana waxkasta naga yaqaan.

Waa sax. Wixii Diin ku saabsan Aqliga aadanaha, laguma cabbiro ee kaliya waa la rumeeyaa. Fahamka noocaas ah laba shardi ayuu leeyay. Midka koowaad, waa inuu ku

saabsanyahay wax yaabaha Qaybka ah ee aan qacligu shaqada ku lahayn: Sida Ilaah, inuu Rasuulka soo diray, inuu Quraanka soo dajiyay, in Qiyaamu dhici doono oo la is abaal marindoono, in Malaa'ig jirto, in Janno iyo Naar ay jiraan, Jidka siraad, Miisaanka acmaasha, wax yaabahaas iyo wixii la mid ah, waa qayb. Alle kaliya ayaa og. Waa inaan sidaas ku rumaynaa. Shardiga labaad waxaa weeye, waa in la hubsado in khabarkaas ama warkaas Alle xaggiisa ka yimid.

Wax yaabaha ku saabsan siyaasadda adduunka iyo nolosha bilaa'aadanka, waxaa lagama maarmaan ah in la fahmo maslaxadda ku jirta iyo danta laga leeyahay. Arrimaha ku saabsan nolosha aadanaha iyo masaalixdiisa waa in laga fikiro oo caqliga la waafajiyo. Waa inaan marna Diinta loogu soo gabban si loo fuliyo hawlo aan maslaxad ku jirin oo dadka loo sheego in shaqadaas Alle loo hayo, waayo wuxuba wax aakhiro la xariira ma ahan waa adduun iyo hawlihi. Waa diin sidaas daraadeed waa inaad samaysaa. Waa inaad dhimataa. Waa inaad dad dishaa. Waa inaadan fikirin. Cilmi aan diinta ahayn ma jiro. Wax habbaran iyo wax yaabo la mid ah.

Kala duwanaanta Diinta ku saabsan aadanaha ayaa sameey, waana marka midna Alle amarkiisii adeeco midna ka leexdo oo hawadiisa raaco. Asal Rabbaani ahna malaha. Waa haddii Alle la adeeco ama amarkiisa la qaato. Haddiise Alle la khilaafo amar kiisana la diido, haddana horay loo sii qaato magacii Kitaabkii uu soo dejiyay iyo rasuulkii oo soo diray, waxaa samaysmaya ummado kala duwan iyo Diimo kala

duwan oo is dagaalaya. Markii ay arrintu sidaas noqoto waa hawl aynu innagu qabanay ee ma aha mana ka turjumayso wixii Alle inoo diray ama inaga rabay.

Asalka sharciga ah ee Alle ina amaray waa midnimo iyo israacid. Kutubta Alle oo dhan waxay ahaayeen isku u jeedo. Waxay ka turjumayeen tilmaantii Alle ee uu tilmaamayay aadanaha, waxaana intii hore oo dhan lagu soo koobay Qur'aanka oo isaga kaligiis ayaa hadda xaq ah cidda wax kale sheekatana waa baadil. Laakiin waaqica aan kunnoolnahay, Allana qadaray, waa inaan sheegano kutub iyo rusul kala duwan oo sameeyay xaddaarado iskhilaafsan iyo ummado tartamaya oo cadaw isku ah. Taasi waa qadar Alle oo kutimid doorashadeena iyo rabitaankeenna. Waana midda la'inagu imtixaanayo oo aan abaalka ku mutaysanayno. Khilaafka iyo kala duwanaantu waxay ku timid xorriyadda Alle aadanaha siiyay iyo doorashadooda iyaga ayaana qaadidoona mas'uuliyaddeeda maalinta Alle la hortaaganyahay ee Qiyaamaha.

" وهوالذى خلق السموات والارض فى ستّة أيّام، ثمّ أستوى على العرش، ليبلوكم، أيّكم أحسن عملا"

"وهوالذى خلق الموت، والحياة، ليبلوكم، أيّكم أحسن عملا"

Amarka Alle ee ay waajibka tahay in la fuliyo waa kan uu quraankiisa ku sheegay. Bal u dhabagal oo si fiican uga ilbuuxso Aayadahaan Quraanka.

"ولوأنّ أهل الكتاب أمنو وأتّقو، لكفرناعنهم سيأتهم ، ولادخلناهم جنّات النّعيم"

"ولوأنّهم أقاموالتّوراة والانجيل وماأنزل اليهم من رّبهم لاكلومن فوقهم ومن تحت أرجلهم، منه مأمة مقتصدة وكثير منه مساء مايعملون"

ياءيها الرّسل بلّغ ماأنزل اليك من رّبك وان لم تفعل فما بلغت رسالته، والله يعصمك من النّاس انّ الله لايهدى القوم الكافرين.

U fiirso, arrintu kuma dhisna mana ah magaca aad sheeganayso iyo Diinta aad u nisba sheeganayso, iyo waxa aad islatahay ee arrinta kusaabsan abaal marrinta Alle iyo raallinimadiisa waxay ku salaysantahay camal, ficil, iimaan, akhlaaq iyo mabaadi wanaagsan. Arrintu ma kusalaysna Midab iyo qabiil midna ee waa fulin wanaag iyo camal lasameeyo. Ma aha sheegasho iyo rabitaan, iyo male aad qabto.

Sida dhabta ah ama xaqa ah, waxaa ka turjumaya Kitaabka Quraanka ah ee ugu danbeeyay Kutubtii Alle soo dajiyay, isla markaasna Alle ilaaliyay oo wali sidii uu Alle uga soo dagay ku sugan. Kitaabka Quraanka oo ay waa faqsan yihiin dhammaan kutubtii la soo dajiyay wuxuu lee yahay sidaan:

"وأنزلنااليك الكتاب بالحق، مصدقا لمابين يديه ومهيمنا عليه ، فاحكم بينهم بماأنزل الله، ولاتتبع أهواءهم عمّاجاءك من الحقّ، لكلّ جعلنا منكم شرعة ومنهاجا، ولوشاء الله لجعلكم أمة واحدة ولكن ليبلوكم فيماأتاكم، فاستبقوالخيرات، الى مرجعكم، جميعا فينبكم بماكنتم فيه تختلفون",

"Alle wuxuu lee yahay, waxaan kugu soo dajinay Kitaabka, kaas oo xaqa k aturjumaya. Kaas oo waafaqsan wixii kutub Alle soo dajiyay isla markaasna ilaalinaya. Ku xukun dadka wixii Alle kugu soo dajiyay, hana raacin rabitaankooda aan xaqa ku dhisnayn. Ummad kasta

waxaan siinay shareeco iyo wado ay ku socdaa, oo waafaqsan xaaladdooda markaas ah iyo wakhtiga ay joogaan. Haddii uu Alle doonayo wuxuu idinka dhigi lahaa ummad kaliya. Laakiin waxaa la'idinka dhigi waayay inaad fulisaan xorriyaddiina iyo doorashadiina, si la idiin imtixaano. U tartama khayraadka. Ogaada in Alle la idiin celindoono oo uu idin kala xukumi doono wixii aad isku khilaafteen."

Runtii macna wayn ayaa ku sugan in bilaa'aadanku aqbalo mas'uuliyadda camal kiisa. Isla markaasna uu kala saaro sida uu isagu rabo iyo sida Alle xeerkiisu yahay. Runtii waa wax laga xumaado in ummaddii rumaysay Quraankaan 1430 sano ka hor, ay u fikirto sidii yahuudda iyo Nasaartu u fikiraysay waagii Quraanku soo dagayay. Waxaa Muslimiinta laga sugayay inay dhisaan xaddaarad iyo faham caalami ah oo ka sareeya casabiyadda iyo rabitaanka aadanaha.

Aayadda kor ku xusan waxaa Alle inoogu sheegayaa inaysan arrinta ugu weyn ahayn sheegasho iyo rabitaan ee ay tahay qawaaniin rabbaani ah oo Alle uu sameeyay. Ma aha sida aad rabtaan, mana aha sida ay rabaan kuwii kitaabka la siiyay. Qofkii xumaan sameeya waa laga abaal marin. Sidaas weeye Caddaaladda Alle.

Laakiin khilaaf kasta oo quraanka la khilaafo wakhti yar ayuu jiri karaa. Maxaa yeelay Quraanka Alle ayaa ilaaliyay. Taariikhdii muslimiinta waxaa dhacay xaalado Quraanka lagu khilaafay iyo bidco badan, laakiin haddana

waa lagu baraarugi jiray markaas ayaa xaqa loo soo noqon jiray. Mar haddii Quraanku ilaashan yahay oo aan isaga la badalin waxaa lahaystaa wax lagu soo hanuuno. Markastana Muslimiintu way soo noqon jireen maxaa yeelay Quraanka ayaa ilaashan. Tana waa lamid.

Waxaa wanaagsan inaad Caddaaladda Alle rumayso, intii aad rumayn lahayad in mar walba Alle adiga kaliya kula jiro, mucaaradkaagana kajiro. Yahuud iyo Nasaara ayaa midba gaar u sheegatay inay kaligood Jannada galayaan. Muslimiinta qaarkoodna mardanbe ayay iyaguna sheegteen inay kaligood Jannada galayaan ee aysan kooxa kale ee muslimiinta ah aysan galayn. Haddii Alle Yahuud iyo Nasaaraa ku eedeeyay inay arrintaas ku gafeen ma qaar Muslimiinta ka mid ah ayaa loo ogolaaday inay iyagu sameeyaan. Waa maya.

وقالو لن يدخل الجنة الامن كان هودا اونصرى، تلك أمانيهم، قل هاتو برهانكم، انكنتم " صادقين"

Kasokow sida Ayaayadaha mawduucaasi u cad yihiin, waxaan dareensanahay inay arrintaasi xambaarsantahay wax muslimiinta maanta joogta aad ugu xeel dheeraadeen. Taas oo ah is fadilid iyo isla qummanaan iyo iska soocid aadanaha kale Alle hortiisa. Taasi kuma jirin xaddaaraddii islaamka iyo mabaadi’dii wanaagsanayd ee uu la yimid.

Xaaladda runta ah ee Diimaha iyo Rususha ku saabsan waxay ka duwantahay, sida aan u rumaysan nahay. Sida xaqa ah ee Alle raalliga ka yahay, waa kutub midaysan oo asal kaliya leh oo tawxiid ah iyo Rusul midaysan oo

hadafkoodu ahaa inay dadka farriintaas xaqa ah gaarsiiyaan oo ay ka dhalanayso dad midaysan.

Horta, sideedaba, Jannada iyo Naarta Alle ayaa og ciddii mudanaysa waana shaqo Alle kaligi utaal, waxa kaliya ee innaga la inaga rabo waa inaan la imaano tilmaamaha ay leeyihiin dadka Alle uu yiri Jannada ayay xaq u leeyihiin. Hebal iyo reer hebal ayaa Jannada galaya ama cadaabka galaya in lagu murmo ma fiicna. Taas Alle kaliya ayaa og. Arrinta aan ka hadlayno waa mabda'a iyo caddaaladda Alle. Waa loo simanyahay. Qofka Muslimka ah waa muslim. Nabi Ibraahim (Calisalaam) ayaa inagu magacaybay "Muslimiim".

Marka intaas aan ku ekaano. Yaa Muslim ah? Qabiil, Midab, luqo, dagaan midna ma aha. Kaliya waxaan rumaysan nahay oo Caqiido noo ah, in dadka qaar ay cadaabka galayaan, tilmaamahoodana waa naloo sheegay, qaarna Jannada galayaan sidoo kale tilmaamohooda ayaa naloo sheegay. Kuwa ay yihiin, Alle ayaa garanaya. Taasi waa markii ay arrintu tahay xagga mabda'a iyo caddaaladda Alle. Laakiin markay tahay dagaalka innaga dhexdeeya, labadii ummadood, qabiil, kooxood, dariiqo oo is khilaaftaba, midna jannada ayay galaysaa midda kalana Naarta ayay galay. Waa sida la isu necebyahay ama la isu noco.

Markaas waxaan dagaalka soo galinay Allihii ina abuuray oo cirka iyo dhulka abuuray. Waxaa ingu fillaa inaan isaga aargoosanno ama ku dagaallanno wixii hub ah oo

gacanteenna ku jira. Waxaa gaf ah oo caddaalad daro ah, Allana aan u qalmin inaan magaca Alle, Diintiisa, Jannadiisa iyo cadaabkiisa aan ku dagaalano.

Sidaad nafsadda u garan lahayd, markay jirrantay, iyo markay caafimaad qabto

## Jirrooyinka nafsadda ee soo caanbaxay

Waxaa jira wax yaabo muujinaya niyad-jab iyo gunnimo Soomaalida ku dhacay oo hadda aad u soo caanbaxay. Haddii arrin Soomaalida ku saabsan laga hadlayo, waa caadi in la yiraahdo, “International cumminity” gu saas ma rabaan. Sidaan ayay rabaan. Haddii doorasho loo dartamayo oo dhawr qof isa soo sharaxaan, waxaa caadi ah in layiraahdo, hebal yaa wata. Etoobiya miyaa wadata. Maraykanka miyaa wata. Kenya miyaa wadata. Yaa wata!

Wax madax bannaani la yiraahdo oo qofla Soomaaliga ahi maanta haysto ma jirto. Xorriyad ma jirto. Isku kalsoonaan ma jirto. Himmad ma jirto. Alle lagu kalsoonyahay oo isaga kaliga la baryo ma jirto. Tawxiid ma jiro. Ma u malaynaysaan in sidaasi sax tahay? Ma umalaynaysaan in sidaas wanaag lagu gaarayo? Ma umalaynaysaan in sidaas qaran Soomaaliyeed ku soo noqonayo? Ma umalaynaysaan in dadka sidaas u niyo jabsan oo sidaas u fikiraya ay dawlad iyo qaran madax bannaan dhisi karaan? Ducfigu quwad ma keeno, ducfi kale ayuu keenaa. Xorriyadda iyo madax bannaanida ayaa awood iyo xorriyad keenta. Liidnimada xagga nafsadda ah, waxaa lagaga bixi karaa in Nafsadda Alle lagu tiiriyo ee aan aadanaha lagu tiirin. Soomaaliyay, markii Alle ina siiyay, waddanka geeska Africa ee badda Hindiya, iyo badda Cas ku dheeraran cidna kalama tashan. Isaga ayaa ina siiyay. Itoobiyana meesha ay hadda dagantahay Alle ayaa dajiyay. Ma

hadda ayaan dad kale kala tashanaynaa waddankeenna innaga Alle ina siiyay.

Mawduucaan wuxuu ku saabsanaa nafsadda iyo sidii loo dhisi lahaa. Sida hadda nafsaddennu tahay xiriir ayay mawduucaan laleedahay. Waxaa lagama maarmaan ah in lahelo laba arrimood:

1. Isbaddal xagga nafsadda iyo niyada ah oo Soomaali badan ku dhaca. Wuxuu ka imaan karaa, wax la arkay, wax la maqlay, wax la rumeeyay iyo dareen xagga Alle ka yimaada oo qofka nafsaddiisa dhexdeeda uu ka dareemo.
2. Jawigii dhiirigalinayay isbaddalka iyo gobonimada in la helo. Rumaynta wax cusub la rumeeyo oo laga baxo wax horay loo rumaysnaa oo aan wax tarayn, waxay dhalisaa isbaddalka xagga nafsadda iyo caqliga ku dhaca, sidii carabtii qabaa'ilka ahayd ee Nabi Muxammad u yimid ay isu badaleen oo ay u noqdeen ummad kale oo aad uga duwan kuwii horay u jiray. Damaca badan iyo dulliga nolosha adduunka la isu dulleeyana waxay sii badisaa niyo jabka iyo nafsadda daciifka.

Xaaladda hadda Soomaaliya ku jirto kagama baxayso NGO iyo UN taladeed. Kaliya waxay uga bixi kartaa nafsadda dadka Soomaaliyeed oo isbadasha oo mar kale nuurka aragta. Ilaahay arrintaas iyo midkale midna kuma adka.

## Kabidda nafsadda iyo kaalmaynta qofka

Baahiyaha qofka aadanaha ah, way badan yihiin. Rabitaankiisa iyo awooddiisuna way kala badan yihiin markasta, waxaana badan baahidiisa. Waxa uu haysto iyo waxa uu u baahanyahay, markasta waxaa badan waxa uu u baahanyahay, isla markaasna uusan awoodin.

Alle qofka rumaysan wuxuu u fidiyay meel uu magan galo oo uu usoo cararo markasta oo uu yaabo. Haddii uu qofku wax u baahan yahay, awood uu ku keensadana uusan haysan, Alle wuxuu u fidiyay, mid wax walba haysta oo diyaar u ah, markasta inuu caawiyo. Alle wuxuu yir:

يقول سبحانه" وَإِذَا سَأَلَكَ عِبَادِي عَنِّي فَإِنِّي قَرِيبٌ أُجِيبُ دَعْوَةَ الدَّاعِ إِذَا دَعَانِ فَلْيَسْتَجِيبُوا لِي وَلْيُؤْمِنُوا بِي لَعَلَّهُمْ يَرْشُدُونَ "

ويقول سبحانه،" أَمَّنْ يُجِيبُ الْمُضْطَرَّ إِذَا دَعَاهُ وَيَكْشِفُ السُّوءَ وَيَجْعَلُكُمْ خُلَفَاءَ الْأَرْضِ ۗ أَإِلَٰهٌ مَعَ اللَّهِ ۚ قَلِيلًا مَا تَذَكَّرُونَ"

"**Haddii addoomankaygu ku waydiiyaan, wax aniga ku saabsan, u sheeg inaan u dhawahay, kana jawaabayo, codsigooda iyo cabashadooda. Kaliya, waxaa laga rabaa inay aniga I baryaan oo ay warkayga maqlaan**"

Aayadd kale, Alle wuxuu ku yiri: " **Horta keebaa, ajiiba midka dhibaataysan, markuu u cawdo? Yaase dhibaatada ka fayda kan dhibaataysan markii uu baryo? Waa Alle midkaasi**"

Baryada oo loo diro Alle, waa wax wayn. Nafsadda bilaa'aadankana, waxay u tahay daawo. Waayo mar walba

waxay sugaysaa cid aan waxba waayi karin, waxna ku cuslayn inay arrinteeda wax ka qabanayso. Waxay arrintaasi nafsadda u tahay, wahel iyo wax weyn oo ay isku hallayso. Kawarran qofkii aan Alle lahayn oo markii dhibi u timaado meel uu ula cararo aan lahayn. Qofkaasi xaggee ayuu u irkanayaa? Waa inuu is dilo. Maxaa yeelay, caalamkaan iyo noloshiisa wuxuu ku noqday kali'gi, mana jirto cid u kaalmaynaysa iyo meel uu ula noqdo shidadiisa. Sida ugu fiican isaga agtiisa waa inuu nafsaddiisa dilo, xalkalena ma jiro.

Alle wuxuu u sheegay qofka isaga rumaysan, in naxariistiisu wax kasta kabadan tahay, shay kastana ay gaari karto. Dhibta isga haystana naxariista Alle ka badantahay.

ورحمتى وسعت كلّ شىئ فساكتبها للذين يتقون ويوتون الزكوة",

"**Naxariistaydu, wax kasta way ka badatay, waxaanna siinayaa kuwa iga cabsada oo zakada bixiya**"

Waxaa Ilaahay addoomankiisa u sheegay magaciisa rasmiga ah ee caamka ah inuu yahay "Naxariiste, kii naxariisan jiray, ee naxariista badnaa" Taasi waxay qofka ku kaalmaynaysaa inuu ogaado inuu meel fiican oo wax walba awoodda ku tiirsan yahay. Waxay qofka ku kaalmaynaysaa, inuu daganaado oo nafta khayr u sheego, maxaa yeelay Alle ayaa jooga. Allahaasi wuxuu isku darsaday, tilmaamo yaab leh oo aan cid kale oo leh la heli Karin. Waa naxariis badane, waa wax walba awoode, waa wax walba bixiye, waa Alle Raxmaan ah oo aad u naxariis badan oo aan marna lagu qadayn agtiisa. Qofka sidaas Alle urumaysan, lagama yaabo,

inuu rajo go'o. Lagama yaabo inuu is-dilo. Lagama yaabo inuu naxariista Alle ka quusto. Waxa ugu daran ee aadanaha wareeriyay waa noloshiisa iyo wax yaabaha la xiriira. Waa dan uu leeyahay oo uu u malaynayo inay u fiicantahay ama faa'iidu ugu jirto iyo dhib iyo shar uu ka baqayo oo uu jecel yahay inuu ka gaashaanto. Dhibaatada ugu badan ee aadanaha mashquulisay waa labadaas arrimood. Waa khayr uu rabo inuu helo iyo shar uu ka baqayo inuu la kulmo. Labadaas shay ayaa aadanaha wareeriyay oo adduun iyo aakhiraba seejiyay. Sida Alle arrimahaas u daaweeyay bal aan fiirino:

Marka hore: Alle wuxuu inoo sheegay inaynaan si dhab ah u ogayn waxa inoofiican iyo waxa inoo xun. Alle wuxuu yiri:

" وعسى أ ن تكرهو شيا وهوخيرلكم، وعسى أن تحبّو شيا وهوشرّلكم، والله يعلم وأنتم لاتعلمون"

"**Waxaa laga yaabaa inaad shay ama arrin jamataan oo aad jeclaataan, idinkoo umalaynaya inay khayr iniintahay. Waxaa kale oo laga yaabaa inaad arrin necbaataan, idinkoo umalaynaya inay shar iniintahay. Alle ayaa og waxa inii roon iyo waxa iniin daran ee idinku ma ogidin**"

Haddii ay arrintu sidaas tahay oo aad sidaas Alle u sheegay aad rumaysan tahay, waa inaadan is wareerin oo rabitaanka shay iyo nicitaanka shay kale aadan ka badbadin ee aad mar walba Alle ka warsugto kuna kalsoonaato. Taasi soo daawo weyn ma ah, waana xaqiiqo jirta. Waxbadan oo

aan innagu jeclayn oo aan khayr umalaynaynay ayaan dib ka ogaanay inaysan inoo fiicnayn. Wax badan oo aan dhibsanaynay ama aan nacaynay ayaan dib ka ogaannay inay inoo fiicnaayeen. Alle ayaa og, innagu ma ogin. Waa rasmi. Waa go'aan. Waa iimaan. Alle wuxuu leeyahay:

"أأنتم أعلم أم الله"

"**Ma idinka ayaa og mise Alle ayaa og**?"

In Alle kaligi maslaxadeena ogyahay, waxay ina siinaysaa nafsad degan, xattaa markii sidaan rabnay, wax noqon waayaan, maxaa yeelay ma hobno, sida inoo roon. Waxaa laga yaabaa inaan wax jeclaano, haddana aan danteenu ku jirin ama uusan khayr inoo ahayn. Caqiidada noocaas ah, waxay inaga yaraynaysaa, ama inaga biskaynaysaa, walwalka iyo shalaytada badan. Waxay ina baraysaa inaan Alle tala saarno oo aan ku kalsoonaano, qadartiis.

Marka labaad: Alle wuxuu inoo sheegay inuu isagu diyaar u yahay wax ka qabashada baahideenna. Aayado badan oo quraanka Kariimka ah kamid ah, ayaa Alle ku sheegay inuu isagu diyaar u yahay inuu ka qabto wixii inaga bata oo aan u taag wayno. Markasta qofka Mu'minka ah ee Alle rumaysan wuxuu haystaa gurmad joogto ah oo aan daalayn, wax waayayn. Kaliya laga rabo isaga inuu qaylo dirsado oo Alle baryo. Alle wuxuu yiri:

،" أَمَّنْ يُجِيبُ الْمُضْطَرَّ إِذَا دَعَاهُ وَيَكْشِفُ السُّوءَ وَيَجْعَلُكُمْ خُلَفَاءَ الْأَرْضِ ۗ أَإِلَٰهٌ مَعَ اللَّهِ ۚ قَلِيلًا مَا تَذَكَّرُونَ"

“**Keebaa marwalba u diyaarsan inuu aqbalo midka dhibaataysan markuu u yeero? Keebaa inika dhigay, kuwo dhulka loo dhiibay oo Alle wakiil uga ah, Ma Ilaah kale ayaa jira oo Alle la jira? Waxaa yar wax garadnimadiinna iyo shukrigiinna**”

Qofka bilaa’aadanka ah ee haysta ballan qaadkaas Alle, aamminsan Alle warkiisa wuxuu haystaa hiil joogto ah oo aan marna lawaayayn. Sidaas daraaddeed nafsaddiisu markasta way qanacsantahay, waxbay filaysaa, waxbay sugaysaa, waxbay isku halaynaysaa. Mararka xaaladdu ku adagtahay qofka mu’minka ah, waxbuu filayaa. Rajo ayuu qabaa. Wuxuu sugayaa in laga soo jawaabo arjigiisii uu Alle u qortay. Taasi waxay keenaysaa kalsooni, deganaan, walwal la’aan, baqdin la’aan iyo raaxo xagga nafsadda ah. Waana taas sirta weyn ee u dhexaysa nafsadda aan Alle ruamaysnay iyo nafsadda Mu’minka. Guud ahaan bulshada Muslimiinta ah iyo Bulshooyinka kale, waxaa u dhexeeya xaalad nafsadeed oo aad u wayn.

Markii ciidammada UNOM Soomaaliya soogaleen 1993, Waxay ka soo dageen dakadda magaalada muqdisho. Wixii u horreeyay oo ay arkeen wuxuu ahaa dad haween iyo carruur u badan oo dakadda taagan oo ciidamada waddanka yimid oo aysan ariki jirin fiirsanaya. Dadkaas wajigooda farxad ayaa ka muuqata, wayna qoslayeen. Ciidamada cusub iyo qaabkooda iyo midabkooda ayay ku qoslayeen. Dadkaas waxaa ka muuqday, macaluul, arrad,

jirro iyo cunto la'aan. Laakiin way quslayeen. Qosolkaas ayay layaabeen ciidammadii Reer Galbeedka ahaa ee waddanka soogalay. Waxay kunoqotay wax layaab leh oo aan la filayn. Dad musiibo ku dhacday oo cabsi iyo gaajo la rafaaday, haddana qoslaya oo u muuqda dad aan waxba ka maqnayn aad ayay ula yaabeen. Waxay ku noqotay, lama filaan. Waxay arrintaasi keentay inay dad badan oo ciidamadaas kamid ahaa daraaso ku sameeyaan Islaamka. Waxaana maqlay inay jireen ilaa 9 askari oo Islaamtay intii ay soomaaliya joogeen.

## Ciriiriga nafsadda (Stress)

Waxaa jira culaysyo dabeeci ah oo nafsadda aadanaha korka ka fuula. Calaysyadaas qof kasta oo bilaa'aadan ah oo fikiraya wuu la kulmaa. Waxaa luqada Ingiriiska lagu dhahaa, 'Stress'. Luqada carabigana waxaa lagu dhahaa : "الضغط"

Istarayska waa shay aan marwalba la kulano. Waxaa keena waxa aan haysano iyo waxa aan rabno ayaa kala badan. Waxa aan markaas heli karno iyo waxa aan u baahan nahay, markasta farqi ayaa u dhexeeya. Noloshaan adduunyada ee aan kunool nahay, waxay inagu khasbaysaa halgan iyo fikir iyo shaqo badan. Waxaan rabnaa inaan xallin dhibaatooyinka ina soo food saara. Waxaan rabnaa inaan gaarno waxaan tiigsanaynay ama aan rabnay. Waxaa inaga horimaanaya, xoogag lid inaku ah oo aynaan filayn.

Dadka xilka weyn saaran yahay ama iyagu isa saaray, culays tankooda ka badan ayaa soo waa jahaya. Cudurada ka dhasha

ciriirigaas iyo walwalkaas way badan yihiin. Inta badan shilalka baabuurta, dagaalada, xanaaqa iyo carada--- ilaa ay arrintu gaarto inuu qofku isdilo waxay ka dhalataa culayskaas nafsadda fuulay oo aysan qaadi karin. Oo loo yaqaan Stress.

Anbiyadii iyo Rusushii Alle soo diray waxay ahaayeen Bilaa'aadan. Way jirran jireen, wayna dhiman jireen. Nabigii anbiyada u danbeeyay ee Nabi Muxammad- nabad iyo naxariis korkiisa ha ahaatee- Waxaa soo fuulay culays aad u farabadan oo isugu jira culayska caadiga ah ee nolosha iyo culayska mas'uuliyadda risaalada. Wuxuu Nabigu marmar dareemi jiray ciriiri iyo wareer, sida aan innaguba u dareeno. Waxaan u baahan nahay, inaan fahamno oo wax ka barano sidii Alle u daaweeyay Nabigiisa. Daawadaas nabiga lagu daaweeyay, aynu innaguna u baahan nahay casrigaan maanta ah ee stress kiisu aadka u badan yahay. Hurda la'aanta iyo ciriiriga wakhtiga, waxaan uga baxsan karnaa innaga oo qaadana daawadii Nabiga la'siiyay. Dabcan kaniiniyaasha hurdada ee hadda la'isticmaalo waan qaadanaynaa haddii laga maarmi waayo. Haddiise la isticmaalo daawadii Nabiga la siiyay, waxaa laga yaabaa inaan daawo kale loo baahan.

Alle wuxuu Quraankiisa ku yiri:

",ألم نشرح لك صدرك، ووضعناعنك وزرك، الذى أنقض ظهرك"

**"Soow maanaan waa sicin qalbigaaga. Waxaan kaa dajinay culayskii dhabarka kaa culaysiyay"**

Daawada stress ku waa laba shay. Marka hore waxaad u baahantahay, in maskaxdaadu qaadi karto oo ay maamuli

karto hawsha markaa kuu taala. Marka labaad waxaad u baahantahay, inaadan culays iyo dhib dareemin. Nabiga Alle wuxuu ku daaweeyay labadaas arrimood iyo waliba amman iyo rajo-galin oo farxad iyo quwad ku abuuraysa.

Haddii aad xoogaa maskaxdaada uga fikirto ama aad ku qiyaasto culayska iyo xilka Nabiga saarnaa waxaad ogaanaysaa inuu aad u waynaa oo uu ka waynaa wax qof caadi ah uu qaadi karo. Alle –Subxaanahu- Watacaalll- Wuxuu ku caawiyay nabigiisa inuu waasiciyay muggii qalbigiisa iyo maskaxdiisa si ay u xambaarto culayskaas iyo xilkaas ballaaran. Mar haddii muggii  qalbiga la kordhiyay, dareenka culayska iyo stress-ku meesha wuu ka baxayaa. Culayskii  dhabarkiisa sharqanta ka keenay ee uu dareemayay waa laga dajiyay. Maxaa yaalay, waxaa la kordhiyay tankiisii. Sidaad ogtihiin baabuurtu waxay leeyihiin, tan iyo qiyaas ay wax ku qaadaan. Haddii  gaari la saaro wax tankiisa kabadan, wuu kala jabayaa. Sidoo kale weeye awoodda aadanuhu.

Waxaan culayska iyo ciriiriga u dareemaynaa, tan-keenna ayaa yar. Waxaa ina fuulay wax inaga tanbadan oo aynaan qaadi Karin. Waa sidaas waxaan u dareemayno ciriiriga iyo madax xanuunka ama dadka qaarkood markay culayskaas xammili waayayaan ay naftooda u dilayaan.

Markasta oo aad dareento ciriiri iyo walwal, waxaa wanaagsan inaad Alle barido oo aad Salaad tukato oo aad xusuusato, ayaadahaas Alle Quraankiisa inoogu sheegay oo aad isku daawayso, isla markaasna aad nafsadadaada xoogayso oo aad ciriiriga ka saarto. Wax yaabaha la tijaabiyay

ee culayska haddiiba nafsadda ka dejiyay waxaa ka mid ah, ama ugu weyn Quraanka Kariimka ah oo la akhriyo. Haddii aad Quraanka akhrisato, lagama yaabo inaad siiwaddo inaad walwasho ama aad fikirto. Waxaad markiiba helaysaa gurmad xagga nafsadda ah oo xagaa Alle ka yimid. Waad tijaabin kartaa.

## Nafsadda Soomaalida maanta

Xaaladda nafsadda Soomaalida maanta waa la qiyaasi karaa sida ay tahay. Haddii iyaga ahaantooda loo eego oo lagu qiyaaso, nafsaddii soomaalida ee jirijirtay ee Muslim ahayd, Soomaalida ahayd, dal iyo dawlad lahayd, xor ahayd, isla weynayd…. Soomaalidii noocaas ahayd nafsaddeeda dhaawac ayaa gaaray. Haddiise nafsadda Soomaalida labarbar dhigo, nafsiyaadka dadka kale, dawladaha ay ku qaxeen, kuwaas haddii lagu fiiriyo nafsadda Soomaalidu wali way dhisantahay, way saraysaa, wayna nooshahay.

Tusaale ahaan haddaan u soo qaadano dalka Kenya ee Soomaalidu aad ugu badantahay, way ka muuqdaan. Shaqo fiican ayay ka muujiyeen. Dadkii ay u yimaadeen oo ku soo qaxeen ayaa iyaga u shaqeeya. Wax wadaagii iyo is gacan-qabashadii ay lahaan jireen wali waa jirtaa. Marka nafsadda Soomaalida la barbardhigo nafsadaha ummadaha kale ee aan Muslimiinta ahayn, Soomaalidu wali waxay u muuqataa wax nool oo aan dhiman. Runtii noloshaas xagga nafsadda ah ee Soomaalida ka muuqata dad badan ayaa u qaadan la'. Dad badan ayaan filayn inay sidaas noqonayso arintu. Waxay filayeen dulli, dabar go iyo gunnimo aan la daawayn karin. Inkasta oo Soomaalida nabar xun gaaray oo ay tijaabisay sharkeedii oo dhan, haddana dhimashadu ma fududa. Wali way noolyihiin. Way dhaqdhaqaayaan. Way dagaalamayaan. Way is difaacayaan. Way is-gacan qabanayaan. Way is

aamminayaan. Waxbay wadaagayaan. Waxbay isa siinayaan. Sidii loogu talagalay ma'aha. Maxaa dhacay, waxaa dhacay Waxaan lafilayn:

"ومكروومكرالله، والله خيرالماكرين" ": وَمَكَرُوا مَكْرًا وَمَكَرْنَا مَكْرًا وَهُمْ لَا يَشْعُرُونَ "
"وقدمكرو مكرهم وعندالله مكرهم، وان كان مكرهم لتزول منها الجبال"

Macnaha aayadahaas Quraanka ah sidooda ayaan u daynayaa. Waxaan rajaynayaa in macnahooda la fahmayo, ayada oo aan loo baahan fasir af-Soomaali ah. Waxaan ka baqayaa inaan afsoomaaligu si buuxda u matali karin macnaha aayadahaas. Sidoo kale in Soomaalidu tafsiirka iyo carabigaba ku fiicantahay. Marka aayadahaasi waxay jawaab u yiihiin sababta sidii cadawgu rabay wax ugu dhici waayeen.

Haddana dhibta weyn ee Soomaalida ku dhacday way saamaysay nafsiyaadkooda. Soomaalidu waxay la kulantay waxaan la'arag oo la maqal. Waxaa ugu darnaa qarracanka ka dhashay Diint la'aanta iyo ruuxda dhuntay. (Culture shock) Markii hore oo aan waddammada gaalada ah u qaxaynay baahi xagga jirka ah ayaa nahaysay. Waxaan u baahnayn, cunto, daawo iyo guri. Intaasi wax weyn ayay nala ahayd. Sannado badan ayaan ku farxaynay in la qaado oo dalkannaga iyo dadkannaga katagno. Been la isku aadinayo oo labaranayo aan isku dubbaradaynay. Wax badan ayaan lacag ku gadanay inaan waddammadaas tagno. Runtii waxbay tartay arrintaasi. Laakiin waxaannaan ogayn in Ruuxduna markale qax u baahandoonto. Markale ayaan ruuxda la soo

qaxnay oo wixii jasadka loogu talagalay ay na anfici waayeen. Mar kale ayaan qax xagga ruuxda ku saabsan haddana galnay.

Ruuxdanadii ayaa wayday wixii ay u baahnayd. Iimaan, diin iyo cibaado ayay u baahnayd. Waayihii danbe waxaa caadi ahaa marka la iswaraysanayo, “Carruurtii ayaan la soo qaxay” Reerkii ayaan soo raray. Suuriya, Masar, Yaman, Dubai, Soomaaliya ayaan keenay. Alle waa isoo badbaadiyay. Erayadaasi waa caadi ilaa iyo hadda. Waxaa sidaas ka dhigay insaanku jasad kaliya ma aha. Ruux ayuu leeyahay. Baahida jasadka iyo baahida ruuxda labadaba waa in la helaa. Haddii ruuxdu meel ay u soo qaxdo u baahantahay, waa Soomaalia. Ruuxdu sanco qurux badan iyo xoolo badan ma anfacayaan. Waxaa kaliya oo anfacaya iimaan iyo cibaado Alle. Haddii taas la waayo waxaa anfacaya inay dhimato oo Alle u tagto. Wax kale oo lagu sasabi karo ma jiraan. Dhallinyaradii Maraykan iyo yurub ku dhalatay ama ku koray ayaa Muqdisho oo xabbadi ka socoto u soo qaxaya hadda. Waa Qaxii labaad ee ruuxda ku saabsanaa. Waxaan u baahannahay inaanaan xaqid xal ka dhigin ee aan waa jahno runta. Waxaan u baahannahay inaan nafsaddeenna dhisno.

Markaan nafsaddeenna dhisno dalkeenna ayaan dhisi karnaa. Haddii aan dalkeenna dhisnana qaxid danbe uma baahnin. Dalkeena ayaa waxaan u baahnayn oo dhan aan ka heli karnaa. Baahida xagga jasadka iyo baahida xagga ruuxda labadaba dalkeenna ayaan ka heli karnaa. Waxaan

u baahan nahay in nafsaddeennu markale soo noqoto oo ay xoog yeelato.

Carruur badan oo dalalka Reer Galbeedka ku dhashay ama ku koray ayaa markale Soomaaliya u soo qaxay iyaga oo aan waalidkood la tashan. Maxaa keenay? Waxaa keenay baahi xagga ruuxda ku saabsan oo aysan halkaas ka heli Karin.

Qaran- jabaka soomaalidu aad ayuu nafsiyaadka Soomaalida u saameeyay. Waa arrin dabeeci ah in dhibku nafsadda saameeyo oo raad xun ku reebo. Alle arrintaas ayuu quraankiisa inoogu sheegayaa, isaga oo inooga qisaynaya Reer Banuu Israa'iil.

" قالوأذينا من قبل أن تأتينا، ومن بعد ماجئتنا قال عسى ربكم أن يهلك عدوّكم ويستخلفكم فى الارض فينظركيف تعملون"

'Reer Banuu Israa'iil, waxay yiraahdeen, Muusow, annaga dhib ayaa nagaaray, intaadan noo imaan iyo markii aad nootimid gadaasheeda. Muuse wuxuu ugu jawaabay, waxaa laga yaabaa in Rabbi idiin naxariisto oo cadawgiinna halaago oo dhulka adinka la idiin dhiibo. Yaa og in Soomaalida cadawgeedu jabi doono oo Alle mar kale dhulkoodii u dhiibi doono. Yaa og! Alle kaliya ayaa og.

## Danbiyada Insaanku galo asal waxaa u ah nafsad jabtay

Danbiyada aadanuhu galo in badan oo ka mid ah waxay la xiriiraan xaaladda nafsadeed ee qofkaas. Horumarka iyo wanaagga uu sameeyana waxay la xiriiraan xaaladda nafsadda ee qofkaas. Sidaas ay muhiim u tahay inaan ku baraarugno xaaladda nafsadeed ee aan ku sugan nahay markasta iyo sidii aan kor ugu qadi lahayn nafsaddeenna iyo kalsoonida aan isku qabno. Tusaale ahaan, waxaa dhacda inuu ninku xaaskiisa dilo isaga oo adeegsanaya muruqa labnimada ee uu uga duwanyahay xaaskiisa. Isla markaas ayadu waa xaaskiisii uu jeclaa oo uu lawadaagayay jacaylka iyo galmada jinsiga ah. Xaaladda nafsadeed ee uu markaas ninkaasi ku sugan yaahy, waa xaalad noocee ah?

Marmarka qaarkood, waxaa dhacda inaan xoog u isticmaalno carruur yar yar oo aan aabbe u nahay ama hooyo unnahay. Xaalaadka noocaas oo kale ah oo aan marmar kusugan nahay waa xaalaad nafsadeed oo aad u liidata oo aan caqliga lagu fahmi karin. Mararkaas oo kale, waxaa jirta rajo xumo iyo quus. Waan is dhiibnay. Masuuliyaddii ayaan dhuminay. Wax aan waxba ina tarayn ayaan wax tar ka raadinay. Waa xaalad nafsadeed oo khatar ah. Dadka qaarkood iyaga ayaa is dila markaas oo kale. Wax yaabahaas cilmiga nafsadda aadanaha ku saabsan ayaan halkaan uga hadlaynaa. Ujeeddadu waxaa

weeye in isbadal weyn ku duco nolosheenna tayadeeda iyo qaabka aan u noolnahay ama aan u fikirayno.

"انّ الانسان، خلق هلوعا، اذامسّه الشّرّ جزوعا، واذامسّه الخيرمنوعا، الّا المصلّين، " الّذين هم فى صلاتهم دائمون" ألايات

Sida aynu rumaysannahay, nafsadda bani'aadamka Alle ayaa abuuray. Quraanka kariimka ahna Alle ayaa soo dejiyay. Waxaan rabnaa inaan eegno oo oggaano, sida Islaamku ugu talagalay:

(1) In nafsadda bani'aadamka la dhiso oo loo wanaajiyo.

(2) Sida loo daaweeyo marka ay jirrato iyo waxa lagu daaweeyo.

Dhammaan buuggaan qoraalkiisu labadaas arrimood ayuu ku wareegayaa. Run ahaantii, farqi wayn ayaa u dhexeeya, qaabka aan rabno ama aan isku dayayno inaan u daraasayno Cilmiga nafsadda aadanaha, iyo qaabka Culummada cilmu-nafsiga ee hadda jira ay u daraaseeyeen. Culummada Cilmu-Nafsiga ee hadda jira, waxay tix raaceen wixii ay Insaanka hab-dhaqankiisa ka arkeen ama ay ka ogaadeen, kadibna waxay ka sameeyeen culuum la tixraaco oo nafsadda ku saabsan. Runtii wax weyn ayay ka ogaadeen ama ay ka qoreen mawduucaas, laakiin kulligi wuxuu ku saabsan yahay, tajrubada iyo baaridda aadanaha. Wax u dhow iyo wax u dhigma midna ma aha, marka loo eego tix raac duruusta Quraanka ee ku saabsan nafsadda aadanaha. Waxay isu yihiin, wax Allahii aadanaha abuuray uu sheegay iyo bani'aadamku ogaaday

ama sheegay. Culumada cilmu-nafsigu ma tixraacin mana rumaysnayn intooda badani Quraanka. Sidaas daraadeed ma oga xirriirka ka dhexeeya Cilmiga nafsadda iyo kitaabka Alle soo dajiyay ee quraanka kariimka ah.

Daraasadaan waxay ku timid si aan ulakac iyo qasad midna ahayn. Markii hore si caadi ah, ayaan Quraanka u bartay, una rumeeyay. Ka dib ayaan aqoon kororsi u bartay cilmu nafsiga casriga ah. Ma aanan garanayn xirriirka layaabka leh ee ka dhexeeya labadaas mawduuc- Quraanka iyo cilmu-nafsiga-. Kadib markii aan wax ka fahmay cilmu nafsiga ayaan markale ku baraarugay macnaha qoddoda dheer ee Quraanka kariimka ah. Sidaas ayay ku timid fikradda ah inaan qoro buug Afsoomaali ah ee cilmu-nafsiga dadka baraya kuna baraya dariiqada Quraanka kariimka ah ee Alle soo dajiya.

Waa dariiqo cusub oo hadda la helay oo horle. Maxaa yeelay, Quraanka kariimka ah iyo tafsiirkiisa waxaan u adeegsan jirnay kaliya Iimaan, Cibaado, Shareeco iyo wixii la mid ah, laakiin ma aynaan gaarin inaan u adeegsanno, si ulakac iyo qasad ah arrimaha nafsadda iyo cilmigeeda ku saabsan.

Hadda waa Quraankii oo markale loo adeegsanayo, waxa loo yaqaan cilmu-nafsi. Maxaa yeelay Nafsadda Alle ayaa abuuray, Quraankana Alle ayaa soo dajiyay. Sir weyn oo aan horay loo arag ayaan fahmi doonaa. Markii aan dhaqan galinnana wax weyn ayaa iska badalaya sida hadda

arrimuhu yihiin, dhinac walba. Ku soo dhawaw Cilmu-Nafsi ku salaysan Quraanka kariima ah.

## Bakhaylnimadu waa xaalad nafsi ah

Bakhaylnimadu waa baqdin nafsadda ku jirta. Waxay kala weyntahay, wayna kala yartahay. Waxay ka simantahay khatarta ay leedahay. Haddii mar cudurkaasi nafsadda ku dhasho, asaageed ayuu ka reebayaa. Wuxuu isugu jiraa bakhaylnimo wajiga furan lagu bakhaylo, hadalka fiican lagu bakhaylo, wakhtiga lagu bakhaylo, ixsaanka lagu bakhaylo, cibaadada Alle lagu bakhaylo, xoolaha lagu bakhaylo, ilaa ay arrintu gaarto in carruur la dhali waayo si looga fogaado in wax la siiyo.

Haddii Insaanku bakhayl yahay wax ma bixin karo waxay rabtoba hanoqotee. Xataa tilmaan ma bixin karo. In qof lunsanaa tilmaan la siiyo qalbi iyo niyad iyo wakhti ayay u baahan tahay. Bakhaylku wax ma gudbin karo. Inkasta oo dabeecadaha Insaanka ay bakhaylnimadu ka mid tahay, haddana iimaanka ayaa daaweeye. Alle wuxuu yiri:

"وأحضرت الانفس الشّح "

**'Nafsadda aadanaha waxaa loo soo xaadiriyay bakhaylnimo"**

Naftu mar walba waxay ka baqaysaa inay wax waydo. Baqdintaas mustaqbalka ayaa bakhaylnimada keenaysa. Bakhaylnimadaas nafsadda lagu dabeeceeyay Alle ayaa dawayn kara. Bulshada Muslimiinta iyo Bulshada aan Muslimka ahayn si cad ayay ugu muuqataa, farqiga u

dhexeeya ee ku saabsan baqdinta faqriga iyo bakhaylnimada. Haddii aad qof muslim ah, dayn waydiisato ama sadaqo waydiisato kulayaabi mayo. Inuu ku aamino oo dayn kugu yeeshana waa suura gal. Halka bulshooyinka aan muslimiinta ahayn, ay aad uga muuqato foolxumada ka dhalatay baqdinta faqriga. Dadka oo dhan faqri ayay ka baqayaan. Wax is aamminaya iyo wax wax isa siinaya midna ma jiraan. Kala duwanaanta arrimahaas ku saabsan waa baqdinta faqriga iyo baqdin la'aanta.

Mujtamaca Muslimiinta ah, waxaa laga daaweeyay mushkuladda bakhaylnimada. Haddii aad isu fiiriso, mujtamac muslimiin ah iyo mujtamac aan muslimiin ahayn, waxaad arkaysaa farqiga bakhaylnimada nafsadda inay ku kala duwan yihiin. Wuxuu Alle yiri:

"ومن يوق شح نفسه ، فالئك هم المفلحون"

Marka lagaa ilaaliyo nafsaddaada bakhaylnimadeeda waxaad diyaar u tahay inaad khidmo qabato oo adiga oo aan waxba ku badalan aad mujtamaca u khidmayso, xoolahaagana aad dadka u baahan siiso. Haddii bakhaylnimada nafsaddaada lagaa ilaaliyo, waxaad qabanaysaa, khidmad aad Alle ku caabudayso. Dhammaan cibaado oo dhan waxay ka midaysantaahy, waa midiidinnimo Alle midiidin loo noqdo. Waa wakhti, naf, iyo maal la bixinayo. Waxaa hawshaas qaban kara oo kaliya, qof bakhaylnimada naftiisa laga ilaaliyay.

Cilladda bakhaylnimada ee aadanaha lagu dabeeceeyay Alle kaliya ayaa nafsadda ka daawayn kara. Haddii

cilladdaas bakhaylnimada laga daaweeyo nafsadda waxuu qofku awoodayaa inuu xataa nafsaddiisa bixiyo oo uu khidmadda Alle iyo ummaddiisa u bixiyo. Ummadaha Muslimiinta ah way ka dhaqaale yar yihiin ummadaha gaalada ah, haddana dadka Muslimiinta kuma badna dadka dhaqaale ahaan dulloobay oo aan waxba ka sugayn mujtamaca intiisa kale.

Cilmu-nafsiga dhabta ah waa kii Allihii nafsadda abuuray uu keenay. Allaha nafsadda abuuray ayaa garanaya wax yaabaha lagu daaweeyo. Markaas ayuu soo dajiyay Aayaadka bakhaylnimada daawaynaya.

## Dhibtu waa furaha guusha

Khasaaraha ina gaaray ee xagga nafsadda, xoolaha, cilmiga, sumcadda, sharafta, horumarka iyo nidaamka ah, aad ayuu u wayn yahay. Si aan uga kaban karno ama aan uga biskoon karno ama aan u illaawi karno ma jirto oo aan ka ahayn inaan fasir kale iyo macna kale siino. Alle wuxuu diiday in lagu sheego inay dhinteen dadkii ku dhintay dagaalkii 'Uxud'. Wuxuu qur'aankiisa ku yiri:

" ولا تقولو لمن يقتل فى سبيل الله، أموات، بل أحياء عند ربهم، يرزقون فرحين بماااتاهم الله من فضله"

**"Haku sheeginina kuwii lagu dilay dagaalka Jihaadka ah, inay dhinteen. Way noolyihiin. Alle agtiisa ayay joogaan. Waa la arzuqayaa, wayna faraxsan yihiin. Waxay ku farax sanyihiin wixii Alle siiyay iyo sida loo soo dhaweeyay"**

Waxa kaliya ee aan uga kaban karno wixii inagaaray, waa innaga oo dhinaca kale u rogna. Waa innaga oo ka barana dhibteenna wax aan dadka kale baran. Sida kaliya oo aan hanti ugu- badalikarno wixii inagu dhacay waa innaga oo baranna lidkeeda. Khilaafkii waa inaan soo saarno daawadiisa. Dagaalada sokeeye waa inaan helno xalkooda. Dalkeenna aan hagranay, khiyaannay, xadnay waa inaan daacad u noqonno oo dib u dhisna. Dadka baahan ee jahliga, gaajada iyo cudurada la il-daran waa inaan gargaar u fidinaa. Waa inaan joojinno hadda erayada dulliga iyo

ducfiga. Waa inaan joojinno inaan ku dhawaaqno, erayadaan:

'Waan buruburnay. Soomaaliya waa dal burburay. Burburkii ka hor, Dal malihi. Dawlad malihi. Bulshada caalamku hanna soo gaaraan. Bulshada caalamku way diideen. Arrintaas ma ogola. Yaa wata? Ninkaas sharaxan oo madaxtinnimada doonaya yaa wata? Erayadaas iyo kuwa la midka ah oo ay kamuuqto quus, isdhiibid, rajo la'aan, isla liidasho waa inaan joojinno.

Kawarran markii Alle inagu abuuray dhulka Soomaaliya, Raas-casayr ilaa Raskanbooni, haddii bulshada caalamka lawaydiin lahaa oo la oran lahaa dhulkaas noocaas ah, Soomaali ma siinnaa? Maxay ku jawaabi lahaayeen? Bal malee oo qiyaas waxa jawaabtoodu noqon lahayd. Taas waxaan uga jeedaa inaad ogaatid in caalamkaan meel kale laga maamulo. Dhammaan aadanuhu inuu isku mid yahay. Naxariista Alle u baahan yahay. Alle abuuray, wax u qaybiyay, qolowalbana meesha ay dagantahay Alle u gartay oo ku abuuray. Waxa ay is dheeryihiin waa wax ay ku gaareen dadaalkooda iyo fikirkooda. Waa inaan joojinno gunnimada iyo is dhiibidda. Waa inaan Soomaali noqonnaa. Waa inaan nafsaddeenna xoojinnaa oo aan ku xoojinnaa aqoonsiga Alle iyo inaan isaga caabudno oo aan addoon u noqonno.

Waxa aadanu haysto maanta oo sanco iyo qalab ah, waxay ku yimaadeen dhib dhacay. Kulaylka jawiga oo aadka u sareeya wuxuu dhalay airconditions-ka.

Cuduradii aadanaha ku dhici jiray, waxay keeneen daawo iyo cilmi cusub. Safarka fog oo bilaha iyo sannadaha qaadan jiray, wuxuu keenay in diyaarad la hindiso. Qabowga habaynkii waxay keentay guryo la dhisto. Dagaaladii adduunku soomaray waxay keeneen in la fikiro iyo in hub khatar ah lasamaysto. Waxkasta oo aan hadda haysanno waxaa keenay dhib jirtay iyo baahi markaas taagnayd.

Haddii aan wax fahamno dhibteenna waxaan u badali karnaa faa'iido. Khasaarihii waynaa ee ina gaarayna waxaan u baddalikarnaa cilmi iyo waayo aragnimo iyo xaddaarad. Marba waa sidii aan ka dhigano. Haddii aan u qaadanno, carayn iyo tijaabo waan ka kabanaynaa. Wixii ina gaarayna faa'iido ayaan u baddalaynaa. Wixii inagu dhacay iyo wixii aan la kulanay 100% khasaare iyo jab ma ahayn. Wax un khayr iyo wanaag ah ayaa ku jiray. Sikale haddii loo dhaho, dhibtii ina gaartay sida kaliya ee aan uga soo kaban karno, waa innaga oo dhinaca kale u wareejinna oo faa'iido, waayo aragnimo iyo cilmi aadanuhu ka faa'iidaysto u baddalna. Waan yeeli karnaa sidaas.

" وعسى أن تكرهو شيا وهوخيرلكم، وعسى أن تجبّو شيا وهوشرّ لكم، والله يعلم وأنتم لاتعلمون"

Gabi ahaan khibraddii aan helnay 20 kii sano ee tagay, aan u badalno dhinaca kala oo aan ka faa'iidaysanno, aan wax ka barano. Aan la soo noqonno nafsaddeennii saraysay ee Soomaalida ahayd oo aynu markale noolaano.

Kalimaadka aan buuggaan ku qoroyay, waxaan Alle karajaynayaa inay sabab u noqdaa faham iyo baraarug cusub oo keena inaan mar kale noolaanno. Cilmiga nafsadda la xiriira ee Diinta Islaamka laga qaatay, Soomaalida wax weyn ayuu ku soo kordhinayaa. Cilmiga nafsadda ee hadda suuqa yaal waa khibrad iyo u dhabagal aadane sameeyay. Uma dhigmo mana gaari karo cilmiga nafsadda ee Alle kitaabkiisa laga tixraacay. Waa wax aduunyada ku cusub. Maxaa yeelay wixii cilmi lagu magacaabo, waa mamnuuc in Alle iyo diin loo celiyo. Haddii arrintaasi makaanikada run ku tahay, nafsadda aadanaha run kuma aha. Alle kaliya ayaa nafsadda garanaya. Isaga ayaa abuuray. Ma arkin mana helin cilmi nafsi shareecada Alle ku salaysan oo nafsadda la fahmayo wixii Alle ka sheegay. Waxaan rajaynayaa in buuggaani wax yaabaha cusub ee ilbaxnimada iyo waayo aragnimada Soomaalidu soo kordhisay ka mid noqdo.

## Adkaysiga iyo sabirku waa xaalad nafsi ah

Ayaayadaha Makiga ah oo iimaanka dhisaya ee soo dagayay, sannadihii Nabigu (NNkh) Maka joogay, waxay ku saabsanaayeen in nafsadda Insaanka la dhiso oo loo diyaariyo xil weyn iyo inay u adkaystaan Imtixaanka.

Imtixaanka nafsadda aadanuhu wuxuu u qaybsamaa laba qaybood. Mid waa in laga adkaado oo mabda lagu maamulo, wax yaabaha nafsadda lagu abuuray, sida shahwaadka, xoolo jacaylka, raaxo jacaylka, xukun jacaylka, aargoosi doonka iyo wixii la mid ah. Ma dhicin taariikhda Insaanka mar caqliga iyo mabda'u ka adkaadeen rabitaanka nafsadda, mar aan ka ahayn wakhtigii Diinta lagu maamulayay aadanaha. Markaas kaliya ayuu xorriyaddiisa aadanuhu qaatay oo uu ka xoroobay dhammaan rabitaanka nafsadda, sida shahwada jinsiga iyo xoolaha. Waa markii kaliya ee insaanku xor noqday oo uu ka xorroobay, wax yaabaha hadda aadanaha maamulaya.

Imtixaanka kale ee ay nafsaddu ku guulaysatay wakhtigii Islaamku quluubta maamulayay, waxaa ka mid ah, dhimashada, dhaawaca, waayidda qof qaraabo ah, gaajada, harraadka, cabsida iyo wax yaabaha la midka ah. Alle wuxuu Quraankiisa ku yiri:

“ولنبلونّكم بشيئ من الخوف، والجوع ونقص من الاموال، والانفس، والثّمراة،
وبشّرالصّابرين، الذين اذاأصابتهم مصيبة، قالو أنّا لله، وأنّا اليه راجعون"

Marka kaliya ee insaanku heli karo nafsad qani ah ee isku filan ee aysan saamaynayn duruufta ku hareeraysan iyo

xaaladda muuqata, waa marka uu helo, iimaan. Marka kaliya ee uu Insaanku ka samaray, dhaldhalaalka adduunka iyo rabitaanka nafsadda waa marka uu Alle rumeeyay. Marka kaliya ee uu Insaanku Insaan noqonayo, waa marka uu qaato qaabaynta nafsadda ee rabbaaniga ah. Waa marka uu bixin karo dhammaan xoolihiisa Alle daraadi. Waa marka uu karo inuu iska cafiyo qof dulmiyay oo uu san ka aargoosan. Waa marka uu baahidiisa shahwada uga tagi karo Alle darti. Waa marka uu gaajo iyo dhib badan xammili karo Alle darti. Waa markaas marka uu qofku haysto nafsad xooggan oo dhisan.

"وعن أبي هريرة قال: قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: ((سبعة يظلهم الله في ظله ،يوم لاظل إلاظله: الإمام العادل ،وشاب نشأ في عبادة الله، ورجل قلبه معلق في المساجد، ورجلان تحابا في الله: اجتمعا على ذلك وتفرقا عليه، ورجل دعته امرأة ذات منصب وجمال فقال: إني أخاف الله تعالى ،ورجل تصدق بصدقة فأخفاها حتى لاتعلم شماله ماتنفق يمينه، ورج لذكرالله خالياً ففاضت عيناه)) رواه البخاري ومسلم

Dawladdii Muslimiinta ee IImaanka ku dhisnayd, laaluush ma lahayn. Jaajuus lacag cadawga ka qaata malahayn. Khidmada loo qabanayo dadka iyo diinta shuruud kuma xirnayn. Dad nafsadda ka dhisan waa sidaas.

Haddii nafsaddu dhisan tahay, iimaana ku dhisantahay, cibaado Alle la caabudo ku dhisan tahay, waxbay dhisi kartaa. Adduunkaana waxbay ka badali kartaa. Xaddaarad ayay hoggaamin kartaa. Shay kasta xaqiisa ayay siin kartaa.

Marka Nafsad xor ah la helo, ayaa waxa kale oo dhan la rajaynayaa. Immisa qoys ayaa ku duntay khiyaano dhex martay laba qof oo is qaba. Immise nin ayaa koriya carruur aysan dhalin. Waddanka Kenya oo Africaan ah, ayaa

joornaalku qoray boqolkii 50% inay koriyaan carruur aan dhiigooda ahayn ee niman kale dhaleen. Arrintaasi waxay ka dhalatay nafsad daciif ah oo aan mus'uuliyad qaadi karin. Mas'uuliyadda iyo cahdiga oo la ilaaliyo waxay u baahantahay nafsad dhisan oo diyaar ah. Markii Alle nabigiisa soo saaray, muddo dhawr iyo toban sano gaaraysa ayuusan wax waajibaad ah amrin ee uu nafsadda dhisayay. Kadib markii nafsadda si xoog leh loo dhisay, ayaa la amray salaadda, soonka, zakada, jihaadka, xajka. Maxaa yeelay markaas waxaa jiray nafsad dhisan oo Alle diyaariyay.

Daroogada noocyadeeda kala duwan, waa cuntada nafsad gaajaysan. Nafsaddu markay baahato, raashin ma cunto. Raashinka jirka ayaa u baahan. Nafsaddu wax kale ayay u baahantahay. Markay nafsaddu waydo wixii ay u baahnayd, sida iimaanka, cibaadada, iyo xirririka Alle ayay isku maaweelisaa daroogada. Dadka daroogada isticmaala kulligood waxay ogyihiin, in daroogadu ay xuntahay oo caafimaadkooda iyo noloshoodaba ay kharibayso. Haddana iskama dayn karaan. Maxaa yeelay, way baahan tahay ruuxdu. Daroogada ayay isku maaweelinaysaa. Haddii aad rabto inaad meesha ka saarto isticmaalka daroogada, waa inaad nafsadda xoojiso. Si aad nafsadda ku xoojin kartana ma jirto, haddii aadan ku shubin Progaraamkii Alle ugu talagalay. Alle wuxuu quraankiisa ku yiri.

"ألابذكرالله، تطمئنّ القلوب"

## Fasirka dhibka Soomaalida

Wixii inagu dhacay sidee u fasiraynaa? Sidaan u qaadanno ama u fasirno nafsaddenna ayay raad ku yeelanaysaa. Haddii aan ka dhigno, waayo aragnimo iyo cashar aan baranay, isla markaasna ka faa'iidaysanno oo horay uga socono, waxay inoo noqonaysaa faa'iido aan ku baranay, xumaanta colaadda iyo dagaalka iyo dhibta ay leedahay siyaasad la isku khilaafay in dalka oo dhan loo baabi'yo.

"عجبا لامر المومن، انّ أمره كله لخير، وليس ذلك لاحد الاّاللمومن، ان أصابه خيرشكرفكان خيرا له، وان أصابه ضرّاء صبر فكان خيرا له"

Halgankii Muslimiinta ee Nabi Muxammad (Nabad iyo naxariis korkiisa ha ahaatee) uu hoggaaminayay tusaale iyo ku dayasho ayaa inoogu sugan. Dadkii dagaalka ku dhintay, waa la diiday in la dhaho way dhinteen. Dhimashada, dhaawaca, gaajada, cabsida, ciriiriga xoolaha, waxaas oo dhan fasir ka duwan kii loo yaqaannay ayaa la siiyay. Dhimashadii iyo mowdkii waxay noqdeen Shahaado. Xoolihii la bixinayay, waxay noqdeen dayn Alle lasiinayo, nolosha aakhiro waxay noqotay inay ka fiicantahay midda adduunyada. Fasirka noocaas ah wuxuu ka buuxaa quraanka kariimka ah.

Dadkii Muslimiinta ahaa ee wakhtigaas noolaa dhibta, dhaca iyo dhimashada uma aqoon sida aan hadda unnaqaano. Umana fasiri jirin sida aan hadda u fasirno.

Haddaba arrimuhu waa sida loo qaato. Waa sida loo fasiro. Haddii khasaaraha faa'iido loo fasiro faa'iido ayuu naqonayaa nafsadda agteeda. Haddii Alle fasirkaas siiyayna, waa sidii uu u sheegay. Arrin sida loo qaato, laga dhigo, lagu fasiro wax badan ayaa ku xiran. Waxaan u baahannahay, inaan xaaladdeenna hadda fasir kale siino, si kale u qaadanno. Kana faa'iidaysano.

Taasi waxay keenaysaa inaynaan niyo-jabin oo aynaan dulloobin. Waxay keenaysaa inaynaan rajada dhumin, inaynaan is dhiibin. Dulliga baryada iyo u shaqaynta ajendada dawladaha ajnabiga ahna aan ka waantowno. Nafsadda xoogga leh oo dhisan oo caafimaadka qabta waa muhim. Waa inaan sidaas ogaano. Dulliga iyo is miskiiminta iyo kukalsooni la'aanta Ilaahaaga, naftaada, dadkaaga, diintaa, kuma anfacayso. Waa inaad ka taxadartaa niyo jabka, iyo isliididda. Waa inaad Alle ku kalsoontahay. Waa inaan ogaano in la kufi karo, in la kacana ay daruuri tahay. Waa inaan wax kabaranaa dhibaatada inagu dhacday oo aan ka faa'iidaysanaa. Waa inaan ka baranaa sida ummad la isugu dirikaro, loo qaybin karo, loo kala dili karo, loo dumin karo, haddii aysan diyaarsanayn oo aysan dhisnayn. Waa inaan cashar ka qaadano wixii inagu dhacay.

Somali Library

Buugaan iyo Buugaag kale ee

ku qoran Luqadaada Hooyo ee **Af-Soomaaliga**

waxaad ka heleysaa

# Somali Library

Fadlan Booqo Boga Telegram-ka

https://t.me/Somalilibrary

liibaanwaasuge